# TAARIIKH



## FASALKA SHANAAD

## 5

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO BARBARINTA
XAFIISKA MANAAHIJTA

F.A.

# TAARIIKH

## FASALKA

## SHANAAD

## 5

**Xafiiska Manaahijta**

*Waasaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta*

*Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya*

Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho

DAABACAADDII LABAAD

Waxaa lagu daabacay Madbacadda Qaranka
Xamar, 1976.

# HORDHAC

*Buuggani waa mid la socda manhajka taariikhda ee dugsiyada dhexe. Waxa loogu tala galay fasalka shan-aad ee dugsiyada dhexe ee Jamhuuriyadda Diimuqraadiga ah ee Soomaaliya.*

*Ardayda buuggan loogu tala galay muddo ayay haatan Af Soomaali wax ku soo baranayeen, sidaa darteed waxa aanu ku rajo weynahay in aan dhibaato kala kulmi doonin.*

*Buuggu wuxu koobayaa taariikhdii u dhexaysay markay dhacday boqortooyadii Ruum ilaa markay adduunka ka dhasheen, kana hirgaleen kacaannada horusocodka ah ee ku dhisan mabda'a hawl iyo hantiwadaag.*

*Xafiiska Manaahijtu wuxuu u mahad naqayaa qorayaasha buuggan oo ah Maxamed Xaaji Xasan Geelle (Bashiir) iyo Ibraahim Maxamuud Abyen, sawiryahaanka Idriis M. Cabdillaahi iyo garaacayaashii suurageliyay soo saaridda buugga.*

*Mahad gaar ah waxa uu xafiisku u naqayaa Cabdiraxmaan Carte Qaalib iyo Axmed Faarax Ibraahim oo taageero weyn ka geystay habaynta buugga.*

*Waxa mahad gaar ah leh shaqaalaha Madbacadda Qaranka oo si aad ah noola shaqeeyey.*

BASHIIR FAARAX KAAHIYE
MAAMULAHA XAFIISKA MANAAHIJTA

# TUSMADA BUUGGA


HORDHACA TAARIIKHDA CUSUB ..... 1 — 9

1. Habkii Diiniga ahaa ..... 10 — 11
2. Waayadii Fufka ..... 11 — 18

Xiriirintii juqraafiyada dunida iyo ka faaii'deysigii dalka Yurub ..... 19

1. Diyaarinta juqraafiyada dunida ..... 19 — 20
2. Sababihii soo dedejiyay xiriirinta juqraafiyada dunida ..... 21
3. Helitaankii qaaradda Ameerika ..... 21 — 23
4. Qaybintii dunida ee boobka ..... 23
5. Badmareenka Faaskodagaama ..... 23
6. Badmareenka Majilaan ..... 24
7. Xiriirinta juqraafiyada dunida iyo siyaabihii dalballaarsiga ee dawladaha Yurub ..... 24 — 27

KACAANKII WARSHADAHA ..... 28

Kacaankii warshadaha ..... 28 — 29
Sida uu ku yimid magaca ..... 30 — 34
Waxyaabihii dhaliyay kacaankii warshadaha ..... 34 — 38
Tusaale ku saabsan sida uu u bilaabmay kacaankii warshaduhu ..... 34 — 44

GANACSIGA DADKA ..... 44

Ganacsiga dadka ..... 44 — 45
Bilowgii addoonsiga iyo sababihii ..... 45 — 47
Geddiskii dadka reer Afrika ..... 47 — 49
Tiriddii geddiska dadka ..... 49
Cirib-reebkii geddiska dadka ..... 50 — 54

GUMEYSIGII REER YURUB ..... 54

Gumeysigii reer Yurub ..... 54 — 55
Gumeysi waa maxay ..... 56
Duulaankii gumeysatada ..... 57
Hantigoosiga warshadleyda ..... 57 — 58
Dano dhaqaale ..... 58 — 59
Horumarinta hubka ..... 59 — 60
Talis gumeysi ..... 60 — 63

KACAANKA FARANSIISKA ..... 63 — 64

Cudurka dhaqanka ku jirey ..... 64 — 65
Wacyiga iyo kartida cusub ee faransiisku soo gaaray 1789. ..... 65
Waagii Maan ifka ..... 65
Waxyaabihii kacaanka qarxiyay ..... 66 — 68
Yurub iyo kacaanka ..... 69 — 73

KACAANKII RUUSHKA ..... 73 — 74

Asbaabta gaarka ah ee keentay kacaanka Ruushka 1917 ..... 74 — 76
Kacaankii 1905tii ..... 76 — 77
Kacaankii iyo dagaalkii dunida 1914 — 1918 ..... 77 — 80

KAÇAANKII HANTIWADAAGGA EE DALKA SHIINAHA 1949 ..... 81

Kacaankii hantiwadaagga ee dalka Shiinaha ..... 81
Waayihii gumeysiga ..... 82 — 83
Hoos u dhicii dhaqaalaha ..... 83 — 84
Halgankii gobannimadoonka ..... 84
a) Dhalashadii Jamhuuriyadda ..... 84
b) Kacaankii waddaniyiinta ..... 84 — 85
Dawladdii Chiang-kai-shek ..... 85
Xoogeysigii shuuciyiinta ..... 85 — 86
Kacaankii Hantiwadaagga ..... 86 — 90

CUTUB I

## HORDHACA TAARIIKHDA CUSUB

Si ay dadka taariikhda qoraa ama bartaa u hawl yareeyaan baadhisteeda ayey u kala saaraan taariikhda saddex qaybood :-

1. Taariikhda Hore
2. » Dhexe
3. » Cusub

Saddexdaa meelood ee loo qaybiyay taariikhda ma aha waqtiyaal xuduudo cad kala leh oo la odhan karo sidii dagaal weynihii adduunka oo kale waqtigaasna way bilaabmeen waqtigaasna way dhammaadeen.

Haddaba, haddii aanay qaybahaa taariikhdu xad kale lahayn maxaa lagu kala garanayaa ama iyaga lagu kala sooacayaa? Jawaabtu waxa weeye culimadii qaybahaas samaysay iskama aanay samayn ee intay taariikhda indho indheeyeen; ayey intii qayb isu raaci kartaba gooni isugu saareen, dabadeedna saddexdaa qaybood la soo baxeen.

Saddexdaa meelood ee taariikhda loo qaybiyey waxyaabaha lagu kala garto waxa ka mid ah; waa kasta oo waayadaas ka mid ah dadka adduun weynaha ku noola si gooniya ayey u dhaqmi jireen, qalabka uu dadku noloshiisa ku soo saaraana wuu ka duwanaa ka kale. Labadii kitaab ee taariikhda ahaa, ee aynu ku soo qaadanay, heerka shanaad iyo kan lixaad, kan hore wuxuu ka hadlayey, taariikhdii hore ee adduunka, waxana aynu ka soo billownay, waayadii dadku aanu xayawaanka waxa aad ah dhaamin, waayadaa, dadku wuxuu ahaa qadaa ma dhergaansida xayawaanka aan hubin inuu maalintaas cuntadiisa soo heli doono iyo in kale, in isagu wax soo ugaarsan doono iyo in isaga la soo ugaarsan doono. Waayadaas dadku ma haysan hooy, hub iyo hu fiican toona.

Buugga labaad (waa kan heerka lixaade) wuxuu ku saabsanaa, taariikhdii waayadii dhexe, haddii aynu isu qiyaasno taariikhda hore iyo tan dhexena, waxa aynu arkaynaa in waayadaas dadka noloshoodu, dhankii loo eegaba ay ugu wanaagsa-

nayd tii dadkii ka horreeyey. Taasuna waxa ay awood inoo siinaysaa in aynu ka sii faalloono in taariikhda cusub oo ah tuu ka hadlayo buugeenan saddexaad in aynu ka aragno, in nolosha dadka nool waayadan cusub ay ka sii wanaagsan tahay tii dadkii noolaa waayadii hore iyo kuwii dhexeba.

Sidii aynu hore u soo sheegnay buugganu wuxuu ka hadlaya taariikhda cusub ee adduun-weynuhu maanta ku jiro iyo siyaabihii ay ku timid. Haddii aynu doonayno in aynu taariikhda cusub si fiican uga hadalno waa in horta aynu aqoon fiican u yeelanaa sida ay ku dhasheen isbeddeladii keenay taariikhdan cusub iyo taariikhdii hore ee saldhigga u ahayd keentayna isbeddeladaa.

Ugu horreyntii aan meel isla dhigno, sida uu isbeddel taariikheed ku iman karo. Isbeddelka taariikhiga ihi ma aha wax samada ka soo dega ama sida dadka qaarkii u haysto, iskaga dhasha maskaxda dadka, ee ugu horraynta wuxuu ku dhacaa dhaqaalaha dadka. Taasna micnaheedu waxa weeye dadkaasu waxyaabihii ay waayadii hore ku soo saari jireen noloshooda intay hore uga maraan ayaa waxa ay la yimaadaan waxyaabo cusub oo noloshooda ay ku soo saaraan. Marka isbeddelkaas dhaqaalaha ihi hirgalo ayaa isla markaas uu isbeddelkaasu baahayaa oo noqonayaa mid saameeya nolosha ijtimaaciga ah oo dhan, ha noqoto xagga fikradda dadka, habka siyaasiga ah, tacliinta iwm. Marka taariikhda adduunka looga hadlayo guud ahaan, runtii lagama hadlo waxyaabihii adduun-weynahu soo maray oo dhan, ee waxa laga hadlaa jiraalada taariikhiga ah ee meesha ay doonayaanba ha ka bilaabmeen, aan waddan qura ku koobnaan ee adduun-weynaha intiisa badan giddigiiba wada gaara.

Sidaa darteed, marka aynu ka hadlayno taariikhdii adduunka ee hore iyo ilbaxnimooyinkii adduunka uga da'da weynaa waxa aynu ka hadalnaa dhawr ilbaxnimo oo aynu isniri waa kuwii waayadaas horumarka heerka ugu sarreeya ka gaarsanaa.

Waxa taa raaca ilbaxnimada iyo horumarku ma ah wax weligeedba ummaddaha qaar keliya haysteen ee waa wax ku xirnaa ila imminkana ku xiran ummad kasta dadaalka iyo niya-



da ay la timaado. Ilbaxnimooyinkii ugu horreeyey adduunka waxa ay ka dhasheen Afrika iyo Aasiya. Ilbaxnimada waqtigan aynu joogno adduunka ka dhisanna waxaa gar wadayaal u ah reer Yurub.

Sidaas darteed marka aynu ka hadlayno taariikhdii dhexe dabayaaqadeedii iyo taariikhda cusubba waxa aynu aad ugu dheeraynayana taariikhda Yurub.

Casharkeenan, aynu hadda ka hadlaynaa waa mid Yurub khaas u ah waayo; in kasta oo waayadii fufka wixii ka dhashay ay markii dambe adduunyada ku baaheen, haddana markii hore fufku Yurub ayuu ka dhashay

Haddaba si aynu fikrad uga qaadano xaalka Yurub caynka uu ahaa waayadaas iyo waxyaabaha ku kallifay saldhiggana u ahaa Fufka waxa habboon in aynu si kooban wax ugu taataabano taariikhda Yurub Fufka horteeda.

Magaca «waayadii dhexe» waa magac taariikhi ah oo la xiriiray muddo ka mid ah taariikh adduunka. Nimanka taariikhda cilmiga u leh, ee la baxay magacaas waxa ay isla oggolaadeen in waayadaas dhexe ka bilaabmaan markii ay baab'day dawladda Room, waxaanu ku dhamaadaa waayada la magac baxay waayadii Fufka.

Waayadaas dhexe dadka qaarkii waxa ay u haystaan in ay ahaayeen waayo mugdi ah oo fikradda baniaadamka iyo ilbaxnimadoodu hoos u dhaceen. Waayadaasu se sida runta ah waxa ay ahaayeen waayo ay dadku lahaayeen dhaqamo iyo ilbaxnimooyin heer sare gaarsiisan oo ay ka dhaxleen ilbaxnimooyinkii ka horeeyey. Sidaa darteed waayadaas dhexe iyaga ayaa saldhig u ahaa horumarka iyo ilbaxnimooyinka maanta adduunka ka dhisan.

Ilbaxnimooyinkii waayadii dhexe dhisnaa waxa ay kaga duwanaayeen kuwii ka horeeyey, kuwii hore waxa ay ka dhismeen badda cad iyo hareereheeda kuwan dambese waxa ay ka dhismeen oo ubuc u noqday galbeedka Yurub.

Ta labaad halkii waayadii hore dawladii ilbaxnimooyinka gar wada u ahayd boqortooyada weyn ee dhulka weyn xukunta ka dhismaan jireen Yurubta galbeed iyadu waxa ay ilbaxnimadu ka bilaabantay iyada oo ka kooban dalal iskood u madax bannaan, hase yeeshee isku tiirsan.

Xagga nolosha, waayadaas dhexe dadka intiisa badani waxay ku noolaayeen miyiga tobankii qofna sagaal ayaa beeralay ahayd.

Dadka beeralayda ah qudhooda siyaabaha ay wax u beeran jireen way kala gedisnayd waxana ka mid ahaa dad beero yar yar iskood u beerta qaar beero yar yar kiraysta oo fasha, dadxoolo raacata ah IWM.

Habka siyaasiga ah ee ay dadka beeralayda ihi ku dhadhaqmayeen waayadaas wuxuu ahaa nidaamkii la odhan jiray dhulgoosadka. Boqorku dalkiisa dhawr meelood ayuu u qaybin jiray, dhawrka meeloodna meeshii kasta nin uga wakiil noqda ayuu siin jiray. Wakiilkaas boqorku mid kasta, dhulka uu boqorku siiyo ayuu dad dejin jiray. Dadkaas waxa ay beerteen intay cunaan mooyiye inta kale isaga ayaa loo keeni jiray. Markaas waxyaabahaas loo keeno qaarna isaga ayaa qaadan jiray, qaarna boqorka ayuu u diri jiray.

Ta kel wakiilkii kasta haddii boqortooyada boqorka la soo weeraro wuxuu diri jiray ciidan. Nidaamkaas dhulgoosiga la magac baxay, waa heer ka horeeyay nidaamka la yiraahdo hantigoosadka, ee dawladaha adduunka, maanta in badani ku dhaqanto. Habkaas min markuu bilaabmay, wuxuu caan ku yahay in ummada ku dhaqantaa ay had iyo jeer u kala qaybsan tahay laba dabaqadood. Dabaqad beeralay ah oo ka kooban dadka intiisa badan. Kuwaas oo ah muruqa waxa ummaddu ku nooshahay soo saara, had iyo goorna iyagu ku nool, nolol aad u liidata iyo dulmi aad uu foolxun oo cagta madaxa lagaga hayo iyo dabaqad maal qabeen ah oo maamulka siyaasiga ah haysa, ahna kuwa dulma oo ku nool dhiigga dadkaas shaqaalaha ah. Nidaamkaas isaga ihi wuxuu ku bilaabmay, iyada oo qofka loo shaqaynayaa uu ula dhaqmo qofka xoogsatada ah sidii wuxuu iska leeyahay oo kale oo hantidiisa ka mid ah.



Heerka labaad uu taas uga gudbayna wuxuu ahaa qofka beeralayda ah oo dhul la siiyo. Dhulkaas wuxuu ka soo saarana inta calooshiisa buuxisa ee uu ku noolaan karayo mooyiye, inta kale ninka dhulka boqorka uga wakiilka ah iyo boqorka ayuu siiyaa oo kala qaybsada. Habka looga gudbayna waa ka maanta, habka Hantigoosadka ihi ku dhaqmo. Kaas oo dadka xoogsatada ahi ay ka shaqeeyaan warshado ay dad yar oo Hantigoosad ihi leeyihiin. Waxa ay muruqooda ku soo saaraana, in ay ku noolaan karaan uun laga siiyo, inta kalena ay ku shubanto jeebka dadkaas Hantigoosadka ah.

Waayadii dambe markii habka dhulgoosiga ihi uu soo baaba'ayey, isbeddeladan saldhiga u noqday nolosha cusubina ay bilaabmayeen. Sidii dadka beeralayda ahaa uu u dhaqmi jiray ee ahayd in ay waxa ay beertaan u kala qaybiyaan wax ay cunaan iyo waxay boqorka wakiilkiisa siyaan way joogsatay. Waxa lagu beddelay in qofku intuu dhulka kiraysto wuxuu beerto in go'an oo laysku ogyahay uu siiyo ninka dhulka ka kireeyey, qayb ka mid ahna uu isaga iyo xaaskiisu ku noolaadaan, qayb ka mid ahna uu haysto, si uu waxyaabaha uu magaalada uga baahan yahay ugu soo beddesho, haw badnaado qalab cusub uu beerta kaga shaqaysto amba kii hore uu haystay oo ku soo hagaajisto.

Dadkii beeralayda ahaa markii wixii ay soo saarayeen, ay saddex meelood u qaybiyeen, waxa dhacday in kartidoodii wax soo saarku sare u kacdo, taasuna waxa ay keentay in dadkii marka hore ninba dhulka yar beeran jiray ay beertaan dhul waaweyn. Dhulkaas waaweyn ee la beertayna wuxuu dhaliyey in dad masaakiin ah oo fara badan oo aan awood ay dhul weyn ku kiraystaan iyo qalab ay kaga shaqaystaan toona lahayn ay wax beerashadii faraha ka qaadaan oo shaqo la'aan isa soo taagaan, waana dadkaas dadka aakhirkii magaalooyinka galay ee dhisay.

Waxa intaa raaca dabayaaqadii waayadii dhexe siyaabihii wax loo beeran jiray hore ayaa loo mariyey, sidaa darteed wax soo saarkii beeralayda sare ayuu u soo kacay, waxana arrintaas u sabab ahaa iyada oo la soo saaray qalab doora, oo waxtar beeraha u ah. Qalabkaasna waxa ka mid ahaa; kabo fardoodka, karyoonaha iyo marawaxad dabaysha ku shaqaysa oo XUBUUBKA ridiqda.

Xagga magaalooyinka, dadka waayadaas dhexe ku noolaa magaalooyinka Yurub aad ayey uga duwanaayeen dadka beeralayda ah ee miyiga ku noolaa.

Magaalooyinku waayadaas waxa ay lahaayeen xoriyad ka weyn ta magaalooyinka maanta ay leeyihiin, waayo mid kasta iyada ayaa cashuurteeda gooni iskaga ururin jirtay, marku sannadku dhamaadana mid kasta cashuurtii ay iska ururisay ayeyninka dhulka ay ku taallo boqorka ugu wakiilka ah ay u gudbin jirtay. Magaala kasta waxa ay lahayd ganacsi madax bannaan oo ay iyadu maamulato, sida darteed alaabta uu ganacsigeedu ku dhisnaana iyada ayaa qiimo u samaysan jirtay, marka la soo weeraarana iyada ayaa is difaaci jirtay.

Dadka magaalooyinka ku noola labo qolo ayey u badnaayeen. Labada qolo, qolada hore waxa ay ahaayeen nimanka farsamo yaqaannada ah. Kuwaas oo isgu jiray kaliyayaal? iyo farsamo yaqaan. Qolada labaad ee farsamo yaqaannada soo raacda waxa ay ahaayeen dadka ganacsatada ah ee ay u shaqeeyaan dadka farsamo yaqaannada ihi.

Waayadii dhexe bilowgeedii ganacsiga magaalooyinka heer sare ma gaarsiisnayn sida darteed magaalo kasta miyigeeda ama magaalooyinka kale ee aad ugu dhow ayey xiriir ganacsi la lahayd waayadii dambe se ganacsigii aad ayuu sare ugu soo kacay markaas magaalooyin aad u kala fog ayaa bilaabay in ay xiriir ganacsiya yeeshaan. Magaalooyinkaas ganacsiga heerka sare ka gaarayna wax ka mid ah; Fenis oo ku tiil meel ay dhabooyin badani ku kulmaan oo ku habboon ganacsiga. Fenis waxa ay xiriir ganacsi la lahayd Konstaantinaybul iyo Bariga fog. Waayadaas waxa magaalo kasta, cidda ay xiriir ganacsiga la yeelanayso, iyo qiimaha ay alaabteeda ku gadayso gooyn jiray, iskaashato ka kooban ganacsatada magaalada. Mararka qaarkoodna waxa jirtay in guddi ka kooban magaalooyin dhowr ah oo xiriir ganacsi lihi ay maamuli jireen ganacsiga magaalooyinkaas.

Waayadaas sida ganacsiga loo maamuli jiray, waxa ay saldhig u noqotay, kana soo dhex baxay habka ganacsiga ah ee waayadii dambe ku faafay Yurub badideeda. Habkaas ganacsiga ihina waxu waayadii dambe la magaca bacay «Markantalism». Waayadii hore dawladda waddan kasta, waxa ay kartideedu ku koobnayd maamulka siyaasiga ah, sida darteed ganacsiga waddan kasta wuu madax bannaanaa waxana maamulan jiray sidii aynu horeba u soo aragnay ganacsatada dalka. Waayadii dambe se dal kasta waxu ogaaday in aanay maamulka siyaasiga ah iyo ka ganacsiga ee dalku ay laba wax oo isku tiirsan oo marnaba kala maarmi karin yihiin; sida darteed maamulkii ganacsiga dalkana dawladihii ayaa la wareegay, waana habka ganacsiga ah ee ay dawlddu maamulayso ka la magac baxay Markantalism.

Qarnigii afar iyo tobanaad ayey Fenis bilowday in ay xiriir ganacsi la yeelato dalka Ingiriiska. Ganacsigaasna waxa ka qayb geli jirey maraakiib waaweyn oo ay ka shaqeeyaan dad ku dhow laba boqol oo qof.

Magaalooyinka kale ee Yurub ee iyana heerka sare ka gaaray ganacsiga waxa ka mid ah Jineewaa, Biisa, Foloorens, Marsaylis iyo Barsiloona.

Dabayaaqadii waayadii dhexe magaalooyinka Yurub ganacsiga oo qura hor ugu ma marin ee waxay isla markaas horumar weyn ka sameeyeen xagga farsamada. Haddaynu soo koobno sida ay magaalooyinku doorka weyn uga ciyaareen horumarka Yurub.

Ugu horayntii, magaalooyinku iyaga ahaa meelaha ay ka soo bilaabmeen dhaqdhaqaaqyada iyo isbeddellada waaweyn ee Yurub ka soo saaray mugdigii ay ku jirtay kana dhigay garwadaha ilbaxnimada maanta adduunka lagag dhaqmo. Taas waxa ay usuurto geliyeyna waxa ay ahayd markii dadkii magaalooyinku batay ganacsigoodiina uu aad hore ugu maray ayaa waxa samaysmay dabaqad ganacsato ah oo beddashay nimankii akhyaarta iyo wadaadada ahaa ee siyaasadda boqorrada la maamuli jiray. Markii dabaqadaasu ay adkaatayna waxa Yurub ay ka baabi'iisay nidaamkii dhulgoosiga ahaa ee ku dhisnaa beeraha waxayna ku beddeleen nidaam hantigoosi ah oo ku dhisan ganacsi.

ayli :

1. Taariikhda waxa culimadu ay qaybaha ugu samaysay.

a) Si ay taariikhda akhriskeeda u quruxbadiyaan.
b) Si ay taariikhda barashadeeda u fududeeyaan.
c) Si ay taariikhda u badiyaan.

2. Isbeddel waxa la yiraahdaa waxu ka bilaabmay.
a) Habka dhaqaalaha.
a) Habka Siyaasiga ah.
c) Habka Diiniga ah.

3. Ilbaxnimada iyo horumarku waa wax ay ummadaha.
a) Yurub uun samayn jireen ila iminkana sameeyaan.
b) Aasiya uun sameeyaan.
c) Dadaalka iyo niyada lala yimaadaa sameeyaan.

4. Waayadii dhexe dadka adduunka intiise badani waxa.

a) Ay ku noolaayeen magaalooyinka.
b) Ay ka shaqayn jireen warshadaha.
c) Ay ahaayeen beeraley miyiga ku nool.

5. Waayadii dhexe habka siyaasiga ah ee dadka reer Yurub ku dhaqnaa waxuu ahaa.
a) Hantigoosi.
b) Dhulgoosi.
c) Hantiwadaag.

6. Waayadii dhexe waxa sare u kacay soo saarkii beeraha arintaasna waxaa u sabab ahaa :

a) Iyadoo la soo saaray qalab cusub oo uu ka mid yahay kaba fardood, keryoonaha iyo marwaxadda dabaysha ku shaqaynaysa.
b) Iyadoo cagaf-cagafyo la soo saaray.
c) Iyadoo beerihii la waaweyneeyey.

7. Xiriirka ganacsiga ee magaalooyinka ka dhexeeya waxa maamuli jiray.



a) Dawladda
b) Iskaashato ganacsata ah
c) Abwaanada magaalad

1. Dadka taariikhda qoraa waxa ay taariikhda u qaybshaan laba meelood. Kuwaas oo ah taariikhdii hore iyo ta cusub.

2. Qaybahaas taariikhda loo qaybiyey waxa lagu kala gartaa siyaabaha dadka waayadaas dhaqnaa ay u hadli jireen iyo siyaabaha ay u tukan jireen.

3. Taariikhda adduunku waa jaranjaro kor u socota, waa kastana waaga ka dambeeya ayey nolosha dadku sare u sii qaadmaysaa.

4. Taariikhda adduunka marka laga hadlayo waxa laga hadlayaa oo qura taariikhda ragga madaxda ahaa ee adduunyada soo maray.

5. Fufku ugu horayntii Yurub ayuu ka bilaabmay.

6. Taariikhda la baxday waayada dhexe waxa ay ka bilaabantaa markay baaba'day dawladdii Ruum, waxayna ku dhammaataa waayada la magac baxay waayada Fufka.

7. Waayadii dhexe waxa ay ahaayeen waayo mugdi ah co fikradda iyo ilbaxnimada adduunkuba ay hoos u dhacday.

8. Habka dhulgoosiga ah, boqorku dhulkiisa intu kala qaybsho ayuu qayb kasta nin uga wakiil ah samaysan jiray.

9. Magaalooyinka Yurub ee waayidii dhexe heerka sare ka gaaray ganacsiga waxa ka mid ah, Venis, Barselone, Bisa, iyo Flornese.

10. Magaalooyinkii waayada dhexe waxay lahaayeen xoriyad ka weyn magaalooyinka maanta dhisan.

11. Dhaqdhaqaaqyadii nolosha Yurub sare u soo qaaday waxa ay ka bilaabmeen magaalooyinka.

## HABKA DIINIGA AH

Bilawgi waayidii dhexe diinta Kiristaanku kuma ekayn m[illegible]ulka waxyaabaha ictiqaadka ku saabsan ee waxa ay lahaayeen dadka culimada ah ee diinta maamula, awood aad u weyn oo u oggolaatay, in ay ka qayb qaataan, wax kasta oo ku saabsan nolosha dadka, gaar ahaanna maamulka siyaasiga ah.

Dadka reer Yurub waayadaas diinta aad ayey ugu jibaysnaayeen waxana ay qabeen in sida diintu tiri adduunyadu tahay, meel ay dadku ku sii dhaxayaan, sida darteed dadka intiisa badani waxa ay isku dayi jireen in ay iska ilaabaan dunida iyo raaxadeeda oo ay u go'aan siday aakhiro ugu shaqaysan lahaayeen. Sidaa darteedna diyaar ayey u ahaayeen in ay naftooda iyo maalkoodaba u huraan diinta.

Arrintaas aad ayey uga faa'iidaysteen culimada diintu oo waxa ay yeesheen maaliyad, xoog iyo awood siyaasi ah oo weyn. Sida darteed culimada dal kasta waxa ay ahaayeen kooxda boqorka ku labaysa maamulka siyaasiga ah ee dalka.

Booqorkuna waxu lahaa awood boqorrada Yurub oo dhan ka saraysa una oggolaatay inuu fara geliyo waxna ka maamulo arrimaha siyaasiga ah ee dal kasta.

Waayadii dambe se, markii u hirgeli waayey, ra'yigii oranaayey Yurub ha laga dhigo, imbradooriyad weyn oo diin ku dhisan; ee ay Yurub u qeybsantay ummad ummad, dawlado kala gaar ihi ay xukumaan, ayaa waxa bilaabmay, in ay Yurub ka samaysmaan boqorro ad adag oo doonayo in ay ka xoroobaan faragelinta boobka diinta Kiristaanka uu soo fara galinaayo siyaasadda dalkooda, taasna waxa ay boqorradu gargaar kaga heleen dadkooda. Arrintaasu waxa ay dhalisay in ay iska horyimaadaan Boobka iyo culimadu oo is raacsan iyo boqorrada xukumaayey Yurub.

Iska soo horjeedka markii uu muddo soconaayey waxa uu aakhirkii ku dhammaaday in ay libaystaan boqorradu oo ay meel mariyaan in ay diinta iyo kala saaraan siyaasadda. Sidaa darteed kiniisada dalaka Yurub intoodii badnayd waxa laga dhigay mid hoos timaada maamulka dalka, culimadiina inta ki-



niisadii lagu celiyay ayaa lagu kallifay in ay maamulaan wixi diinta ku saabsan, farahana kala baxaan siyaasadda dalka.

## WAAYADII FUFKA

Fufku waa waqti ka mid ah waqtiyada taariikhda ah ee uu adduunku soo maray.

Fufka sidii waayadii dhexe ma leh maalin ama sano go'an uu bilaabmo ama dhammaado. Waase magac la xiriira qarnigii, 12aad ilaa qarnigii 15aad. Waqtigaa waxa markii ugu horraysay u isticmaalay erayga Fufka, hirgalinayana koox qorayaal ah oo fransiisa qarnigii 18aad.

Kooxdaa magaca soo saartay hirgalisayna, waxa ay rumaysnaayeen in tacliintii iyo ilbaxnimadii ay hoos u dhacday, markii ay boqortooyadii Ruum baaba'day. Kooxda iyaga ahi isla markaa waxa ay qabeen in haddana tacliintii iyo ilbaxnimadii baaba'day ay mar labaad soo noolaadeen waayadaas Fufka la magac baxay.

Fufku, mar qura Yurub, kama wada bilaabmin, dadka taariikhda qora waxa ay isku raaceen, inuu ka bilaabmay dalka Talyaaniga qarnigii 12aad, dabadeena uu ku baahay dalalka Yurub oo dhan. Magaca Fufka waxa intaas u dheer isaga oo aad ka dhadhaminayso isbeddelkii xagga cilmiga iyo caadooyinkii Yurub ku dhacay waayadaas dabadeedna adduunweynaha ku baahay.

Isbeddelkaas kacaanka ihi laba siyood ayuu ku yimid. Ugu horayntii dadkii reer Yurub ee awal diinta u jibaysnaa, fikradda ay qabeenna ay ahayd, sidii aan horeba u soo sheegnay in ay adduunyadu tahay meel maalmo lagu sii dhaxayo. Meeshuu dadku ku waarayo ee waqtigiisa inta badan ku qaadanayana tahay aakhiro sidaa darteed isaga oo sidiisaba uu ganacsigu yahay shaqo hoos loo eego ayaa haddana dadka ganacsatada ihi waxooda ay faa'iidaan ma gelin jirin ganacsi kale si ganacsigoodu u sii faafo ee masaajid ayey ku dhisi jireen ama sadaqad kale ayey ku bixin jireen. Sida darteed waagaas dadka ganacsatada ihi maalqabeen ma ahayn ee culimada Kiniisadaa maamusha ayaa maalqabeen ahayd. Waayadii Fulka se, waxa dhashay kooxo ganacsato ah, oo lacgta ku raadisa si alaa-

leh iyo sida ay ku heli karaan. Xukunkuna sidiisaba kolba cidda maalka haysa ayuunbu gacanta ugu jiraa sida darteed markii ay ganacsatadu xooli iyo xukunkiiba isula wareegtay, intaas oo qura kuma ay qancin ee isla markiiba waxa ay ku dhaqaaqeen sidii ay ku beddeli lahaayeen noloshii dadku waayadii dhexe ku noola'ee meeshii aad u dhaqaaqdidba diintu ka hor imanaysay. Taas ooy ka door bideen jeclaysteena in ay ku beddelaan siyaabihii loo dhaqmi jiray baryihii ay dhisnayd Boqortooyadii Ruum iyo wixii ka horreeyey. Si taasu u taabo gashana waxa ay dib ugu noqdeen oo intay boodhka katumeen bilaabeen in ay akhriyaan kutubkii iyo suugaantii ay Rumayinyiinta iyo Giriigu qoreen. Dib ugu laabadkaas ay dadku ugu laabteen akhrista suugaanta horena waxa loo bixiyey «naqtiinkii suugaanta», naqtiinka suugaanta dadka waxa kale kuma kalifin ee waxa u sabab ahaa dadkii oo ka nayd jabay tacliintii waayadii dhexe la dhigan jiray ee diintuun ka sheekayn jirtay.

Markaas waayadii Fufka dadkii waxa baranayay iyo kuwii waxa qori jirayba inta ay tacliintii diinta meel iska dhigeen ayey bilaabeen in ay bartaan oo wax ka qoraan waxyaabo aan diin shaqo ku lahayn. Sidii aynu hore u soo sheegnay Fufku waxu ka bilaabmay dalka Talyaaniga ah, kuwaas uu gar wada u ahaa ninka la oran jiray Petraraca (Petrarch). Beryahaas uu bilaabmay naqtiinka suugaantu ayaa isla markaas waxa la bilaabay in manhajyo cusub oo la socda isbeddelka ku dhacay tacliinta loo dejiyo jaamacadaha Yurub. Manahijka waayadii Fufka loo dejiyey jaamacadaha Yurub waa kuwii ay ku socdeen Jaamacaduhu ila qarnigii 18naad.

Isbeddelkaas cusubi ma uu noqon mid ku kooban tacliinta oo qura ee waxu noqday mid ku baaha nolosha iyo dhaqanka dadka reer Yurub oo dhan sida darteed marku isbeddelkaasu ka socday tacliinta isla markaas iskaga soconaysay ay marun isbeddello kedis ihi dhaceen, kuwaas oo ku beddelay siyaabihii hore ee loo dhaqmi jirey, siyaabo hor leh oo cusub. Fufku sida runta ah wuxu ahaa waayo ay hirgaleen isbeddello waaweyn oo bilaabmay waayadii dhexe iyo ka hore. Waxyaabaha suurto geliyay in ay isbeddeladaasu hirgalaana waxa ka mid ahaa, iskudarkii ay dadkii waayadaas dhaqnaa isku dareen siyaabihii ay dadku waayadaas u noolaayeen iyo siyaabihi ay wayadii soo baxniinkii diinta Kiristaanka ka horeeyey ay u dhaqmi jireen.



Sidaa darteed, halkaas waxa aynu ka arki karnaa in ilbaxnimada maanta adduunka ka dhisan ee uu saldhigga u ahaa Fufku ay tahay mid ka soo baxday iskudarka labadaa dhaqan.
Sidaa darteed, waxa aynu oran karna Fufku wuxu ahaa waayo ay hirgaleen, soo shaac baxeenna isbeddello soo bilaabmay waayadii ka horreeyey.

Waxa iminka dadka taariikhda ku xeesha dheer ay isku waafaqeen in magaca Fufku gef u baxay, waayo waxa la ogaaday in dadka magacaas bixiyey ay ahaayeen dad qabay in ay waayadii dhexe ahaayeen waayo mugdiya oo ilbaxmadii adduunka iyo tacliintiiba baaba'day.

Hase yeeshe iminka waxa la ogsoon yahay in Fufka iyo ilbaxnimadan cusub ee uu maanta adduunku ku dhaqmaba ay asaas u ahaayeen waayadii dhexe. Markaa ma ahayn waayo soo celiyey ilbaxnimo baaba'day amba la yimid tacliin aan la aqoon ee waxu ahaa waa la kulmay dhaq-dhaqaaqyo dhaliyey isbeddello xagga nolosha ah.

Sidii aynu hore u soo sheegnay waayadii Fufka ka horreeeyay dadku waxa ay ahaayeen dad diinta aad ugu jibaysan sida darteed waxa dhigtaan, waxa ay sawiraan, waxa ay dhistaan, waxa ay isku xukumaan waxyaabaha ay ku fekeraan iyo suugaatooduba waxa ay ahayd wax aakhiro iyo Ilaahun ku saabsan. Waayadii Fufku se dadkii Ilaahay iyo aakhiroba waxa ay ka soo hormariyeen qofka isbeddelkaas uu dadku isbeddelay ee jeceylkii diinta adduunyada ku beddelay waxa loo bixiyey jacaylkii binu-aadam nimada. Arrintaas banuaadam jacaylku waxa ay dhalisay in xukunkii barigii hore ku jiri jiray gacanta kiniisadu uu ku wareego gacmaha boqorrada sababta taas keentayna waxa ay ahayd markii hore dadku ifka ay nolol fiican ku noolaadeen waxa ay ka jeclaayeen iyaga oo aakhiro meel fiican la geeyo darteed uu ninku wuxu karti iyo maal leeyahay isugu geyn jiray si uu ugu shaqaysto inuu aakhiro meel wanaagsan la geeyo ayaa waxa waayadaas Fufku inu ninku ku hanbaa biro oo uu federkiisii, iyo kartidiisii halkii uu awal aakhiro isugu geyn jiray uu markan isugu geeyo degaanka hareerihiisa ah. Sida darteed ninkii intu guntiga dhiisha iskaga dhigay ayuu u soo jeestay inu adduunyada markan ka shaqaysto si uu uga dhigo meel ku haboon inu si fiican ugu noolaado.

Ta labaad dadka reer Yurub waagaas Fufka waxay xiise hor leh u qabeen, sida darteedna ay ololayaal hor leh ku kiciyeen sidii dib loogu noqon lahaa, ee loo nolayn lahaa, cilmigii laga dhaxlay ummaddii Griigii iyo Rumaaniyiintii hore.

Sida runta ah, Yurub waayadii dhexe oo dhan, weli waxa ku sii daba laha jahawareerkii iyo khalkhalkii ku dhacay, markii ay dadka badowda ah ee aan ilbaxnimada fiican lahayni ay qabsadeen ee ay baabi'iyeen ilbaxnimadii qotada dheerayd ee Ruum. Waagii Fufkase, Yurub way ka bogsatay jahawareerkaas, waxana ay gaartay xasillooni dhankii loo eegaba, sababtuna waxay ahayd waayadaas Fufka dadkii Jarmalka ahaa ee markaa hore Yurub debedda ka soo weeraray, waayo door ayey la dhaqmayeen oo ku dhex jireen dadka reer Yurub, sidaa darteed diinta Kiristaanka ayey qaateen. Ta labaad caadooyinkoodii iyo kuwii reer Yurub ayaa intay is dhexgaleen ayaa waxa ka samaysmay hiddo iyo dhaqan labada qoloba u dhex ah.

Markii Yurub ka nasatay noloshii waayda dhexe, ee dilka iyo dhaca isdabajoogga ahayd ee ay xasilloonidaas gaartay ayaa dadka reer Yurub waxa ay heleen waqti ay kaga fekeraan danahooda. Sidaa darteed, waxa ay kordhiyeen, hagaajiyeenna siyaabihii loo ganacsan jirey,siyaabihii wax loo beeran jirey badmeeristii iwm.

Waxa dhaca in Fufka dadka qaarkii u arkaan laba siyood oo labaduba gef yihiin. Labadaa siyoodna, ta hore waxa weeye, in uu Fufka ahaa, waayo dib loogu noqday, caadooyinkii hore, ee waayadii uu dadku aan diinta kiristaanka haysan. Ta labaadna waxa weeye in dadka qaarkiis u arkaan, inuu ahaa waayo, sidii noloshii waayadii dhexe ay isbeddello la mid ah ayaa ka socday xagga fekerka iyo fankaba. Markaas halkii waayadii dhexe waxyaaba ay sawiraan, kuwa ay xardhaan iyo waxyaaba ay dhistaanba aad diinta ugu dhex arkaysay ayaa wayadii Fufka waxa ay bilaabeen in ay waxyaabahaas oo dhan kaga daydaan siyaabihii Ruumaaniyiintii iyo Giriiggii hore u samayn jireen. Kaga dayashadeesuna waxa ay keentay in la soo saaro siyaabo cusub oo wax loo sawiro, wax loo xardho amba wax loo dhisto.



Jacaylka iyo xiisaha dadka waayahaas noola ay u hayeen dhaxalka ay katageen Giriigga iyo Ruumaaniyiintu wuxu aad uga muuqday xagga dhismaha waayo aqallada, kiiniisadaha iyo tuulooyinka waayadaas Fufka la dhisayba waxa ay ahayeen qaar aad ugu dhow kuwii Giriigga iyo Rumaaniyiinta.

Dadkii waayadii Fufka noola may ahayn dad cusub oo Yurub meel kale kaga yimid ee waxa ay ahayeen dad dalalkaas waayo badan ku soo dhaqmayey oo hiddo iyo dhaqan qoto dheer oo awoowayaashood ay ka dhexleen leh; hiddaha iyo dhaqanka ma aha wax markii la doonana sida shaarka aysaga siibo, markii la doonana la gashado ee waa wax baabi'iisa iska daayo wax ka beddelkiisu sannado badan qaata. Markaas, markii ay dhaqankooda hore iyo kii Giriigga iyo Ruumaniyiinta ee ay doorka moodeen isku dareen, waxa meeshii ka curtay dhaqan cusuboo labada ka dhexeeya.

Markaas haddii si run ah loo dhuuxo Fufka wuxu ahaa dhaqan cusub oo aad uga gedisan kii waayadii dhexe waayo labada dhaqan, diin aakhiro, iyo addunqadii markaas u muuqatay ee ku noola ayaa saldhig u kala ahaa.

Dabayaaqadii Fufka ayaa Yurub soo saartay sida wax loo daabaco. Intii aan daabacaaddu jirin cilmigu wax aad u koobán ayuu ahaa waayo buuggaagta gacanta ayaa lagu qori jiray markaas tiradoodu aad ayey u yarayd sida darteed dadka wuxu yaqaana aad ayey u yaraayeen. Wayadii dambese markii la soo saaray daabacaadda ee buugaagtii aad u bateen dad badanbaa awood u helay akhriskii buugaagta. Taasuna xiisihii dadku cilmiga u hayey sii weynaysay, waxa suuro gal noqday in ay aqoontii dadku horumarto khusuusan xagga cilmiga juqraafiga, sayniska iyo badmaaxiistaba.

Kutubtaa la daabacay Yurub oo qura uma ay faa'iidayn ee adduunka oo dhan ayey waayadii dambe ku baahday sida darteedna waxa ay ka mid tahay waxyaabaha adduunkii waayadii hore aadka u kale go'naa isu soo dhoweeyey noloshan cusubna door lagama maarmaan ah ka ciyaarey.

Qoraalka kutubtu Yurub faa'iido taa guud ahaaneed dheer ayuu u yeeshay taas oo ah; markii ugu horraysay daabacaada waxa ay wax hore ka soo baxday dalka Shiina. Daabacaadda cusubi se waxa ay ka soo baxday dalka Jarmalka ~~mar-malka~~ markaas markiiba si dhaqso leh ayey Yurub ugu baahday sida darteed buugaagtii u horreeyey buugaag tiro doora laga daabaco waxa ay ahaayeen buugaag ku qoran afafka Yurub. Arrintaasuna waxa ay ka mid tahay waxyaabaha afafka Yurub ka koryeelay afafka kale ee adduunweynaha lagaga hadlo.

Waagaas Fufka dadka reer Yurub waxa ay dhisteen doonyo waaweyn oo awood u siiyey in ay ka gudbaan badihii ay maalin kasta ku soo toosayeen, hase yeeshee aanay weli xeebahooda ka fogaan.

**Dadkaas badmaaxyada** ah ee cusub ee ay Yurub yeelatay, wax ay Yurub u suurto geliyeen in ay barato dhulal aanay hore u aqoon cuntooyin, dhir, shinbiro, bahalo iyo macdano aanay hore u aqoon, sidaa darteed intay adduunka aqoon hufan u yeeshaan ayey iska hilmaamaan sheekooyinkii beenta ahaa ee ay awal ka haysteen adduunyada **qaabkeed, siyaabaha dadka ugu** dhaqmo iwm.

Aqoontaa cusubina waxay keentay in bulshooyinka Yurub ay ka dhex dhashaan dad**ka shakisan waxyaabihii hore ee awoo**wayaashood ku soo dhaqmayeen, damacsanna in ay burburiyaan dhaqankaas ha noqdo diin ama waxyaale kale. Arrintaas **aayahay keentay waxa uu ahaa isbeddelkii weynaa ee reformashanka loo yaqaanna uu ku dhaco diinta Kiristaanka.**

Isbeddelkaas la magac baxay «reformation» diintii Kiristaanka ee mad-habta qura ee katooliga lahayd ayuu laba madhabood u kala jebiyey kuwaas oo ah Katolig iyo Brotestant.





DOONYIHII SAHAMIYEYAASHA

**Layli :**

1. Fufku waa taariikh la yaqaan maalintay bilaabantay iyo maalintay dhammaatay.

2. Magaca Fufka waxa bixiyey hirgeliyeyna koox qorayaala oo:

   b) Nooleyd qarnigii 15naad.
   t) Kii 13naad.
   j) Kii 18naad.

3. Fufku wuxuu Yurub ugu hore bilaabmay dalka Talyaaniga.

4. Fufku labada wax oo ugu muhimsanna waxay ahaayeen :

   A) Diintii oo heerkii ay joogtay hoos ugu dhacday iyo tacliintii hore oo dib u soo noolaatay.

   B) Diintii oo heerkii hore sare uga soo kacday iyo dadkii oo jecelaaday nolashii waayadii dhexe.

   j) A iyo B labaduba waa been.

5. Yurub jihawareerkii ku dhacay markii ay dadka badowda ah ay qabsadeen wuxuu ba'ay waayadii Fufka.

6. Xasilloonidii Fufka ka dambaysay ayaa u suurta gelisay Yurub inay noloshii waayadii dhexe ka soo baxdo nolol cusubna samaysato.

7. Fufku wuxuu ahaa :

   b) Isbeddello si deg-deg ah u dhacay.

   t) Isbedello kala horreeyey oo waayo hore soo bilaabmay.

   j) Labaduba waa run.

8. Waayadii dhexe waxay ahaayeen waayo mugdiya oo ilbaxnimadii adduunka iyo tacliintuba baaba'day.

9. Dhaqanka cusbaa ee Fufka ka dambeeyay waxa saldhig u ahaa qofka iyo adduunyada oo isu muuqday.



# CUTUB II

## XIRIIRINTII JUQRAAFIYADA DUNIDA IYO KA FAA'IIDAYSIGII DALALKA YURUB

**Diyaarinta xiriirinta juqraafiyada dunida:**

Xiriirintii juqraafiyada dunidu waxa ay soconaysay ugu yaraan laba boqol oo sannadood ama in ka badan xiriirintii juqraafiyada dunida waxa uu bilaabmay qarnigii 15aad horaantiisii, waxaana uu dhammaaday qarnigii 17aad bartamahiisii, waqtiyadaas waxa aqoonta juqraafiyada dunida ku soo kordhay qaarado ay ka mid ahaayeen Afrika, Ameerika iyo dhulal badan oo kale. Dhulalka kale waxa ka mid ahaa Ustareeliya, Niyuusiilaand iyo qayba badan oo dalalka adduunweynaha ka mid ah. Waxa waqtiyadaas si fiican aqoon loogu yeeshay badweynta Atlaantikada. Waxa awood loo yeeshay in maraakiibtu isaga gudbaan dhulal kala fog, iyaga oo dul sabbaynaya badweynta Atlaantikada. Waxa gaar ahaan waqtiyadaa le helay Yurubna ay aad uga faa'iidaystay dariiqa badda Atlaantikada ee maraakiibtu ay ka aadi karayeen Hindiya iyo waddannada Bariga fog. Laba nin oo sahamiska badaha caan ku ahaa oo la oran jirey Alkaano iyo Majilaan waxa ay waqtiyadaas caddeeyeen in badaha adduunyada oo dhan looga kala gudbi karo. Waxa aqoon waqtigaa markii ugu horreysey loo yeeshay in adduunyada inteeda badan ay baduhu ku fadhiyaan.

Xiriirinta juqraafiyada adduunyada waxa ay aad u ballaarisay safaradii badda ee reer Yurub. Safarada baddu waxa ay markii hore ku ekaayeen dalalka Yureeshiya iyo Afrikada Waqooyi. (Yureeshiya waa dalalka Yurub iyo kuwa ku yaal agagaarka badda dhexe). Ilaa qarnigii 15aad sidaas waxba iskama ay beddelin. Hase yeeshee xiriirka ay la lahaayeen dalalka Yureeshiya iyo Afrikada Waqooyi, waxa uu mar walba wax ku kordhinaayey korinta maskaxda, teknoolajiyada iyo cilmiyada sayniska guud ahaanba.

Taas waxa uu micnaheedu yahay in dalalkaas uu waqti walba dhexmarayey aqoon isweydaarsi, kaas oo ku saabsanaa xagga juqraafiyada iyo xagga cilmiyada kaleba. Hase yeeshee, waxa si gaar ah u ballaartay aqoonta iyo fikradaha laga haystay juqraafiyada adduunyada.

Xiriirinta juqraafiyada dunida waxa hoggaamiyayaal u ahaa dawladaha Yurub. Dawladahaasi waxa ay hawshaas u soo mareen halgan dheer oo qaatay qarniyaal badan. Qarnigii 15aad ilaa qarnigii 17aad sahamiska xiriirinta juqraafiyada dunida waxa horseed u ahaa Bortoqaal iyo Isbeyn ka dibna waxa ka daba qaatay Ingiriiska, Dajka, Faransiiska iyo kuwo kale.

**Sababihii soo dedejiyey xiriirinta juqraafiyada adduunyada:**

Xiriirinta juqraafiyada ee markii ugu horraysay Bortoqaal iyo Isbeyn ay horseedka u noqdeen waxa uu lahaa sababo u gaar ah. Marka ugu horraysa waxa waqtiyadaa horumar weyn laga gaaray fikradaha Juqraafiyada Adduunyada, Cilmiga Badda iyo Sancada Maraakiibta. Fikradaha Juqraafiyada Adduunyada waxa horseed u ahaa dawladihii Talyaaniga. Waxa tusaalo ahaan, waqtiyadaa culimada Talyaanigu ay waqtiyadaa soo saartay Jiheeyaha Badda. Jiheeyuhu waxa uu awood maraakiibta u siiyey in ay badda aad ugu fogaadaan iyo inay habeen iyo maalin socdaan.

Mid kale oo iyana muhiim ahi waxa ay ahayd in iyada oo dawladaha Yurub muddo badan ay dahabka baahi dheeraad ah u qabeen, ay haddana taasi waqtiyadaa sii siyaaday. Dahabka intiisa badan Yurub waxay ka heli jirtay dalka Shiinaha iyo Hindiyo. Dawladaha Yurub Hindiya waxa ay waqtiyadaa u u yiqiineen dalalka koonfurta iyo koonfur-barida Aasiya oo dhan. Shiinaha, Yurub waxa ay u tiqiinay waqooyiga Shiinaha ee hadda.

Qarnigii 13aad bilowgiisii ilaa qarnigii 14aad dhexdiisii ayey dalalka Shiinaha iyo Hindiya yimaadeen ganacsatooyin Yurub ah. Waqtigaas Aasiya inteeda badani waxa ay gacanta ugu jirtay xukunka Mongooliya. ~~Magaalooyinka~~ Genuuya, Feniisiya iyo kuwo kale oo dalalka Talyaaniga ka mid ah, Waxa ay halkaas Badda Cad uga soo gudbi jireen dalalka Aasiya ee Bariga Dhexe iyo Bariga Fog. Hase yeeshee markii qarnigii 14aad qaybihiisii dambe uu xukunkii Mongooliya dalalka Shiinaha ka baaba'ay ayuu xiriirkaas Yurub ay dalalka Aasiya la lahayd istaagay. Isla waqtigaas naftiisa, dalalka Aasiya badankooda sida Kriimiya, Aasiyada yar, Suuriya, Qubrus, Falastiin iyo kuwo kale waxa taliskooda gacanta ku dhigtay Imbe-



ridooriyaddii Cusmaaniyiinta. Waxyaalahaas oo dhammi waxa ay Yurub ka gooyeen xiriirkii ay la lahayd dalka Shiinaha iyo Hindiya. Waxa isla markaa ay qayb weyn ka qaateen sababaha ay Yurub u noqotay horseedkii xiriirinta juqraafiyada adduunyada.

**Bortoqaal iyo kaalinteedii xiriirinta Juqraafiyada Adduunyada:**

Qarnigii 15aad wixii ka horreeyey Bortoqaal waxa ay ka mid ahayd waddanda aad ugu liita xagga dhaqaalaha iyo dhaqankaba. Hase yeeshee, xiriirinta juqraafiyada dunida waxa ay u suuro gelisay in waqtiyadii dambe ay noqoto xoogga dunida. Marka laga bilaabo qarnigii 15aad Bortoqaal waxa ay dagaal isdaba jooga ku soo qaadday dalka Muriitaaniya. Isla markaas waxa sahamis ballaaran ku samaysay Badda Atlaantikada si ay u gaarto xeebaha Afrikada Koonfureed una gasho. Xeebahaas Afrikada Koonfureed iyo kuwo Afrikada Galbeedba Bortoqaal waxa ay si fiican warkooda uga heli jirtay qorayaasha Carabta. Sidaa awgeedna, waxa ay fikrad fiican ka haysteen nolosha dalalkaas.

Doorka ugu weyn ee Bortoqaal ay ku geli lahayd qaaradaha kale waxa ka cayaaray nin ka tirsanaa qoyska reer Yurub. Ninkaas oo magaciisa la oran jirey Heneri (1394-1460) kuna magac dheeraa Badmareenka Heneri ayaa soo diyaariyey qorshayn ay Bortoqaal ku gasho Afrika. Qorshayntaasi taageero buuxda ayey ka heshay dawladda Bortoqaal. 1487-1488kii, nin badmareen ahaa oo magaciisa la oran jirey Batoolami Diyaas ayaa kormeer ku sameeyey xeebaha Afrika una dhaafay Badweynta Hindiya. Gelista Bortoqaal ee Afrika waxa isna door weyn ka cayaaray nin la oran jirey Bidro Koofilayaana oo Boqor Juwaankii 11 sahamis sir ah ugu diray Hindiya iyo Afrika. Bidro, waxa uu 1487-1489 socdaalkiisa ka bilaabay Afrikada waqooyi, waxaana uu dhaafay Dekedaha Bershiya. Bidro ugu dambeyntii waxa uu xagga ka soo galay badweynta Hindiya ilaa xeebaha Afrika. Waxa uu halkaas ka soo galay dekedda Sofala ee dalka Musanbiik.

**Helitaankii Qaaradda Ameerika:**

Markii dawladda Bortoqiisku ay wararkaas ka heshay Afrika waxa ay bilowday inay ku talaabsato sidii ay dalalkaas ga-

canta ugu dhigi lahayd. Isla waqtigaas waxa jirey dalal kale oo ay dawladaha Yurub raadintooda ku jireen, gaar ahaan dawladda Bortoqiiska. Dalalkaas waxa ka mid ahayd qaaradda Ameerika. Culimada juqraafiyada ee Yurub waxay ka haysteen fikrad ah inay jiraan dhulal kale oo aan weli la xiriirin qaaradaha adduunka oo ay ka mid tahay Ameerika. Hase yeeshee fikradda ay ka haysteen waxay ahayd mid qalad ah. Iyada oo uu ku jiro ninka la oran jirey Bawlo Toskeneeli oo ka mid ahaa culimada aqoonta dheer u lahayd cilmiyada juqraafiga waxa ay u qabeen in wixii Yurub galbeed ka xiga oo dhammi ay yihiin Aasiya.

Culimadii juqraafiyada ee waqtiyadaa guud ahaanba waxay aad isugu khilaaf sanaayeen tiyooriyada dhismaha dhulka iyo sida loogu kala gudbi karo. Culimadaas waxa ka mid ahaa Maarko Boolo, Bitoolemi iyo kuwo kale oo badan. Waxa isna fikrad u gaar ah oo ku saabsan dhismaha dhulka watay nin badmareen ahaa oo la oran jirey Kristoofar Koloombas, taariikhda nolosha Koloombas iyo heerka tacliintiisuba aad bay isugu qasan yihiin. Lama yaqaan sida uu Koloombas ku noqday badmareenka iyo in uu tacliin lahaa iyo in kale. Si kastaba ha ahaatee, Koloombas aqoon fiican uma u lahayn juqraafiyada dunida. Fikradda qaladka ah ee juqraafiyada adduunyadu ka haysato awgeed ayuu Boqorka Bortaqiisku u diiday inuu Koloombas ku taageero safar sahan ah uu doonaayey in uu 1484kii dawladda Bortoqiiska u sameeyo. Koloombas waxa uu qabay in uu in ka yar 300 oo mayl xagga badda Atlaantikada uu ka gaari karo Jabbaan. Si kastaba ha ahaatee, laba sannadood ka dib, Koloombas waxa sahamis ka oggolaatay Boqorradii dalka Isbeyn - Isabbella. 2dii Ogost 1492 ayuu socdaalkiisii bilibay. Markii uu ilaa 7dii Oktoobar socday, ee sidii uu filenaayey gaari weeyey Jabbaan iyo meel kale toona ayey colkiisii baqdini u dhammaatay. 9 Oktoober ayuu ku ballan qaaday in uu 3 maalmood ka dib noqonaayo haddii ay beled arki waayaan. Hase yeeshee saddex maalmood ka dib ayuu ku soo baxay dhulbadeed ka mid ah dhulbadeedyada Bahaaman, waxaana uu u bixiyey Saan Salfadoor.

Koloombas waxa uu rumaysnaa ilaa dhimashadiisii in uu gaaray Aasiya. Waxa ka dhaadhacsanayd in haddii halkaas uu hore uga sii yar socdo uu ka tegi lahaa Jabbaan.



Koloombas waxa uu noloshii ku dhammaystay sahamis. Waxa uu helay dalal badan oo ay ka mid ahaayeen Ameerikada Koonfureed iyo dhulbadeedo dhowr ah.

**Qaybintii dunida ee boobka :**

Markii uu Koloombas helay dalalka Ameerikada Koonfureed, waxa markiiba iskaga hor yimid labadii dawladood ee waqtigaas xoogga Yurub ahaa. Labada dawladood waxa ay ahaayeen Botroqaal iyo Isbeyn. Bortoqaal waxa ay u haysatay in badaha iyo dhulka Hindiya loo maro oo dhan ay iyadu leedahay. Isbeella oo ahayd boqorrada Isbeyn arrintaas way is hor taagtay. Markii uu khilaafkaasi aad u xumaaday ayuu Boobkii Diinta Masiixiga Aleksandarka VI dhexdhexaadiyey labadaa dawladood. Isaga oo khariidadda la kaashanaya, Boobku waxa uu badaha iyo dunida inteeda badanba u qaybiyey Bortoqaal iyo Isbeyn.

**Badmareenka Faasko Da Gaama :**

Markaa uu Diyaas Bitoolami galay xeeba ka mid aha qaarradda Afrika, ayey Bortoqaal bilowday inay isu diyaariso inay si fiican u deristo dariiqa loo maro Hindiya ee badda iyadu uun ka taliso. 1496 ayey dawladda Bortoqiisku goosatay inay Hindiya u dirto koox badmareeno ah. Kooxdaas waxa madax looga dhigay ninka la oran jirey Faasko Da Gaama. Ninkaasi caan ku ma uu ahayn badmareenimada iyo dalka Bortoqiiska toona, hase yeeshee waxa doortay Boqorkii Bortaqiiska ee magaciisa la oran jirey Maanwel. Faasko Da Gaama waxa uu ku wareegey xeebaha Afrika badan kooda. waxaana uu galay dalal badan oo ay ka mid tahay Soomaaliya. Dalalkaas Faaska Da Gaama waxa uu ka ogaaday sida Hindiya halkaas looga tegi karo. Da Gaama waxa uu xoog ku taxaaby badmeero Carab ah si ay ugu hoggaamiyaan waddada Hindiya. Waxa Carabtaas ka mid ahaan nin badmareennimo ku caan ahaa oo magaciisa la oran jirey Axmed Ibno Majiid, 31 Ogost 1498 ayuu Faasko Da Gaama galay Kalkata.

Safarka Faasko Da Gaama ee Hindiya waxa uu keenay in la helo dariiq sahlan oo dawladaha Yurub ay Hindiya ka tegi karaan. Marka labaadna, waxa uu safarkaasi jideeyey gumeysiga Yurub ee Hindiya iyo Bariga fog oo dhan.

**Badmareenkii Majilaan :**

Isbeyn iyo Bortoqaal waxa ay filayeen in Ameerika laga helidoono bad looga gudbo Aasiya. Hase yeeshee taasi way u suuro geliweydey. labadaa dawladoodba waxa ay doonayeen inay helaan dariiq la isaga gudbi karo Hindiya iyo Shiinaha. Taasina ilaa qarnigii 16aad uma ay suuro glin. Ugu danbayntiina taasi waxa ay u suuro gashay Badmareen reer Isbeyn ahaa oo magaciisa la oran jirey Fernaan Majilaan. (1480-1521) ninkaasi waxa uu helay jidka Badda Deggan laga tegi karo dalalka Aasiya. Majilaan waxa uu socday ilaa dalka Filibiin. waxaana uu halkaas gaaray 6dii Maarso 1520. Isla maalintaas. Majilaan iyo afartan nin ~~nin~~ oo la socdayba waxa lagu dilay halkaas.

**Xiriirinta juqraafiyada dunida iyo siyaabahii dalballaarsiga ee dawladaha Yurub :**

Siyaasadda xiriirinta juqraafiyada dunida waxa saldhig u ahaa dawladaha Yurub oo doonayey inay helaan waddooyin ganacsi oo isku xira iyaga iyo dalalka Shiinaha iyo Hindiya. Dawladaha hawshaas bilaabayna waxa ay markii hore ku koobnaayeen dalalka Bortoqaal iyo Isbeyn. Hase yeeshee. siyaasaddii xiriirinta juqraafiyada dunida way isbeddeshay. Siyaasaddaasi waxa ay isu beddeshay dawladaha Yurub oo bilaabay siyaasad cusub oo dal balaarsi ah.

Dawladda Bortoqiiska oo ahayd horseedka xiriirinta juqraafiyada dunida ayaa haddana noqotay horsocodka siyaasadda dal ballaarsiga ee Yurub. Dalalkii ay ugu horraysay ee Afrika oo ahaa Angoola, Koongo, Musambiik iyo dhulbadeedyo dhowr ah waxa ay markiiba ku bilowday gumeysi. Isla sidaas oo kale dawladda Bortoqiisku waxa ay isku dayday inay xukunkeedii hoos keento qaybo badan oo ka mid ah dalalka Hindiya, Indooneesya, Shiinaha iyo meelo kale. Dawladda Isbeyn iyana waxa ay weerar ku qaadday dalalka Ameerikada Koonfureed. 1519kii ayuu ninka la oran jirey Hernaando Koortes u ambabaxay dalka Mcksikoo si uu u soo baabi'iyo Talisdhaxaltooyo la oran jirey Astek oo halkaa ka dhisnayd. Ka dibna dawladda Isbeyn waxa ay talaabo-talaabo gacanta ugu dhigtay Ameerikada Koonfureed oo dhan.



Intii ka horreysay qarnigii 16aad siyaasadda dalballaarsigu waxa ay ku koobnayd dawladaha Isbeyn iyo Bortoqaal. Qarnigii 16aad qaybihiisii hore. waxa ku soo biiray dawladda Ingiriiska. Dajka iyo Faransiiska. Iyagaana ugu dambayntii horseed u noqday siyaasadda dal ballaarsiga.

Qarniga 16aad bartamihiisii waxa dagaal weyn oo xagga badda ah iskaga hor yimid Isbeyn iyo Ingiriiska. Waqtigaas xoogga badda waxa uu ahaa Isbeyn oo lahayd ciidan badda oo aan weligii laga adkaan laguna magacaabi jirey «Armaada». 1588kii ayey dawladda Ingiriisku jebisay Armaadadii Isbeyn. Halkaas xooggii badda waxa kula wareegtay dawladda Ingiriiska. Taasina waxa ay dawladda Ingiriiska u suuro gelisay inay dunida isku balaariso. Qarnigii 17aad bilowgiisii dawladda Ingiriiska waxa u suuro gashay inay gobolka Firjiiniya ee Ameerikada Waqooyi gumeysato. Halkaasna waxa ay gumeysigeedii kaga sii fidisay Ameerikada Waqooyi badankeedii. waxa kale oo ay isla waqtiyadaas qabsatay Giriin-Laand.

1632-1655 dawladda Ingiriisku waxa ay qabsatay Jarmalka iyo dhulbadeedyo badan oo ku yaal Badweynayaasha Atlaantikada iyo Badweynta Deggan. 1698kii waxa ay Ustereeliya u dirtay ninka la oran jirey Daambiyar si uu uga war keeno dalalkaas. Mar labaad ayey dawladda Ingiriisku u dirtey nin ciidanka ka tirsanaa oo magaciisa la oran jirey Kuuk. ugu dambayntii dawladda Ingiriisku gacanta ayey ku dhigtay Ustaraaliya. Ustareeliya dadka ku noolaa ee lagu magacaabo Aborijiniska waxa ku dhacday nasiib darro gaar ah. Taas waxa ay ahayd iyada oo dalkaas loo masaafurin jirey dadka dalka Ingiriiska denbiyada xun ka gala, iyaguna dadkaas halkaa ku noolaa ayey baabi'in jireen. Markii dawladda Ingiriisku ay dalkaas gashay, dadka ku noolaa waxa lagu qiyaasay ilaa 300,000. 1921kii oo dadkaas la fiiriyeyna waxa ay noqdeen 75,000.


Waxa iyana siyaasaddii dalballaarsiga ee waqtigaas qayb weyn ka qaadatay dawladda Dajka. Qarnigii 17aad bilowgiisii waxa ay awoodday inay doorweyn ka cayaarto ganacsiga Badweynta Hindiya. Isla waqtiyadaas ilaa qarnigii 17aad bartamihiisii waxa dawladda Dajku qabsatay dhulbadeedyo badan oo ku yaal Badweynayaasha Atlaantikada, ta Deggan iyo Hindiyaba. 1619kii dawladda Dajku waxa ay qabsatay Indoneesi-

ya.. Badmareennada Dajku waxa ay intii u dhexaysay 1606-1644 markii ugu horraysay heleen Ustareeliya geeskeeda galbeed iyo geesteeda waqooyi. Waxa isna intii u dhaxaysay 1642-1643 helay Nuyuusiland nin Daj ahaa oo badmareen ah magaciisana la oran jirey Abbel Tasmaan.

Dawladda Faransiiska ayaa iyana ku biirtay siyaasadda dalballaarsiga ee dawladaha Yurub. Qarnigii 17aad bartamihiisii dawladda Faransiisku waxa ay qabsatay qaybo ka mid ah Kanada iyo Qiyaanada Ameerika koonfureed.

Xidhiidhinta Juqraafiyada ee dunida waxa ay Aidhibreeb weyn ku sameeysay nolosha dalalka Yurub. Xidhiidhinta juqraafiyada ee dunida haddii si loo eego waxa ay ahayd faa'iido weyn oo xag kasta oo nolosha dadyowga oo dhan wax ka tari lahayd. Haddii si kale loo eegana dalalka Yurub noloshoodii way dhisatay dunida inteeda kalena way baabi'isay.

## SAHAMISKII BOORTAQIISKA IYO ISBAANISHKA






Layli :

1. Ka sheekee sida ay ku timid xiriirintii dunida?
2. Maxay ahaayeen sababaha ugu waaweyn ee dhaliyey arrintaas?
3. Maxaa cilmiyada juqraafiyada ku soo kordhay waqtiyadii xiriirinta juqraafiyad dunida?
4. Maxay ku noqotay inay dawladaha Yurub horseed u noqdaan xiriirinta juqraafiyada dunida gaar ahaanna Bortoqaal iyo Isbeyn?
5. Kuwee baa ugu caansanaa **badmareenadii horseedku u** ahaa xiriirintii juqraafiyada dunida?
6. Sidee baa loo helay Ameerika?
7. Maxaad ka sheegi kartaa badmeerka Koloombas, Majilaan, Faasko Da Gaama?
8. Maxay waqtiyadii dambe isu beddeshay xiriirintii juqraafiyada dunida?
9. Maxay ahayd sababtii uu Boobka Fatikaanku dunida u qaybiyey, sidee buu se u qaybiyey?
10. Ka sheekee doorka ay xiriirintii juqraafiyada dunida ka ciyaartay gumeysiga qaaradaha kale?
11. Sheeg khasaaraha iyo faa'iidada ku jirey xiriirintii Juqraafiyada dunida?
12. Sheeg dawladihii ka qayb qaatay siyaasaddii dalballaarsiga ee ka dambeysay xiriirintii juqraafiyada dunida ka cayaartay?
13. Dawladdee baa qarnigii 17aad noqotay xoogga badaha?

## KACAANKII WARSHADAHA (1750)

Waayadii dhexe iyo wixii ka horreeyey dadweynaha adduunka ku dhaqan intooda badani waxay ahaayeen beeraley ku nool xaafado, noloshooduna ku xiran tahay waxyaabaha dhulka ay ku beertaan.

Qoysaska xaafadahaas duurka ah ku noolaa iyaga ayaa cuntadooda soo saari jiray, markaasna xaas kastaa isaga ayaa samaysan jiray qalabka uu aqalka kaga adeegto, kuu beerta kaga shaqaysto iyo waxyaala kale ee uu u baahan yahay. Qalabkaasna waxay ka samayn jireen waxyaabaha dabiiciga ah ee laga helo degaanka Hareerahooda ah, Suufka iyo Haraga xoolahooda.

Beryahaas dadku debedda waxyaalo badan ugamay baahan jirin. Yaalaabase waxa dibedda uga iman jiray waxyaalaha ay ka mid yihiin Milixda, Marashada caaradda kaga jirta Irfida ay beerta ku qotaan iyo waxyaabaha lays ku qurxiyo ee ay ka mid yihiin Dahabka, Naxaasta iwm.

Sida aynu ognahay magaalooyinka camiraadoodu waxa ay ku xiran tahay kolba xiriirka ganacsiga ee ay debedda la leeyihiin. Sidaa darteed xaafadahaase aynu soo sheegnay ee uu dadku duurka ku noolaa, baahida ay magaalooyinka u qabaanna yarayd, waxa ay ahaayeen magaalooyin yaryar.

Isla beryahaas waxa magaalooyinkaas yaryar ku noolaa niman farsamo yaqaana ah, nimankaasuna waxa ay samayn jireen, hubka, waxyaabaha laysku qorxiyo iyo dharka.

Wayadaas aynu ka hadlayno ganacsigu waxa uu ahaa mid isdhaafsi ah. Nimanka ganacsatada ihi intay alaabta oo ceeriin u dhiibaan farsamo yaqaannada ayaa marka ay dhammeeyaan inta ay ka urursadaan ay beeralayda ka soo iibin jireen.

Wayahii dhexe dhammaadkoodii Yurub waxa ay samaysatey maraakiib waaweyn oo badda dhex maaxda sida darteed waxa ay si hufan u baratay dalal badan oo ay hore sheekadood uun ay u maqli jireen iyo dhulal badan oo aanay hore u aqoon.



Dhulalkaa ay Yurub baratay aad ayay uga faa'iiday, waayo waxa ka soo galay waxyaabo badan oo aanay hore u aqoon ha noqoto cunto, macdan iwm. Markii ay Yurub dalalkaas baratay, muddo yar ka dib ayey giddigood la samaysatay xiriir ganacsi sida darteedna waxa ay noqotay xuddunta ganacsiga adduunka.

Iyada oo taasu jirto haddaynu guud ahaan u indho indhayno caynka uu ahaa xaalka Yurub waayadii ka horreeyey 1750kii waxa aan ogaaneynaa in ay Yurub ku koobnayd ummado dadkoodu tiro yar yahay. Dadkaasna in yar oo ganacsigaas aynu soo sheegnay maamuli jirtay ama lahayd mooyaan intooda badani waxay ku noolaayeen nolol aad u xun oo saddexda qofka u daraniba (waa cudur, gaajo iyo jahli) ay haysteen.

Xaalka Yurub oo caynkaas ah ayaa waxa ka billaabmay markay taariikhdu ahayd 1750kii kacaankii Warshadaha, kaasoo xaalkeedii beddelay waji cusubna u yeelay.

Kacaankaasu kuma koobnaan isbeddel ku dhaca awooda wax soo saaridda ee se iqtisaadka iyo nolosha Yurub, waxa uu ku dhaliyey isbeddel wada gaaray dadka adduunweynaha ku dhaqan oo dhan. Xagga iqtisaadka waxa uu badiyey alaabtii, habkii wax loo soo saari jirayna inta hore loo mariyey ayaa waqtigii lagu soo saari jirayna la yareeyey. Xagga siyaasadda, halkii waayadii hore boqorka ay xukunka kala maamuli jireen wadaadadu iyo nimanka akhyaarta ihi ayaa waagii fufka oo kacaanka warshadda in yar ka horreeyey waxa beddelay oo maamulkii qabsaday ganacsatada. Markaa waayadii kacaanka warshaduhu uu Yurub ka billaabmay waxa xukunka hayey dawlado had iyo jeer, xaq iyo xaq darraba ganacsatada garabtaagan, oo danahoodana, danaha dadka kale ka kor yeela, soona hormariya.

Markaan culimadii diintu u ahayd tab iyo xeelad ay ku shaqaystaan ayaa maamulkii laga saaray, diintii dadka xooggii ay ku lahaydna wuu yaraaday waxaana beddelay qadaris ku unkan sayniska.

**Sida u ku yimid magacu:**

Isbeddel iyo kacaan marka aynu ka hadlayno, meesha uu doono kacaanku ha ka dhasho ee waa in uu noqdo mid aan soo araaran, oo muddo soo jiitamin ee si deg-deg ah oo kedis ah u dhasho. Isbeddelkaasuna waa in aanu noqon mid magac uun ah, waa in uu noqdaa mid muuqda isla marka uu dhashayna muujiyaa isbeddel run ah, dhaqdhaqaaq, iyo nolol cusub oo tii hore ka duwan.

Kacaanku ma aha sida dadka qaarkiis u heysto wax habka siyaasiga ah uun saameeya waxa uu se noqon kara kacaan ku dhaca habka ganacsiga, habka dhaqanka, tacliinta, warshadaha iwm.

Haddaba qarnigii 18aad waxa Yurub ka dhacay isbeddel qiimo weyn leh. Dadkii waayadaas noolaa waxa ay ugu muuqdeen in ay yihiin kacaanno run ah. Dadka markii dambe wax ka qoray isbeddelaaddaa waxa ay ku magacaabeen kacaanno. Kacaannadaasna waxa ka mid ahaa kacaankii ganacsiga kii beeraha kii warshadaha iyo kii siyaasiga ahaa ee Yurub ka dhigay hantigoosadka. Kacaannadaa aynu soo sheegnay waa kuwa suurto geliyey saldhigna u noqday nolosha iyo ilbaxnimada adduunyadda ku dhaqanto.

Erayga kacaan haddaynu u qaadano qeexidda aynu hore u soo sheegnay waxa aynu aqoonsanaynaa in kacaannadan aynu soo sheegnay oo dhan midkoodna kacaan run ah ahayn, waayo inkasta oo isbeddelaaddaasu ahaayeen isbeddelow waaweyn oo isbiirsadkoodu sameeyey nolosha cusub ee binuaadamka, haddana may ahayn sida ay dadka qaarkood ugu muuqdaan isbeddello mar qura dhacay oo laga arki karo micnaha uu eraygu leeyahay.

Hase yeeshee waxa ay ahaayeen isbeddello muddo dheer kolba lug soo qaadaayey. Taasna waxa ku tusinayaa horta marka ugu horreysa tan iyo waagii taariikhda binu-aadanku bilaabantay, ninka iyo dabeecaddu halgan aan marna damin ayey ku wadajireen. Halgannadaasna haddeynu u fiirsanno waxa inooga muuqanaya in qofku maalinba maalinta ka dambaysa, noloshiisu heerkii hore ay joogtay sare uga soo qaadayey.



Haddaba haddii aynu u fiirsanno isbddellada qofka sameeya waxa aynu ogaanaynaa in waxa qofku noloshiisa iyo ilbaxnimadiisaba ku kordhiyaaba aanay ahayn wax cir ka soo dhac ah oo isbeddel hore leh keena ee se isbeddelkii kastaaba muddo ayuu qaadanayey. Isbeddelladaana waxa had iyo jeer saldhig u ahaa aqoontii hore ee ay dadka binu-aadamka ihi urursadeen. Haddaba kacaannadan aynu ka hadlayno ee qarnigii 18aad dhashay oo dhami, sida runta ah magac «Kacaan» waa iskala xiriiray ee waa isbeddello la mid ah kuwa hore ee uu qofku soo sameeyey. Taasna waxa aynu ka aqoonsan karnaa haddaynu kacaanka warshadda tusmo ahaan u qaadanno, dhalaaliska birtu waxa uu ka mid ahaa waxyaabihii qaybta weyn ka qaatay kacaanka warshadaha. Hase yeeshee dhalaaliska birtu muu bilaabmin qarnigii 18aad manuu ahyan kacaan dhab ah oo si kedis ah u yimid, ilbaxnimadii adduunkana si dhakhso ah u beddelay ee waxa uu ahaa isbeddel ka mid ah kuwii horeba dadku u soo samayn jireen oo ku dhisan kana soo maaxay aqoontii hore ee dadka. Sababaha isbeddelladaa dhacay qarnigii 18aad kacaanno loogu magacaabayna waxa ka mid ahaa:

Waayadaa dadkii noolaa, ee aqoonta lahaa markii ay isu qiyaaseen isbeddelladii waayadii hore ka dhici jiray adduunweynaha iyo kuwii dhacay intii u dhexaysay 1760 ilaa 1790 waxa ay aqoonsadeen in isbeddellada dambe ka lixaad weynaayeen kuwii hore. Sida darteed nin Faransiis ah oo la oran jiray Blankuwi ayaa isbeddelkaas warshaddaa ee dhacay u bixiyey kacaankii warshadaha.

In kasta uu magacaas bixiyey ninkaas faransiiska ihi haddana waxa magacaas hirgeliyey nin Ingiriis ah oo taariikhda abwaan ku ahaa lana oran jiray Arnold Tuwaane (185-183), wixii ka horreeyey markay taariikhdu ahayd 1750kii isbeddelka warshaduhu sidii isbeddelaadii ka horreeyey ayuu aad u gaabinayey, beryihii dambese isbeddelkaas dhakhsihiisu aad ayuu u kordhay sababtuna waxay ahayd taariikhdii u dhxeysay 1750-1770kii isbeddello doora oo muddadii taariikhda ka horreysay oo dhan dhimmaayey ayaa bilaabmay oo u dhacay si isdaba joog ah.

Waxa isbeddelladaas ka mid ahaa warshadihii oo noqday dar waaweyn oo aan lagaga shaqayn karin sidii waayadii hore aqallada gudahooda iyo geerashyadii farsamo yaqaannada hore.

Ta labaad baryihii hore dadku shaqadu uu u baahdo waxa uu ku qabsan jiray muruqiisa iyo muruqa xoolahiisa, waayadan dambe si waxa ay ku beddeleen in ay ku shaqaystaan mashiinada. Isbeddelkaasna waxa keenay in alaabtii uu dadku u baahnaa ay mashiino sameeyaan si ka hawl yar, kana dhakhso badan, kana wanaagsan sidii beryihii hore gacanta loogu sameyn jiray.

Arrimahaa aynu soo sheegnay markii ay isbiirsadeen waxa ay si dhakhso leh isbeddel uga muujiyeen noloshii iyo ilbaxnimadii adduunweynaha oo dhan. Markii ay warshaduhu hore u markaas samaynayeen, Balankuwi iyo raggii culimada ahaa ee la gedo ahaa waxay rumaysanaayeen in horumarkaas warshaddu muddo dabadeed joogsanayo. Waxayna kale oo ay qabeen in marka isbeddelaadaasu keeneen in ay mar labaad nolosha dadka adduunka ku dhaqani siibana Yurub, ay noloshoodu xasili doonto, wixii isbeddel ah ee dambe ee dhacaayana aanay si degdeg ah u dhici doonin ee ay sidii waayadii hore muddo doora soo dhismi doonaan waqti door ahna kala dambayn doonaan.

Isbeddeladaas dhacay waayadaasi ee la magac baxay kacaanka warshaduhu may ahayn dar dhaliyey isbeddello xagga dhaqaalaha uun ku aada ee waxa ay isla markaas dedejiyeen isbedelladii dadka noloshooda taabtay. Kacaannada waayadaa soo bilaabmayna ma aha qaar muddo yar ku joogsaday sida dadka qaarkiis qabaan ee waa dar ilaa mantadan socda.

**Layli 1aad Kacaankii Warshadaha :-**

1. Kacaankii warshadaha ka hore dadweynaha adduunyada intooda badani waxa ay ahaayeen beeraley.

2. Magaalo kasta camiraaddeedu waxa ay ku xiran tahay kolba :-



b) Dadka gudaheeda jooga inta ay tiro le'eg yihiin.

t) Alaabta lagu sameeyaa inta ay le'eg tahay.

j) Siday ay xiriir ula leedahay addunyada kale (ha kale (ha ahaato miyi ama magaalo).

3. Kacaankii warshadaha ka hor ma jirin dad farsama yaqaan ihi.

4. Yurub barashadii ay adduunweynaha bartay;

b) Way ka faa'iidday waayo waxa ay ka heshay alaabooyin badan oo waxtar ah, dalal badan oo aanay hore u aqoonna way baratay.

t) Way ku khasaartay waayo waxa ay baratay dad aqoontooda iyo dhaqaalahooduba liito oo macaawono weyn uga baahan.

j) Kuma khasaarin kumana faa'iidin.

5. Kacaankii warshaduhu waxa uu bilaabmay mar ay sannadu ahayd 1750.

6. Kacaanku waa isbedeel :

b) Laga tashaday muddo badanna soo jiitama si tartiiba oo nidaamsanna wax uga beddela nolosha iyo fikirka dadka.

t) Si kadiso ah oo deg-deg ah u dhaca isla markaasbana si deg-deg ah wax uga beddela fikirka iyo nolosha dadka uu ku dhaco.

j) U dhexeeya tilmaamahaas aynu ku soo sheegnay A iyo B.

7. Kacaankii warshadaha ee 1750kii waxa uu ku dhacay habka siyaasiga ah oo qura.

8. Isbeddelaadda taariikhda banu-aadamka ku dhacaa waa dar aan soo jiitamin ee mar qura uun dhaca.

9. Dhalaaliska birtu waxa uu ka mid ahaa waxyaabihii saldhigga u ahaa kacaankii warshadaha.

10. Sababaha isbeddelaaddii qarnigii 18aad kacaanno loogu magacaabay waxa ka mid ahaa :-

b) Isbeddello binu-aadamka ku dhaca ayey ugu horreeyeen.

t) Isbedello nolosha banu-aadamka oo dhan saameeya ayey ugu horreeyeen.

j) Isbedelladii dhacay u dhexaysay:

11. 1760kii ilaa 1790kii waxa ay ahaayeen isbedello ka waaweyn kana baahsan marka loo qiyaaso kuwii ka horreeyey.

12. Magaca kacaankii warshadaha waxa bixiyey:

b) Nin Faransiis ah oo la yiraahdo Balankuwi.

t) Nin Ingiriis ah oo la oran jirey Tuwaanbe.

j) Labadooda midna ma bixin.

13. Waayadii kacaanka warshaduhu uu bilaabmay dadku waxa ay bilaabeen in ay ku adeegtaan muruqooda iyo muruqa xoolahooda, Balankuwi iyo culimadii la gadaa ahayd waxa ay qabeen in Yurub marka ay ka baxdo kacaanka warshadaha ay dib ugu noqon doonto noloshii xasiloonayd ee waayadii dhexe oo kale.

**Waxyaabihii dhaliyey kacaankii warshadaha :-**

Way adagtahay si waxyaabihii dhaliyey kacaankii warshadaha oo dhan aynu halkan ugu soo koobno, waxa aynuse halkan wax kaga taataabanaynaa waxyaabiii ugu muhiimsanaa.

Waxaana ka mid ah horumarkii uu qalabka wax soo saarku (tech) gaaray intii ka horreysay kacaanka warshadaha.

Sidii aynu horeba u soo sheegnay kacaanka warshaduhu ma ahayn mid si kedis ah ku yimid ee waxa uu ahaa mid ku dul dhismay aqoontii iyo farsamadii dadkii ka horreeyey. Dadku xiisaha iyo kalgacaylka uu u hayo in uu hore u mariyo



labka wax soo saarka ma oran karno waagaan ayuu bilaabmay, ee se waxaa uu heer sare gaaray qarnigii 14aad markii uu bilaabmay kacaankii ganacsigu.

Waxyaabaha beryahaas la soo saarayna waxa ka mid ahaa saacadda bandulamka leh, kulbeega, bumka hawada (air bond) iyo spining wheelka. Waxa kale oo jirtay waxyaalo iyagu hore u jiray hase ahaatee waxyadaas la sii hagaajiyey waxaana ka mid ahaa :-

Sida birta loo dhalaaliyo, sida naxaasta loo sameeyo sida qarshooyinka loo sameeyo, sancada looxa iyo dhismaha maraakiibta. Waxyaabahaas aynu kor ku soo sheegnayna waxa ka mid ahaa waxyaabo u baahnaa maamul la mid ahaa ka aynu maanta warshadaha ku maamulno. Waxyaabahaasna waxa ugu mihimsanaa mishiin dharka xariirita ah lagu sameeyo oo dalka Talyaaniga laga soo saaray markay taariikhdu ahayd 1500, mishiinkaasu waxyaabaha uu u baahnaa waxa ka mid ahaa dhismo weyn oo ku dhow ka warshadaha maanta ay u baahan yihiin, oo kale iyo shaqaale badan.

Wallow aanay mishiinnadaa hore kuwii ka dambeeyey la karti iyo wanaag ahayn, haddana taasu waxa ay ina tusinaysaa in kacaankii warshaduhu aanu meel cidla ah ku dhismin, ee uu lahaa saldhig aad u qoto dheer. Waxa iyana jirtay in kacaankii warshaduhu uu sameeyey dabaqad maalqabeen ah, dabaqadaasuna waxay u baahnayd beryihii kacaankii warshaduhu bilaabmayey meelo cusub oo lacagtooda geliyaan oo dabeedna ay aad ugu macaashaan. Waayadii hore dabaqadaasu waxa ay lacagtooda gelin jireen meelo ay ka mid yihiin, dhulalka macdanta laga qodo, baananka, dhisma maraakiibta iwm. waayadii dambese dad tiro badan oo ganacsato ah ayaa xoolahoodii meelahaas wada gashay sidaa darteed macaashkoodii ayaa yaraaday markaasaa aad loogu baahday meelo kale oo lacagta la gasho.

Dabadeed dadkaas ganacsatada ihi waxa ay ogaadeen in meesha u bannaan in lacagtaas la gashay tahay warshadaha. Ta kale, Yurub waxa ay ka mid tahay qaardaha adduunka kuwa ugu yaryar markaas uma suurto gasheen in ay xagga warshadaha hore uga marto haddii ayna la kaashan dalalka kale ee adduunweynaha ku nool. Warshadaha Yurub laba hal oo lagama

maarmaan ah ayey uga baahdeen adduunka kale. Kuwaas oo ahaa khayraad tiro badan oo haba warshadaha Yurub, irmaan joogta ahna u noqda. Dadka reer Yurubna si ay u hubiyaan in labadaa wax ee halbowla u ahaa wershadahooda in aanay marnaba ka kala go'in ayaa waxa ay bilaabeen in ay gumaystaan dadka ku nool adduunweynaha intiisa kale oo dhan. Waxa isna aad wax ugu taray horumarka warshadaha nidaamkii ganacsiga ahaa oo ay waddamada Yurub ku shaqaysan jireen waagii kacaankii ganacsiga. Nidaamkaas waxa la oran jiray (Markantalism) waxuuna ahaa mid wax kasta ka kor yeelaya ganacsiga iyo lacag urursiga, kuna dhiirinaya qofka iyo ummaddaba in ay sidii ay lacag ku helayaan amaba ay maal qabeen ku noqonayaan ku raadshaan. Nidaamka merkantalismka waa ka saldhigga u ahaa uu ku dul dhismay nidaamka hantigoosadka ihi.

Markantalismka tiirarkiisa waaweyn waxa ka mid ahaa in dalkasta is le'ekaysiiyo waxyaaba uu dibedda u diraayo iyo waxyaaba uu dibedda ka soo qaadanayo. Markaas Yurub xiriirkii ganacsiga ahaa ee awalba iyaga ka dhexeeyey waxa ku sii kordhay Yurub oo noqotay xudunta ganacsiga adduunka oo dhami ku kulmo. Sidaa darted alaabta waddan kasta ah oo reer Yurub adduunwyenaha kale ka soo gelaysay aad ayey u tiro badnayd. Sidaa darteed waddannada reer Yurub dal kastaaba waxa uu isku deyayey inuu alaabta soo galaysa mid u dhiganta debedda u dhoofhso.

Isla markaa waxa ay aqoonsadeen in sida qura ee taa ay u suurta gelinayaan ay tahay in ay warshadihii ay hore u haysteen awooddooda kor u soo qaadaan kuna dadaalaan inay dar kale oo cusub soo saaraan.

Markii Yurub ganacsigeedii iyo iqtisaadigeediiba uu noqday mid ku dhisan warshadaha ayaa wax alaaleh iyo wixii ay warshaduhu u baahdaan ay noqdeen wax dadka Yurub markiiba taabanaya oo ay aad u dareemayaan. Dadkuna sidiisaba waxa uu fakaraa oo uu unug abuur yeeshaa marka dhibaato soo fool saarto amba uu wax aad ugu baahdo. Sidaa darteed dadka reer Yurub intiisii badani waxa ay noqdeen dad warshadaha ka shaqeeya iyo dar horumarintooda ka fakira. Taa waxa tusaalo wanaagsan u ah tallaabooyinka horumarinta dhuxusha laga qaaday. Markii ugu horreysay waayadii 1700 dhuxusha looga baahnaa in birta lagu dhalaaliyo waxa laga soo shidi jiray dhirta. Taasuna waxay dhalisay in dhirta si xoog leh loo gubo, sida darteedna waddamada galbeedka Yuruba qaarkood ayey soo food saartay halis ah in dhirtu si dhakhso leh uga dhammaato.



Dhibaatadaa waxa daawo loo helay markuu sannadku ahaa 1709, oo ninka la oran jiray Abraham Darbay uu ogaaday in dhuxul dhuleedku kaga fiican tahay dhuxusha dhirta, dhalaalinta birta. Markii dhibaatadaa go'aan laga gaaray ayaa markiiba waxa si dhakhso leh u batay dhulalkii laga qodayey dhuxusha, taasuna waxa ay dhalisay dhibaato labaad. Taasi waxay ahayd marka roobabku da'aan ayey dhulalka laga qodayo dhuxushu biyo ka buuxsami jireen. Sida darteed waxaa loo baahday wax biyahaas dibedda loogaga soo tuuro. Arrintaas badhniinkay culimadu u gashayna waata aakhirkii sabab u noqotay hindisaha mishiinka uumiga ku shaqeeya.

**Layligii labaad ee kacaankii warshadaha :-**

1. Waayadii kacaanka warshadaha ka horreeyey dabaqadda maalqabeenka ihi waxa ay lacagtooda gelin jireen :-
   b) Dhismaha maraakiibta.
   t) Dhulalka macdanta laga qodo.
   j) Dhismaha maraakiibta, dhulalka macdanta laga qodo, baananka iwm.
2. Yurub waa qaarad aad u yar sidaa darteed suurto gal uma ahaateen inn ay xagga warshadaha ay hore ugu marto haddii aanay kaashan waddamada kale ee adduunweynaha.
3. Merkantalismku waa habkii ganacsiga ahaa ee wax kasta ka hor yeeli jiray ganacsiga iyo lacag urursiga.
4. Merkantalismku tiirarkiisa waaweyn waxa ka mid ahaa:

b) In dal kastaa uu debedda waxyaalo badan u diro.

t) In dal kastaa uu debedda waxyaalo badan ka keeno.

j) In dal kastaa wuxu debedda u diraayo iyo waxa uu gudaha soo gelinaayo is le'ekeysiiyo.

5. Waxa la ogaaday markay taariikhdu ahayd 1700kii, in dhalaalinta birto uu dhagax dhuxuleedku kaga fiican yahay dhuxusha dhirta.

**Tusaale ku saabsan sida uu u bilaabmay kacaankii warshaduhu**

Markuu sannadku ahaa 1760-1860 warshado naf leh oo la sheegi karaa, waxa ay ahaayeen qaar aad awooddoodu u liidato oo dhakhsaha ay wax u soo saarayaan iyo hawsha ninka shaqaalaha ah ay ka furanaayeenba aad u yar yihiin. Wixiise ka dambeeyey 1760 waxa bilaabmay in halkii awal dadku muruqooda iyo xoogga xoolahooda shaqada uu u baahan yahay ku qabsan jiray, in la soo saaray laguna shaqaystay warshado ku shaqaynaaya makiinado shaqadii aad u hawl yareeyey, awooddii wax soo saarkana aad sare ugu qaaday. Warshadahaas cusubi waxay dhaliyeen in alaabo badan oo markii hore inta gacanta lagu sameeyo ay lacag badan iyo hawl badani ku bixi jirtay, sidaa darteedna aanu qofka caadiga ahi iibsan karin jirin, ee ku koobnayd guryaha dadka maal qabeenka ah, in markii ay alaabadaas warshadahaasu sameeyeen suuqaqa ay ka buuxsantay qiimaheediina jabay, dabeedna dadkii awood uu ku iibsado u helay.

Kacaankii warshaduhu ma ahayn mid mar kaliya adduunka oo dhan ama dalalka Yurub isku mar ka bilaabmay ee dalalka wuu ku soo kale horreeyey waxa aanu u horreeyey dalka Ingiriiska. Sababaha ugu waaweyn ee dhaliyey in kacaanka warshaduhu uu dalka Ingiriiska ka bilaabmo waxa ka mid ahaa waayadaas wadammada kale ee galbeedka Yurub waxa ay dadkoodu isku hayeen madhabsha diinta Kiristaanka. Waddanka Ingiriisku ee sida runta ah a rintaas dalalkaas diimaha laysku hayey ayaa yimi dalka Ingiriiska uguna faa'iideeyey cilmigoodii iyo caqligoodii.



Ta kale warshaduhu waxa ay u baahnayeen sidii aynu horeba u soo sheegnay alaab cayriin oo badankeeda aanay reer Yurub haysan iyo dad iibsada alaabta ka dib marka la soo farsamatumo. Taasna waddanka Ingiriiska waxa awood siiyey isagoo gumeystay dalal badan oo debedda ka ah Yurub. Dalalkaasi uu gumeystay Ingiriiskuna intay warshadaha Ingiriiska qiimo jaban ku siiyaan alaabta cayriin ayay marka dambena qiimo sare kaga gadan jireen alaabta farsamatuman.

Ta saddexaad ee iyana suurto gelisay in waddanka Ingiriisku uu warshadaha kaga hor maro dalalka Yurub waxa ay ahayd dhuxul dhuleed laxaad badan oo dalka laga helay. Waddanka Ingiriiskuna waxa uu noqday mid ka mid ah waddamada ugu dhuxusha badan dalalka Yurub. Tan afraad waxay ahayd iyada oo shaqaale badan oo si jaban ku shaqeeya uu helay, ka dib markii dhulkii ay beeran jireen ay seerteen nimankii maal qabeenka ahaa 1820. Dhulka waqtigaa la seeray waxa badkeedu dhamaa 6 malyuun oo qoodi.

Haddaba laanta ka midka ahayd warshadaha ee ugu horrayntii mikiinadaha isticmaashay waxay ahayd laanta qaabbilsan samayska dharka cudbiga ah. Waayadii hore iyada oo qalabka uu dadku dharka ku samaystaa uu yahay mid dunta hal, hal u miiqa ayaa markay taariikhdu ahayd 1767kii uu soo saaray ninka la oran jiray James Harkeraves makiinadda markii kasta 8 miiq oo dun ah soo saartaa.

Niman kale ayaa iyana gacan ka gaystay horumarinta dunta, waxaana ka mid ahaa raggaasi, Richard Arkwright, iyo Samaal krompton.

Heerkaa fiican ee laga gaaray makiinada dunta miiqda dhibaatooyinkii haystay warshadaha dharka samaynayay may dhammaystirin, waayo markii makiinadda dunta lagu miiqdaa ay heerkaa maraysay, makiinadda dharka rogaysay gacanta ayaa lagaga shaqayn jiray. Taasu waxa ay dhalisay in makiinadha dunta miiqa iyo kuwa dunta dharka ka sameeya aanay isku dhakhso noqon.

Waayadaa ay dhibaatooyinkaasu ka taagnayd warshadaha dharka sameeya, dalka Ingiriiska warshaduhu tiir ka mid ah iqtisaadka dalkaas ayuu ahaa. Sidaa darteed dhibaatada ku timaada warshadaha dharka waxa ay noqotay dhibaato bulshada

Ingiriiska oo dhami indhaha ku wada hayaan. Marka arrintaas laga faalloonyana dadka qaarkii ayaa ku doodi jiray in aanay suurto gal ahayn in makiinadaha dharka sameeya laga dhigo dar iswada sida kuwa dunta miiqa. Dadka qaarkiina arrintaas way ka soo horjeedeen.

Aakhirkiina waxa makiinadii la soo saaray markay sanadu ahayd 1785, hawsheeda waxa la dhammaystiray oo sidii laga doonayey ay u shaqaysay markay taariikhdu ahayd 1820. Waxa iyana makiinadahaas dharka sameeya la xiriira makiinad uu soo saaray nin la yiraahdo Eli Witney sanadu maraky ahayd 1792. Makiinadaas waxay kala sooci jirtay cudbiga iyo iniinyihiisa. Makiinadaas ka horna shaqada gacanta ayaa lagu qaban jiray, aad ayeyna u hawl badnayd una gaabis ahayd. Makiinaddaas cusub ee la soo saaray waxay u baahdeen maamul ka duwan kii hore lagu maamuli jiray qalabka alaabtaas lagu sameeyo, sababtuna waxa ay ahayd, horta warshadahuna way ka waaweynayeen qalabkii hore ee alaabta lagu samayn jiray, sida darteed may ahayn wax aqal gudihiisa amba geerash lagaga hoos shaqayn karayo, ee waxa ay u baahnaayeen dhismayaal waaweyn oo iyaga gaar u ah. Ta kale shaqaalaha ka shaqaynayey warshadaha aad ayuu uga tiro badnaa kuwii hore ee farsamooyinkaas ku shaqaysan jiray. Waayadii dambe ee warshaduhu soo baxeen suurto gal may ahayn in nin farsmo yaqaan ah ama ganacsatada ka mid ah oo aan lacag badan heysanini inuu warshad yeesho.

Kacaanka warshadaha waxa ka dhashay dabaqado cusub oo baddaley fartii bulshadu hore ugu dhignayd. Midi waxay ahayd dabaqad sare oo ka kooban nimankii maalqabeenka waaweyn ahaa kuwaas oo lahaa baananka amase warshadaha waaweyn, dabaqadda labaad waxa ay iyana ka koobnayd ganacsato yar-yar ah oo ay ka mid ahaayeen gedisleyda, dukaanlayda iyo nimanka shaqaalaha ahaa ee mushaarooyinka ladan qaadan jiray ha noqdeen nimanka warshadda maamula amba looyariinta amba kuwa la midka ah.

Labadaa qolo ee ay dabaqada maalqabeenka ahi ka koobnayd wallow ay danahood inta badani isku mid ahayd haddana dhulal ay ku kala geddisnaayeen ayaa jiray dhulalkaasna waxa ka mid ahaa: qolada sare ee maaliyada badan haysatay waxa ay had iyo jeer ka fekeri jireen sidii ay mashaariic ay markiiba



lacag buuran kaga dhuftaan lacagtooda u gelin lahaayeen amba ay ganacsiga laamo ka mid ah iyagu gooni ugu goosan lahaayeen iyaga oo aan cidina kula loolamayn sida darteed had iyo jeer waxay ku doodi jireen in ay dawladdu ganacsiga faraha ka qaaddo. Qolada kale oo had iyo jeer qolooyinkaas aynu soo sheegnay daba taagnayd oo alaabta ka iibsada kuwa warshadlayda ah waxa ay had iyo jeer alaabta ku gadan rabeen qiimaha go'an.

Sidaas awgeed waxa ay dawladda ku dhiirin jireen in ay ganacsiga gacanta la soo gasho oo ay had iyo jeer ka war hayso, qorshaysana hadba qiimaha alaabtu waxa uu noqonayo. Kooxda saddexaad waxa ay ahayd kooxda xoogsatada ah shaqaalaha. Dadka shaqaalaha maanta adduunyada looga yaqaan maraha dad la dhashay kacaanka warshadaha ee sida runta ah way ka horreeyeen. Taasna waxa inooga marag noqonaya Griiga iyo Rooma ay ilbaxnimada adduunka iyaga ugu horreeyeen waxa jiray dada aan addoon ahayn ee magaalooyinka ka shaqaysta qaadan jirayna mushahar. Waayadii dhexe qudhooda dadkii ka shaqayn jiray geerashyadii alaabta lagu samayn jiray waxa ay ahaayeen dad muruqooda ku xoogsada.

Haddaba intii ka horraysay kacaankii warshadaha dabaqaddaa la yiraahdo xoogsatadu aad ayey u yarayd marka loo qiyaaso shaqaalaha intiisa kale waayo waayadaas shaqaalaha intiisa badani waxay ka shaqayn jireen beeraha. Sidaa darteedna waxa ay u badnaayeen dad addoon ah oo ninka ay beerta uga shaqeeyaan iska leeyahay, waayadii dambena dadkaas addoonta ihi waxa ay isu rogeen dad dhulka ka kiraysta ninka leh.

Waayadaas hore iyadoo ay jirtay in dadka muruqooda ku xoogsadaa tiradoodu yar tahay ayaa haddana aanay iska war hayn jirin. Kacaanka warshaduhu waxa uu dhaliyey in dadka warshadaha iyo magaalooyinka ka shaqeeyaa ay ka tiro bataan kuwa beeralayda ah. Waxa ay noqdeen dad isku dan ah dhibaatooyinka haystaana ay isku mid yihiin. Dadkii mushaarada ku shaqayn jiray ee aan markii hore iskaba war haynin waxaa ay noqdeen dad is og oo isku duuban oo u wada halgamaya meelna uga soo wada jeeda danahooda. Muddo ayey se ku qaadatay dabaqadda muruqsatada ah in ay dadka hantigoosadka ah ee ka soo horjeeday iyo dawladihii hantigoosiga taageerayey, ay xuquuqdooda ka dhacsadaan, xoog aan la mari karinna ay isu dhigeen. Aakhirkiina waxa ay xoogsatada adduunka

tallaabadii ugu weyneyd qaadeen markii uu kacaanka hantiwadaagga ah ee Ruushku dhashay.

Sida inoo muuqato wallow aynu gafeyno haddaynu u qaadano kacaanka warshadaha ee saldhigga u ah ilbaxnimada maanta adduunka laga haysto laguna dhaqmo waxa keenay dadka xoogsatada ah.

Waayo dadka hantigoosadka ah laftoodu, sida runta ah door weyn ayey ka ciyaareen ha noqoto iyaga oo boorsooyin lacag ah la hor joogay dadka xoogsatada ah kuna dhiirinayey in waxyaalo cusub ay soo saaraan ama kuwii hore ee jiray ay si fiican uga shaqeeyaan, haddana waxa nin kastaa aqoonsan yahay in ay xoogsatadu xagga fakarka iyo hawsha wax soo saariddaba ay iyagu qayb libaax ka qaateen. Haddaba waxa is weydiin leh dadka sidaa uga soo qayb galay hirgelintii kacaanka ilaa maantadanna wada kuna fekeraya sidii hore loogu marin lahaa, ma helaan wax u qalma dadaalkaa iyo niyaddaa wanaagsan ay hayaan, sideese ay ula qaybsadaan dabaqadaa kale faa'iidooyinka waxyaaba ay soo saaraan. Sida runta ah xoogsatadu waxa ay u joogaan maahmaahda Soomaaliga ah ee ah «Sidii aan kuugu lisay iigumaad hanbayn» waayo dadka xoogsatada ihi laba siyood oo lays lahaa warshadaha ayey uga faa'iidayaan midna umay helin. Waa ta hore ee hawsha ugu badan iyaga ayaa ka qabta warshadaha marka ay dheef noqota na iyaga ayaa uga yaraysta. Waxa aad arkaysaana in ninkii xoogsatada ahaa alaabtii uu asagu soo saaray oo misana aanu gadan karaynin. Ta labaad waxa lays lahaa markii warshadahaa la soo saaray shaqadii ayaa aad u fududaynayaan oo ninka waxa ay ka furanayaan shaqadii badnayd ee dhabar jabka ahayd ee ku dhici jirtay waayadii hore markuu alaabta gacanta ku samayn jiray. Waxase aad moodaa in xoogsatada aanay si door roon hawshii ugu fududayn. Waayo waayadii hore ee uu ninku alaabta gacanta ku samayn jiray, inkasta oo danaha uu ka lahaa ay ka mid ahayd inuu wax u ku noolaada ka soo saaro haddana shaqada uu qabanayo waxa uu u qaban jiray isaga oo ka helaya. Hase ahaatee mishiinada iyo shaqo kala qaybsigu waxa ay dhaliyeen in ninka xoogsatada ihi uu maalintii oo dhan shaqo yar oo soo noqnoqonaysa qabto taasuna waxa ay yaraysay xiisihii uu shaqada u hayey. Danta uun ayaa ku khasbaysa ee ninka shaqaalaha ahi wax xiise ah oo shaqadu u leedahay ma jirto.



In taas waxa raaca waayadii hore ay warshaduhu soo bilaabmayeen qudheeda halkii la filayey in kuwa ugu horreeya ee warshadaha ka faa'iida in ay noqdaan xoogsatada ayaa wax dhacday in dad badan ay u keentay shaqo la'aan.

Maxaa yeelay waayadaas shaqada lama siin jirin dadka ku habboon ee xoogsan karayaa oo qura ee dadku warshadaha leh waxa iyaga u darnaa shaqaale jaban. Sidaa darteed waxa ay shaqaale ka dhigan jireen haweenka iyo carruurta oo ka qiimo jabnaa qofka shaqada ku habboon. Dhibaatooyinka kale ee waayadaas haystay shaqaalaha waxa ka mid ahaa xaalka warshadaha oo waayadaas ka xumaa ka jeelalka waayo daaqadahoodu way yar-yaraayeen awoodna uma lahayn in ay shaqaalaha kuwo fiican siiyaan dhismayaasha oo aad u kulula iyo iyaga oo aan musqulo fiican lahayn marka laysku daranaa waxa ka ddhashay dadkii shaqaalaha ahaa oo intiisa dadan caafimaadkoodii si dhakhso leh u xumaaday inta soo hadhayna waxa ay noqdeen dad iska quustay oo aan naftooda iyo wax kale toona dan ka lahayn. Mararka qaarkood saacadaha aanay shaqaynaynin waxa ay noqon jireen budhcad qaarkoodna waxa ay noqon jireen dar khamarada uun dul fadhiya. Xaaladda xun ee haysatay xoogsatada intaas uun kuma ekayn ee se waxa kaga darnaa waxyaabaha ka haystay nolosha. Aqalada ay u hoydaan waxay ahaayeen dar aad u liita waxaana dhici jirtay in xaasaska qaarkood siddeed siddeed qof qol qudha ku wada seexan jireen.

Waxyaabahaas aynu kor ku soo sheegnay iyo waxyaale kale oo badan ayaa ku kalifay dadka xoogsatada ah in ay iska iloobaan qaybihii ay u kala baxsheen dadka hantigoosadka ahaa ee ku aadaysay qaybin jinsi jinsi (caddaan, iyo madow) ummad ummad, diin diin iwm. Markaasi xaaladaas xun ee haysatay ayaa xoogsatada ka dhex dhelisay in ay noqdaan dad isku xiran oo haddii aanay wax kale qabsan og danaha ka dhexeeya.

**Layligii 3aa kacaanka warshadaha**

1. Warshadaha cusubi siyaabaha ay adduunyada wax u tareen waxa ka mid ah

   b) Waxa ay badiyeen soo saarkii alaabta.

   t) Waxa ay soo saareen alaab ka jaban alaabtii hore loo soo saari jiray.

j) A iyo B labaduba waa run.

2. Kacaanka warshaduhu mar qura ayuu adduunka oo dhan ka wada bilaabmay.

3. Waagii kacaanka warshadaha dadka Ingiriiska ihi mad-habyada diinta kiristaanka ayey dhaxdooda iskaga hayeen.

4. Sababaha dhaliyey in waddanka Ingiriiska kacaanka warshaduhu uu ugu soo horreeyo waxa ka mid ahaa:

   b) Dadka Ingiriiska ah oo aad dadka kale uga maskax wanaagsan.

   t) Dadka Ingiriiska ah oo khayraadkiisu aad u badan yahay.

   j) Dadka Ingiriiska oo ka mid ah wadammada Yurub kuwa ugu dhuxul badan leh.

5. Wadammada ay gumeysan jireen reer Yurub alaabta ceeriin ayey qiimo jaban kaga iibsan jireen marka dambe ee la soo sameeyana qaali kaga iibin jireen.

6. Kacaanka warshaduhu waxa uu ka bilaabmay warshadaha sameeya dharka cudbiga ah.

## CUTUB IV

## GANACSIGA DADKA

Socdaaladii iyo sahamiskii dunida cusub lagu helay reer Yurub waxay ku baabiiyeen ilbixii dadka Hindida ee Ameerikada Koofureed ee ay ka mid ahaayeen AZTEC-ASTEK iyo INKAS-INCAS dadweynihii Hindida ahaana waxay ku le'deen adoonsigii Isbaanishka, dhaqankoodii, ahaanshahoodii iyo Afkoodiina waxa uu isu bedelay Isbaanish. Afrikaanka dhibaato laxaad leh ayaa ka gaartay la kulankii reer Yurub. Ilbixii Gaana, Maali, Soongahaay, Ifi, Simbaabwe iyo Magaalo-qaranadii Xeebaha Afrika waxay isu rogeen xarumo laga ganacsado dadka reer Afrika.

Runtii waxyaabaha layaabka leh ayey ka mid tahay in Yurub iyada oo baraarugtay qarnigii 15aad, ay inta ay sahamis u guntatay muddo ku siman boqol sano hoggaanka u qa-



batay ganacsi weji cusub leh oo ku aada dhoofinta dadka Afrika. Sugidda taariikhda wax badan ayaa la is weydiiyay waxyaalihii sababay ganacsiga dadka iyo raadka uu ka tagay. Reer Yurub waxa ay sabab uga dhigaan ganacsiga dadka, wax ay ku tilmaamaan dib u dhac iyo hebadnimo dabiici u ah ruuxa madow. Hase ahaatee, waxa aan si cad u arkaynaa in doodaasi tahay sheekobaralay midab nacayb iyo yasidi ku dheehantahay. Raacdaynta cilmiguna waxay inoo suuragelinaysaa in aa nu ninka Afrikaanka ihi labdaa mid na ku sifoobin. Maxaayeelay dalka Maraykanka waxa ka oogmay inta la ogsoon yahay (240) laba boqol iyo afartan gadood oo dadka Afrikaanka ihi ku diidanaayeen adoonsiga. Jasiiradaha loo yaqaan Hindiyada galbeed iyagana sidaa si leeg ayaa dadka madoobi adoonsiga uga dhiidhiyi jireen.

Dadka madow ee lagu adoonsan jiray jasiirada Saynta Dominique imikana ah Heyti waxa ay ahaayeen dadkii taariikhda ugu horeeyey ee adoonsiga iska xoreeya. Waxa la ogsoon yahay in ninka madow ee adoonsi loo soo qabtay aa nu marna ahaan jirin ka ku niyo samaada, ee uu ka guban jiray kana gadoodi jiray.

**Bilowgii adoonsiga iyo sababihii:**

Sugidda taariikhda w axa ku cad sababaha ay Afrikaanku u noqdeen kuwa ugu badan dadkii adoonsi loo taxaabay. Yurub gaar ahaan koonfurta waxa jiray adoonsi marka laga bilaabo waayadii dhexe kuna ekaa ilaa qarnigii 18aad. Yurub dhinaceeda Woqooyi adoosigii ilbaxa Roomanku ku dhisnaa waxa ka dhashay adoonsi waji cusub leh oo la magac baxay Midiidsi. Badda Cad addoonsiga ay reer Yurub ka dhaqan gesheen muu ahayn mid midab kala sooc ku dhisan. Muslinka gaalada ayuu adoonsan jiray, gaaladuna muslinka ayey adoonsan jirtay. Yaalaaba dadyowga badda cad lagu adoonsan jiray waxa laga keeni jiray woqooyiga iyo bariga badda madow, reer Yurub dadkaasi ay adoonsiga u soo qabtaan waxay kaga shaqayn jireen goobaha macdanta, Beeraha sonkorta ee ay ku lahaayeen Jasiiradaha badda cad koonfurta Isbayn iyo Boortugal. Waxa kale oo dadkaasi la adoonsaday ay seebabka u rogi jireen maraakiibta waagaas badda lagu maaxi jiray. Reer Yurub waxa ay u soo gudbeen Badda Atlaantiga. Hal-

kaasna waxa ay ku taabeen jasiiradahii ku yiil ka dib markii qaaradaha Ameerika daaha laga rogay, sidii ay awal ba adoonsiga badda cad uga hirgesheen ayey dadkii dagaankaasi ku dhaqnaa adoonsi hor leh kula kaceen. Hortiiba dadkii Hindida ahaa ee geyigaas degganaa waxa ay ku faafsheen cudurada sida fudad u fida ee ay ka mid yihiin: Furuqa-Xabbada, Jadeecada IWM. Taasina waxa ay keentay in dadweynihii uu halkaas ku cidhib tirmo. Sida darteed reer Yurub waxa qasab ku nqootay in ay dad kale dibedda ka keenaan si ay irmaanta qaaradaha Ameerika u daldashaan. Sida loo qabo, Afrikaankaoo kaliya may ahayn dadkii loo soo adoonsi qasbay dunida cusub ee se waxa si tiro badan Yurub looga soo shixmadi jiray dad badan oo u kala baxayey - maxaabiis, qaybo Bulshooyinka ka mid ah oo diidanaa aragtida siyaasadda dawladaha barigaas jiray iyo shaqaalaha daynka loo qabsado. Dadka Hindida ah iyagana si naxriis daro lehayaa beeraha iyo goobaha macdanta loogu qodi jiray. Sidaas awgeed Bulshooyinku midab kasta ha lahaadeen eh, waxa muuqata in qolo gaar u ahayd adoonsiga aa nay jirin.

Sida uu adoonsigu Yurub ba uga jiray ayaa Bulshooyinka Afrikanka gudahooda isaga adoonsan jireen. Hase ahaatee, Farta, adoonsiga Afrikanku way ka duwanayd ka ay reer Yurub ka dhaqan gesheen qaaradda Ameerika. Adoonsiga Afrikaanku muu ahayn mid ku xidhan dhaqaalaha. Waxaa se ay uga jeedeen in tirada Bulsho waliba ay korodho si Beeshu cudud milatari u yeelato, sharafi na uga muuqato. Dadka la adoonsadaa waxay yaalaaba ahaayeen dar dagaal lagu qabsaday, ama qaar dayn lagu yeeshay oo ka adeega guryaha ama u xil saaran meel marinta umuuro la xiriira diinta. Badanaa ba ninkaas la adoonsaday waxa uu ka tirsanaan jiray Beesha iyo Bulshada hadba ninka uu la joogayahay. Xaqiisa iyo danahiisana waa la ilaalin jiray, qaarkoodana waxa aabay qaban jireen shaqooyin iyo meelo mudan ah.

Hase ahaatee, adoonsigii ay reer Yurub albaabku u fureen waxa uu ahaa mid kaas ka duwan. Waxa saldhig u ahaa teegaalo dhaqaalaha la xiriirta. Ninka adoonka laga dhigi rabaa wax xuquuq ah muusan lahayn. Marka gacanta lagu dhigo sidii la doono ayaa laga yeeli karayay, ilaa inta markabka lagu shixmadayo. Marka dalka Ameerika ama jasiiradaha



Hindiyada galbeed la geeyana Beeraha waaweyn ayaa lagu qodi jiray; waxaa na loola dhaqmi jiray sidii yoq, uu sac ama dameer yaha.

**Gadiskii Dadka Reer Afrika:**

Gadiskii dadka ee Atlaantiga ka jiray waxa uu isku xiray fartii adoonsigii ee Afrika gudaheeda ka socotay. Hase ahaatee, gediskii reer Yurub waxa uu furay adoonsi qaab dari cusub leh. In kasta oo Afrikaanku gudahooda iska adoonsan jireen, kani waxa uu dhaliyey in dadyowga Reer Afrika inta la gato dabadeed sida adhiga dibedda loo dhoofsho. Aan xusuusoyeelano in had iyo jeer dadka ragga, dumarka iyo caruurta la adoonsan rabo dadka soo qabqaban jiray aanay ahayn dadka reer Yurub ee ay ahayeen niman Afrikaan ah oo hunguri iyo iimaan xumo qaaday. Nidaamka gedisku u soconaayey waa uu kala duwanaa. Meelaha qaarkood reer Yurub qalcado ayey ku lahaayeen, dar kalena guryo, Bakhaaro iyo Dayrar.

Intaba waxa ay ku hayn jireen dadka adoonsiga loo wada, marna wax ay ku kaydsan jireen alaabta ay gediska u keenaan. Gedisleyda reer Yurub xeebta dalalka Afrika waxa ay ku joogeen fasaxa iyo abbaansiga ay hadba ka helaan madaxda Afrikaanka. Guryaha iyo qalcadaha kiro ayay ka bixin jireen, mararka qaarkoodna maraakiibtooda ayey had ba dakad ku xiri jireen iyagoon si joogta ah dadka tirsan iyaga aan meelayowgaas kaga tagin. Qola waliba waxa ay lahayd lacag gedis u gaar ah waxa aanay u kala baxayeen Bir direr leh wiqiyad boodhka dahabka ah — ama ta ku magacownayd manillas oo ka samaysnayd «Braas» iyo alaalaxay badweynta Hindiya laga keeni jiray.

Alaabta ay reer Yurub gediska u keenaan kuwaas ayaa lagu qiimayn jiray. Dadka la iibsanayo se waxa laga bixin jiray Qoryo — bunduqyo. Ninku Afrika gudaheeda waxa uu ka taagnaa 8 sideed qor, maraarka qaarkoodna 6 bunduq oo kaliya. Dalalka Galbeed Afrika gediska dadka waxa gacanta ku hayey

Boqortooyinka.

Hortii dawlada Boortaqiiska ayaa hoggaanka u haysay gediska dadka ee Atlaantiga, ka dib dawladihii reer Yurub oo dhan way ka wada qayb qaateen — Ingiriiska, Faransiiska, Jar-

malka, Dhajka, Dheenishka, Iswidhishka iyo Isbaanishka. Gediska dadka waxa uu ahaa mid lagu tilmaamo sadex gees. Sidaasi waxa uu ugu sifoobay iyada oo dadka reer Afrika laga qaado la geen jiray dunida cusub, halkaas na ay muruqooda ku soo saari jireen cudbi, buuri, sonkor, macdan kala duwan iwm. Waxyaabaha ay dadkaasi Afrikaanku soo saaraan ayaa si jaaban looga gadi jiray warshadaha reer Yurub, dabadeedna inta la farsamotumo ayaa haddana Afrika loo iib gayn jiray, si dad kale oo Afrikaan ah loo soo adoonsi qasbo.

Sifaha dadka loo soo ururin jiray ayaa si qaab daran u naxariis iyo dadnimo darayd. Banaadiiqda iyo khamrada ay reer Yurub Afrika u soo iib geeyaan ayaa gacanta weyn ee gediska suura geshay ahaa. Bulsho si nabad ah u deggan ayaa inta la miro guryahooda la gubi jiray. Markay dadku iyaga oo jaah wareersan soo baxaan ayaa la qab qaban jiray, iyad oon la kala soocin rag iyo dumar, caruur iyo ciroole.

Mararka qaarkoodna dagaal hor leh ayaa lagu qaadi jiray Beelaha xoogga yar leh. Caruurta waxa yaalaaba lagu sabi jiray waxyaalo ay ka mid yihiin dhar, koolo iwm. dabadeedna waa la qaban jiray. Dadka inta had ba la soo qabto ayaa sida awrta oo kale la isku xiriirin jiray iyaga oo lugaha, gacmaha iyo qoortaba silsilado kaga xiranyihiin. Kii taag dareeya ama xanuunsada halka uu ka kici kari waayo ayaa lagaga tagi jiray. Dabadeed na bahalaha ayaa cuni jiray. Inta nolol ku gaarta xeebta shirkad ama nin ganacsata ah ayaa gadan jiray.

Dawladaha reer Yurub iyana waxa ay gediskan u samaysteen maraakiib ay ugu talaagaleen in ay dad tiro badan qaado. Ingiriiska oo kaliya ayaa qarnigii 18aad lahaa (200) laba boqol oo maraakiibta noocas ah. Dadka marka xeebta la keeno ayaa maraakiibta lagu guri jiray, ciriiri dulfuul iyo darxumo ayaa ragaas iyo dumarkaas la addoonsan rabo wehel u ahaa. Afar iyo labaatankii sacadood mar ayaa la siin jiray arabikhi iyo biyo. Shaabuug iyo madane ololaya ayaa lala dul joogi jiray kooda xanuunsada na Badda ayaa lagu tuuri jiray. Dadkaasi Afrikaanka ihi iyaga oo qaadan la' adoonsiga loo wado ayay badda isku ridi jireen. Taasi markay badatay ganacsatadii shabag ayay ku daahi jireen dadkaasi adoonsiga loo wado. Dadka dhinta intaan xeebta la soo gaarin waxa lagu qadaraa (Sedex



dalool oo laba dalool). Dadka dunida cusub loo dhoofin jiray waxa lagu qadaraa in sannad walba ay tiro leekaayeen 75,000 ila 100,000 oo qof.

Dawladihii barigaas jiray marnaba may doonayn in gediska dadka is taago. Maxaayeelay, macaash weyn ayey ku qabeen. Xaruntii gediska ee waayihi dhexe badda cad ku koobnaana waxa uu u wareegay magaalooyinka Lisbon, Life-buul, Amister Daam iwm. Magaalooyin cusub ayaa gediska dadka ka dhismay, warshado farabadan albaabada ayaa u furmay. Haddii ganacsiga dadka la joojiyo, ganacsato badan ayaa ka cabsi qabtay in maraakiibtoodu shaqo beesho dakadahooduna xirmaan, warshadahoodu fariistaan dadkooduna shaqo beelaan. Sidaa awgeed cirib tirka gediska dadka dhibaato xoog leh ayaa lagala kulmay, reer Yurub dar ilaahay uun subax kaliya u may joojin gediska ee se waxa ku kalifay umuuro dhaqaalaha iyo siyaasadda gumaysiga la xiriira.

**Tiridii Gediska Dadka:**

Gediska dadku waxa uu socday muddo ku ekayd 300 sadex boqol oo sano. Markaasi ayaa rag dadnimobil ihi iyo niman dareen diineed leh oo taageero ka helay niman siyaasiin ihi ay abuureen guddi la magac baxday «Gaddida Tiridda gediska». Dadka ka ganacsan jiray gediska dadka way is hortaageen in la joojiyo ganacsiga sifahaa lahaa. Guubaabadoodii iyo baaqoodii waxa uu gaadhay Baarlamaanka Ingiriiska. Maxaayeelay, macaashka ay ka helayeen gediska ayuun bbaa u muuqday, hase ahaatee, dhibaatada iyo darxumada ninka madow ee la adoonsanayaa umay muuqanin. 1807kii ayaa baarlamaanka Ingiriiska mamnuucay gediska dadka. Hase ahaatee taageero kamuu helin dawladihii kale ee gediska ku jiray. Muddo ayuu sii socday gedisku ka dib markii u ingiriisku mamnuucay. Hase ahaatee, markii ay Boortaqiiska, Isbaanishka, Faransiiska iyo Maraykanku iyana oggolaadeen tirida gediska ayaa gediskii badda Atlaantiga ka socday is taagay. Waxase wali dhinaca Bariga iyo Woqooyiga ka soconayey gediskii dadka ee ay Carabtu faraha ku hayeen. 1840kii na gedisku wuu sii xoogaystay ka dib markii Boqorkii Cumaan uu u soo guuray Sansibaar. Dhinaca Bariga iyo Woqooyiga gedisku waxa uu iska taagay dhamaadkii qarniga 19aad.

**Cirib-reebkii geddiska dadka :-**

Raadkii uu ku dhigay geddiska dadku bulshooyinka reer Afrika waa mid aan la koobi karin. Ha noqoto dhibaatadii ka imanaysay dhaca iyo roorsiga ummadaha Afrikaanka, amase sifihii loo dhoofin jiray. Darxumada iyo dhibaatooyinka haystay dadkaasi hore ayaan u soo sheegnay. Shaki kuma jiro in dadweynaha Afrika uu ku cirbtirmay geddiska dadka.


Dadkii ku le'day iyo intii Atlaantiga loo dhoofshay marka la isku daro waxa lagu qaddiraa ilaa iyo (120) boqol iyo labaatan malyuun. Waxaana ku burburay qarano iyo boqortooyin dhisnaa. nabaddii iyo xasiloonidii, ilbixii iyo maamulkii habaysnaa ee qaramada Afrika, Shaxankii iyo geddiskii qarsoonaa waxa baddalay dhac, boob addoon raadis iyo dagaallo.

Raad kale oo dhinac yaal ah waxa ka dhashay asaaskii Laay-beeriya iyo Firiitaaun. Labadaasi dal waxa la dajiyey dadkii addoonsiga laga xureeyey, ee laga keenay Kanada, Kaaribiyanka iyo dalka Maraykanka. Guud ahaan muddadii dheerayd ee uu ganacsiga dadku socday waxa uu wiiqay horumarintii ilbaxii qaaradda Afrika. Heerkii ilbixii Afrikaanku gaaray waayadii dhexe, ganacsiga guud ee admiga ayaa qas ku riday. Waxaana ninka madow loo qaatay in loo abuuray in uu ninka cad u adeego, niyo, sifahaas lehna waa loola dhaqmay. Taasi waxay aburtay korkanac ruuxa madow loo qabo sida loo baabi'iyaana ay adagtahay. Addoonsigu waxa uu noqday mid uu ilaa maanta ninka madoobi dagaal kula jiro. Dalka Maraykanka waxa hadda ku dhaqan bulsho Afrkaan ah oo 30 malyuun lagu qaddaro.

Maantadan aynu joogno waxay wali dagaal kula jiraan caddaanka tirada badan ee ka hor taagan in ay masoobaan. Koonfur Afrika iyo Roodiishiya caddaan tiro yar ayuu ummadaha Afrikaanka wali gumaysi u haya. Si kastaba ha ahaatee, Ku ninka madow dagaal ka fariisan maayo ilaa uu tiro horkunada, midab takoorka, adoonsiga iyo gumaysiga.





**Layli Ganacsiga dadka :-**

Waxaad goobaabintaa xarafka ku horyaal weedha aad is-leedahay waa Run:

1. adoonku waa
   b) Qof u dhashay hebadnimo dabiici ah.
   t) Qof uu nin kale leeyahay.
   j) Qof la af duubay.

2. La kulankii reer Yurub Afrika waxa :-
   b) Ay ka korodhsatay ilbixin.
   t) Kaga timi dhibaato lixaad leh.
   j) Ka abuurmay geddiska dadka.

3) Waxyaabaha sababay geddiska dadka waxa ka mid ah :-
   b) Dadka madow oo dib u dhacsanaa.
   t) Addoonsigii Yurub ka jiray oo kii Afrika ku xirmay.
   j) Reer Yurub oo dhaqan sare lahaa.

4. Dadka madow ee addoonsiga loo geeyo dunida cusub:
   b) Marnaba iskumay deyi jirin inay gadoodaan.
   t) Laba boqol iyo afartan gadood ayey oogeen.
   j) Waa ay ku niyo samaayeen addoonsiga.

5. Yurub addoonsigii ka jiray waxa uu :-
   b) Ahaa mid midab iyo jinsi ku dhisan.
   t) Ahaa mid ka dhashay addoonsigii Roomaanka.
   j) Mid ka duwan kii Afrika lagaga dhaqmi jiray.

6. Yurub addoonsiga ka jiray :-
   b) Muslinka ayaa muslinka addoonsan jiray.
   t) Gaalada ayaa muslinka addoonsan jirtay.
   j) Bariga badda madow iyo woqooyiga ayaa dadka laga soo adoonsi qabsanjiray.

7. Dadka ay addonsadaan reer Yurub :-
   b) Maraakiibta ayey saababka u rogi jireen.
   t) Warshadaha ayey ka shaqayn jireen.
   j) Dalalka Carabta ayaa loo dhoofin jiray.



8. Addoonsiga Afrika gudaheeda ka jiray :-
   b) Kuma uu xirnayn dhaqaale.
   t) Ninka la addoonsadaa beesha ninka leh ayuu ka tirsanaa.

   j) Waxa looga jeeday in bulshadu xoog milataari yeelato.

9. Ganacsiga dadka ee Afrika :-
   b) Boqortooyinka iyo ganacstada Afrika ayaa gacanta ku haysay.

   t) Ganacstada reer Yurub ayaa dadka soo qabqaban jirtay.
   j) Dadka ayaa iskood isugu dhiibi jiray reer Yurub

10. Marka dadka reer Afrika dunida cusub la geeyo :-
   b) Waxa loola dhaqmi jiray si xurmo leh.
   t) Waxa ay soo saari jireen, cudbi, Bur, Sonkor iwm.
   j) Waxa loola dhaqmi jiray sidii oo ay yihiin lo' ama majarafado.

11. Ganacsiga dadka reer Afrika waxa uu :-
   b) La magac baxay geddis saddex gees ah.
   t) Ahaa mid reer Afrika dani ugu jirto.
   j) Uu wiiqay ilbaxnimooyinka reer Afrika.

12. Dawladaha reer Yurub marnaba may rabin in u ganacsiga dadku is taago waayo :-

   b) Waxa ay ka cabsi qabeen in dakadaha, warshadaha iyo dadkuba shaqo beelaan.

   t) Waxa ay rabeen in dadka reer Afrika ay ilbxiyaan.
   j) Waxa ayna haysan dad Afrikaanka la xoog ah.

13. Ganacsiga dadku :-
   b) Atlaantiga ayuu ka joogsaday markii Ingiriisku mamnuucay.

t) Muddo ayuu sii socday ka dib markii Ingiriisku mamnuucay.

j) Bariga iyo woqooyiga dhammaadkii qarniga 19aad ayuu iska taagay..

14. Ganacsigii dadka reer Afrika :-
b) Dadweynhii Afrika ayaa ku ciribtirmay.
t) Waxa ka dhashay orkanac ninka madow loo qabo.
j) Kor ayuu u qaaday ilbixii qarammada Afrika.

15. Dadka reer Afrika ee la addonsi qasbay :-
b) Inta ay maraakiibta fuushan yihiin cunto ku filan ayey heli jireen.
t) Shabaq ayaa lagu daahi jiray :-
j) Kooda bukooda badda ayaa lagu tuuri jiray.

16. Ganacsatada reer Yurub :-
b) Alaabta uu soo saaro ninka la oddonsanayaa ayey Afrika u iibgayn jireen.
t) Marka ay dadka reer Afrika dunida cusub geeyaan way u naxariisan jireen.
j) Labadaa midnaba may samayn jirin.

## C U T U B V

## GUMAYSIGII REER YURUB

Yurub xiriir ay adduunyada inteeda kale la yeelataa waxa uu ku yimid dagaaladii "Kursade". waxa lagu tilmaamaa in dagaaladaasi ay ahaayeen mid Yurub ay ku meelaysan rabtay gumaysi oo hor dhacayay baadidoonkii "Kolombas" iyo Sahamiyayaashii kale ee u xusul duubay in ay gaaraan Bariga Fog. In kasta oo xoogii imbiraadooriyada Turkigu korodhay Yurubta badda cadina taliska Cusmaaniyiinta hoos timid, misana Isbayn iyo Boortaqiiska waxa u suura gashay in ay dunida waji cusub u yeelaan. Boqorka Boortaqiisku isaga iyo xoogga dalkiisaba kor u qaado waxa uu qabanqaabiyey sahano, qalabkii waqtigaas ugu hormarsanaana maraakiibta ayuu ugu adeejiyey. Hortiiba waxay daaha ka rogeen jasiiradaha "Azores" Ma-



deira" iyo " Canaries". 1488kii Diaz wuxuu gaaray koonfurta Afirka, 1497na Fasko da Gama ayaa Hindiya ku degay. 1500na Pedro Kabral ayaa xeebta Baraasiil cagaha dhigay. 1492kii "Kolombas" oo u adeegaya Isbaanishka ayaa daaha ka qaaday dunida cusub markii uu ku dagay Jasiiradaha "Bahaman Islanads" una Baxshay san Salvador. 1493kii, bishii May 4dii odayga diinta Kiristaanka Pope Alexandar ayaa aduunka u kala baray; Boortaqiiska iyo Isbaanishka. Dalalka galbeed ka dhaca jasiiradaha "Azores" iyo "Cape Verde" Isbaanishka ayaa lagu qoray, wixii bariga ka xigana Boortaqiiska. Dahabkii, lacagtii, hantidii iyo khayraadkii ay labadaasi dal heleen ayaa reer Yurub intoodii kale maanqaaday. Sidaa awgeed na waxa ay ku dhaqaaqeen sahamis ay ku raadinayeen toobiye bariga Fog gaarsiiya. Ingiriiska, Faransiiska iyo Dhajku waxay qarnigii 16aad u guntadeen sahamis, si aan u kas ahayn waxay ugu turunturoodeen Dunida Cusub kuna abuurteen gumaysi, ku dulnoolaasho iyo adoonsi. Qarnigaas waxa ay reer Yurub ku tilmaansadaan qarnigii sahamiska. Dunida inteeda kale se waxa uu u ahaa qarnigii la kulanka reer Yurub ee ku aadayey dhac, boob, dil iyo addoonsi. Qaaradda Ameerikada Woqooyi, Ingnriiska, Faransiiska, Dajka iyo kuwa kale ayaa degay. Dadkii hindida ahaa ee geyigaas deggenaana siyaabo foolxun ayaa loo dabar gooyey. Sidaa si le'eg ayaa Isbaanishka iyo Boortaqiisku Ameerikada Koonfureed u hantiyeen. Inta aynaan ka hadal sidii gumaystayaashu dhac, boob iyo adoonsi u meelaysteen bal horta aan qeexno waxa u gumaysi yahay.

Gumaystayaashu waxa ay inaga raarideen in gumaysigu keenay ilbaxnimo. Ulajeedad weyn ee reer Yurub ay lahaayeen se kulnaba ilbixin ku ma ya lug lahayn. Guud ahaan na gumaysigu sina ugu muu guntan in uu cudurka, gaajada iyo aqoondarida tiro ama se uu xeer iyo xasilooni bulshooyinka ku dhaqo. Gumaysiga waxa gadhwadeen u ahaa qawlaystayaal, bunduq, hunguri iyo xoog. Ulajeedada gumaysigu waxa sal u ahaa ku dlunoolaansho dalalka ay qabsadan ay ka hirgashaan.

## GUMAYSI WAA MAXAY

Guud ahaan gumaysi — imbiiriyalism — waa siyaasad garbsata inay imbaayar ama dalgumaysi abuurto nidaamiso oy haysato, waa qaran is fidsha oo qarama kala duwan hoos keena awood dhexroorsan. Waa dad kala duwan xoog lagu hoos keenay awood dhexe. Waa maroorsiga madaxbanaanida garan uu lahaa oo mid kale oo shisheeye ihi gacanta ku dhigo. Waxa ay ku aroortaa aragtida gumaysiga iyo imbiiriyalism fikradii "Alexandar the great" oo ahaa ninkii abuuray imbiradoorayadii Giriigu Eeshiya ku yeeshay. Hase ahaatee micnaha imbiiriyalism iyo gumasi waa uu is badalay waayadii dambe. Micnaha gumaysi marka la soo koobo waa dal dhac uu qaran mid kale ku qaado iyo farsamo (Technology) uu ku adeegsado si uu ummad kale ugu dulnoolaado.

Habka gumaysigu waxa uu hirgalay dhamaadkii qarnigii 19aad, waqtigaas oo hantigoosiga goonisugadka ihi (Monopoly Capitalism) badalayhantigoosigii tartanka furan lahaa (Free Competitive Capitalism). Intii hore dalalka Afrika, Eeshiya, Ustareeliya, Woqooyi iyo Koonfur Ameerika reer Yurub waxa ay u qabsadeen si ay u dhacaan dahab iyo lacag iyo dad ay adoonsadaan, iyo si ay u dajiyaan dalalkaasi dad cad oo reer Yurub ah. Intaasi waxay qayb weyn ka gashaa hor u markii hantigoosiga reer Yurub. Hantidii sifahaasi lagu helayna ayaa hantigoosigu kaga hanaqaaday Yurub. Waxaad mooda in la isku khaldo ganacsigii dadka ee Afrika ka socday iyo taliska reer Yurub Afrika markii dambe ku yeesheen. In kasta oo reer Yurub dadka reer Afrika xeebaha ka gadan jireen, taas micnaheedu ma ahayn in reer Yurub ay qaramada Afrika u talin jireen. Ninka marka iib loo gudbiyo ayuu adoon noqonayey, hase ahaatee Afrika iskeed bay u madaxbanaanayd.

Woqooyi iyo Koonfur Ameerika iyo Ustaraaliya se hortiiba reer Yurub dadyowgii deganaa way cidhib tireen waxaa na degay dad cadaan ah oo Yurub ka soo qulqulay. Hase ahaatee, Afrika iyo Eeshiya reer Yurub ku may liibaanin in ay sifihii ay u ciribtireen dadyowgii Ameerika, Ustareeliya iyo Niyuusilaand ay meelmarshaan.



## DUULAANKII GUMAYSATADA

Inta badan taariikhda Afrika waxa ku cad kulano ay la yeelatay Yurub iyo Eeshiya. Weeraro dibedda kaga yimaada oo lagaga guulaystay se may jirin. Afriki waxay ahayd geyi isagu is ah oo meeleeya imbiraadooriyado mar dhisma marna liica oon Yurub sida xaal ka yahay waxba u ogayn. Sidaas oo kale ayaa qaramada Eeshiya iyana u lahaayeen ilbaxnimooyin waayo hore ku aroora, qarama iyo imbiraadooriyad maamul haybaysan leh'na u lahaayeen. Carabta, Hindiya iyo reer Yurub ba waxay ka ganacsan jireen xeebaha Afrika, hase ahaatee, gacan kumay lahayn maamulka iyo xukunka.

Xaalku sidan kor ku sheegnay wuu iska badalay qarnigii 19aad, bilowgii 1900 na si dhab ayuu isu badalay. Afrika markii taariikhdeeda ugu horaysay ayaa dad shisheeya ihi duulaan ku qaadeen qarama badani na u gacan galeen. Reer Yurub inta ay xeebihii soo dhaafeen ayey oodii gudaha Afrika jebsheen, talis iyo gumaysina sugteen. Sidoo kale ayaa Bariga Fog iyo Koonfurta Bariga Eeshiya loo galay. 1900kii Jabaan, Tayland iyo dalka Shiinaha oo kaliya ayaa ka baxsanaa taliska gumaysiga in kasta oo gumaysatadu dalalka Shiinaha qayb ka mid ah haysatay. Haddii aynu hore u tilmaamnay Afrika iyo Eeshiya in ay ilbaxnimooyin lahaayeen, maxay mar kaliyahuun u gaddoomeen maxaa na reer Yurub u suura geshay in ay Afrika iyo Eeshiya ba gumaystaan.

## HANTIGOOSIGA WARSHADLAYDA

Boqolkii sano ee 1880 nadii ka horeeyay, Yurub waxay adduunka intiisa kale kaga hormartay habaynta dhaqaalaha, adeegsiga sayniska iyo farsamada. Kacaankii warshadayntu Iglan ayuu ka bilaabmay qarnigii 18naad. Taasi waxay dhalisay magaalooyinka oo dhisma iyo dadka intii warshadaha ka shaqeenayey oo ka bata kuwii beeraha falayey. Warshadayntu waxay u tabtay qarnigii 19naad dalalaka Biljimka, Woqooyiga Bariga Faransiiska iyo Galbeedka Jarmalka. Dhamaadkii qarnigii 19naad waxay u fiday imbiraadooriyadii Habasbeerg iyo Woqooyiga Talyaaniga. Waqtigaas Yurub waxay u heelanayd inay taabto alaab warshadaheeda haba iyo sayalad ay wax u iib geyso. 1890 nadii warshadaha reer Yurub waxay

soo saarayeen waxyaalahay bilowgii kacaanka warshadaha soo saari jireen. Dharka, birta iyo xadiidka ayaa na ugu badnaa: warshadaha intaasi soo saara tiradoodii ayaa si door ah u kordhay, baratan hor lihina waa uu dhexmaray. Hanaanka wax loo soo saaro warshadaha waaweyn ayaa kuwa yar yar kaga hormaray. Sidaa darteed warshadaha yar yari baratanka wey ku hadhi jireen, yaalaabana kuwo waaween ayaa liqi jiray. Warshadaha waxa ku dhici jiray busaarad xili-xili ah, markaasi ayaa dad badani shaqo waayi jireen. Xiligaasi ay Yurub gumaysiga dhidbi rabtay warshadaheed, buusaarad ayaa haysay. Sidaa awgeed warhooda ayey markaasi waydiisteen in ay taariif sare saarto alaabta shiisheeyaha si aanay alaabadooda ula tartamin. 1880kii Jarmalka ayaa siyaasadaasi hirgeshay, laba iyo toban sano ka dib na Faransiiska, Maraykanka iyo kuwa kale oo reer Yurub ah ayaa iyana siyaasadaasi meelmariyay. Habkii ganacsiga tartanka furan laha ayaa halkaasi ku joogsaday, meeshiina waxa galay "Hantigoosiga Goonisugadka ah"

Fiirada ah in dal waliba uu warshadiisa ilaasho, waxay dhalisay in warshadaha saylado kale oo gooni ugu sugan loo abuuro. Taasi waxay ku suurto geleysay dal shisheeye ah oy talis gumaysi ka sugtaan. Dhamaadkii qarniga 19naad fiirada laga qabaq dal gumaysi wuu is baddalay. Horaantii dal gumaysi waxa loo arkayey in uu noqday degaan ay dadka cad ee reer Yurub ihi degaan, sidii Kanada, Ustereeliya Niyuusiilan, Ameerika iyo Aljeeriya. Warshadlayda reer Yurub se dal gumaysi sifahaas leh may rabin. Waqtigan micnihii dal "gúmaysi" waa la badalay. Waxa ayna reer Yurub u rogeen dal gumaysi ku dulnoolaansho ay lacag geshaan si ay saylado cusub iyo irmaano cusub u helaan. Warshadlaydii way u haliileen abuurka dhul gumaysi ku dulnoolaashe, dawladahoodiina way ku guubaabiyeen.

**Dano Dhaqaale :**

Qarnigii 19naad horumarkii farsamada iyo warshadaha iyo xoogii dhaqaalaha oo u gacan galay dad, shirkado iyo Baanan tiro yar ayaa is baddal ku riday xiriirkii Yurub ay Afrika iyo Eeshiya la lahayd. Koridii Warshadaha reer Yurub waxay iyo u baahdeen alaabta qaydhin oo iyana koradha, alaabta farsamotumanin na waxay u baahatay saylad gadata. Sidaa



awgeed dalalka reer Yurub adduunka ayey weerar ku qaadeen, dalalka Afrika iyo Eeshiya qaarkood xoog militari ayey ku qabsadeen, qaarna heshiisyo been ah iyo khiyaamay ku galeen. Ulajeedada gumaysiga waxa sal u ahaa dano dhaqaale oo ay ku rabeen in ay dalalka la gumaysto ka dhigaan irmaan ay ku dulnoolaadaan. Warshadlayda hantigoosiga ah ee, Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga iyo Biljimku dalalka ay gumaystaan khayraadka laga soo saaro mar waxay habayeen warshadahooda, marna waxay dalalkaasi u noqonayeen saylad ay ku iib geeshaan alaabtooda. Reer Yurub waxay dalalka ay gumaystaan u arkayn irmaano ay ka daldashaan alaab jaban, shaqo jaban iyo saylado ay ku gadaan waxyaalo farsamotuman oo qaaliya.

Waa ay jirtay in dalalka qaarkood aanay u qabsan ulajeedo dhaqaale, hase ahaatee, waxay u qabsadeen iyaga oo dano milatari ka leh si ay u ilaashadaan dalalka kale ee ay ku dulnoolyihiin. Waxaana ka mid ahaa dalalkaasi Cadan, Qubrus, Maalta iyo Jibraatar. Gumaysigu wuxuu siiyay reer Yurub awood wajiyo badan leh oo ay ku dhacaan dadka ay gumaystaan. Waxaana u furmay in ay miraha beeralaydu soo saarto qiimo hoose ku gataan, in ay saylad gaar ah u sugaan alaabtooda farsamotuman, dabeedna ku hanti abuurtaan macaashka dheeraadka ah.

Awooda siyaasiga ah ee gumaysigu waxay u fеeganayd inay hirgaliso laba danood. In dadka gumaysto aanay gumaysiga ka bixin iyo in heer sare la gaarsiiyo ku dulnoolaanshaha dadka iyo irmaanta dalalkaasi. Taasi waxay si cad uga muuqanaysay xeerarka iyo sharciyada fidsan ee ay dalalka u dejiyeen.

## HORUMARINTII HUBKA


Intii ka horaysay 1880 nadii reer Yurub way ka cabsi qabeen in ay Afrika guda galaan. Maxaayeelay may haynin tab ama xeel ay Afrika gudaheeda kaga dagaal galaan oo iyaga raaligalisa . Sidaa darteed na waxay ku koobnaayeen xeebaha ka dib se waxa si dhakhso leh u gu furmay marin ay ku galaan Afrika. Marka laga bilaabo 1860dii hubka ayaa horumar hor leh loo geystay. Hubka gacanta oo buduqu ka mid yahay

ayaa si habsan loo sargooyay dhuuntiisa si dhugtiisu u wanaagsanaato. Rasaasta qaraxeeda iyo habka cabaynta buduqa ayaa iyana la horamriyey, dhugta iyo masaafadda ay xabbadu wax ka dili karto ayaa iyana 1870kii la horamriyey. 1889kii waxa la soo saaray "Mishiganka" la magac baxay maaxim, oo kan maanta la isticmaalo waxba ka duwanayn. Intii u dhexeysay 1860-1890 reer Yurub warshadahoodu waxay soo saarayeen hubab cusub. Ciidamadii Afrikaanka ee is hortaagay weeraradii gumaysigana banaadiiq surgooyo cusub leh, mishigaano, iyo madaafiic ayaa lagu muquuniyey. Si kastaba reer Yurub haw hub urursadeen eh, misana ciidamadii Afrikaanku wacdaro ayey ku dhigeen ciidamadii reer Yurub. 1889 — 1890 shir ay reer Yurub isugu yimaadeen Afrikaanka waxay kaga maamuuceen in hubka cusub laga gado. Dagaaladii reer Afrika ay isku hortaageen weeraradii gumaysatada ayey reer Yurub u dhigeen in Afrika tahay meel dagaal uun ku jirta oon isxukumi karin Gumaystayaashu sida awgeed ayey uga raarideen dadweynahooda in ay reer Yurub waajib ku tahay Afrika oo ay qabsadaan, si dadyowgaasi loo ilbixiyo. Taas oo micnaheedu ahaa in dadka Afrikaanka ah xukunka dalalkooda hooyo aan laga qayb galin ee lagu adoonsado.

## TALIS GUMAYSI

Habka gumaysigu waxa uu meelmarshay nidaam siyaasadeed iyo mid dhaqaale awooda qaranku na gacanta gumaystayaasha ayey ku jirtay. Shaqaaluhu waxay ahaayeen dar shisheeye ah, xeerka sharciga iyo garsoorka ba iyaga ayaa maamuli jiray; Waxbarashadu gacantooda ayey ku jirtay Baadariyaduna waxaab-ay tartan kula jireen diimaha Afrikaanka iyo tan Islaamka. Taliska gumaysigu waxa uu heegan u ahaa in dalalka la gumaysto laga dhigo dar baahan oon soo saari karin alaab farsamotuman. In aqoonta iyo tabaha cilmiga ee lagu hormarsho warshadaha laga daaho. In dadka la gumaysto laga dhigo qaar soo saara alaabta qadhiin qiime jaban na ay ku shaqeeyaan. In dalalka la gumaystaa aanay cid kale la ganacsan, gumaystahooda maahee. Sidaa darteed ayaa dalalka la gumaystaa ay noqdeen marino ay ku hanti abuurtaan gumaystayaasho iyagoon marnaba dalalkiisi waxtar u geysan rabin. Sidaa awgeed qarnigii 20aad bilowgiisii qaaradaha Afrika iyo Eeshiya waxa ay noqdeen geyi ka koobma dalal la gumaysto oo magaca la wadaaga Ingiriis, Jarmal, Faransiis, Dhaj, Talyaani iyo Beljium.





Layli.

Waxaad goobaabintaa xarafka ku horyaal weedha aad is leedahay waa run:-

1. Qarnigii sahamisku waxa uu ahaa:-
   b) .Mid ay Yurub adduunka ku ilbixisay.
   t) Mid adduunka intiisa kale u ahaa. dhac, boob, addoonsi.
   j) Mid ay Yurub diinta Kiristaanka ku fidinaysay.
2. Dagaalladii «Kiniisadeed» waxay ahaayeen :-
   b) talaabo ay reer Yurub gumeysi ku rabeen.
   t) Dhadhaqaaq ay nabad ku raadinayeen.
   j) Weerarro ay ku qaadeen dadyowka Afrika.
3. Odayga diinta Kiristaanku adduunka waxa uu u kale baray :-
   b) Ingiriiska iyo Talyaaniga.
   t) Dahjka iyo Boortaqiiska.
   j) Boortaqiiska iyo Isbaanishka.
4. Gumaysiga reer Yurub waxa saldhig u ahaa :-
   b) Tiigaalo dadnimobil ah.
   t) Dano dhaqaale.
   j) Xil ay iska saareen horumarinta dadyowga adduunka.
5. Gumeysi micnihiisu waa :-
   b) Maroorsiga madaxbannaanida qaran u lahaa.
   t) Madaxbannaanida qaran uu lahaa oo mid kale oo shisheeye ihi gacanta ku dhigo.
   j) Horumarin dal dhaqan sare leh uu dal dib u dhacsan u maamulo.



6. Intii aanay gumeystayaashu Afrika qabsan :-
   b) Afrika waxay ahayd geyi dib u dhacsan.
   t) Afrika dagaal, qas iyo qalaanqal-ayaa ka socday.
   j) Afrki waxay lahayd ilbaxnimooyin dhisan.
7. Reer Yurub waxa gumeysiga u suura gashay :-
   b) Yurub oo ka hormartay xagga farsamada.
   t) Yurub oo horumarisay hubka lagu dagaallamo.
   j) Dadyowga adduunka kale oo dhaqan hoose lahaa.
8. Yurub waxay ku hormartay :-
   b) Kacaankii warshadaynta.
   t) Adeegsiga cilmiga iyo farsamada.
   j) Diinta kiristaanka.
9. Gumeysigu danaa uu lahaa waxa ka mid ah, in dalalka la gumaysto:-
   b) Ay dhaqaalahooda kor u qaadaa
   t) Xiriir saaxiibtinnimo ay la yeeshaan.
   j) Ay reer Yurub ku dulnoolaadaan irmaanta dalalkaasi.
10. Gumeystayaashu taliskooda waxay ku sugteen :-
   b) Xoog milataari iyo heshiisyo been been ah.
   t) Heshiisyo ay la galeen dalalka ay gumeysanayeen.
   j) Xiriir ganacsi iyo saaxiibtinnimo.

## KACAANKA FARANSIISKA

Farans waxa ka dhashay kacaan la odhan karo waxa uu si yaable u beddeley taariikhda Yurub. Kacaankaasu waxa uu asaas weyn u dhigay afkaarta iyo dhaqanka siyaasiga ah ee maanta dunida jooga.

Kacaankaasu waxa uu ka bilaabmay dawladii Faransiiska ee la af gambiyey iyo dagaallo 25 sano soconayey (1789-1814). Kuwaasoo oo keenay in laba dabaqadood oo dagaalku dhex joogay av tii hooseysay gacanta sare yeelato.

Si aynu u aragno waxyaabaha u sabab ahaa kacaankaas Faransiiska waxaa lagama maarmaan ah in aynu indha indhayno 3 waxyaabood. Marka hore waxyaabaha is af garanwaaga keenay ee dhaqanka Faransiiska ku jiray; mid labaad heerka wacyiga ay ka gaadhsiinaayeen iyo kartida dabaqaddaha Ummaddaas ee dulmiga tabaanaayay; mid saddexaad waxyaabaha ku kalifay inuu kacaankaasu dhasho waqtigaas.

## CUDURKA DHAQANKA KU JIRAY

Faraans intii kacaanka ka horeysay waxay ahayd mid isku dulnoolaansho iyo dabaqaad kala qoqoban ku dhisan. Nin kasta oo Faransiis ihi dabaq buu u dhashay, dabaqadaana mid kale uguma gudbi kari jirin. Waxaa jirta qoysas hantigoosad ah iyo wadaado kaniisadda haya. Labadaas oo wada jira yaa dhulka oo dhan iska lahaa. Beeraalayda iyo cidda kale ee dhulka ka shaqayn jirtay, sida kuwa macdanta qoda ama kaymaha ku noolaa waxay u wada shaqayn jirayn ama dhulka ka kiraysan jireen kooxda yar ee xukunka haysatay.

Sida dabaqadaas yari ay qofka hantidiisa ugu kor noolayd bay xagga siyaasadda iyo sharcigana dabaqdaaha hoose u lahayd

Xukunka ama siyaasadda dalka waxaa iska haystay ama loo hayay dabaqadaas oo uu horkac u yahay qoyska reer boqor. In qofku ka qayb galo barlimaanka, madaxtooyada laamaha dawladda ama kaniisadaha waxay ahayd mid aan loo sinayn oo ku dhisan dhalasho, una go'an dabaqadaas.

Sharciga naftiisu mid loo siman yahay ma ahayn. Nimanka Hantigoosadka ihi markay joogaan degmooyinka ay dhulkooda leyihiin way ka sareeyeen maxkamadaha iyo booliskaba. Sida xaqiiqada ah labadaba iyagaa lahaa oo ku shaqaysan jiray. Waxanay labadaba u isticmaali jireen si ay uga gargaaraan inay si hawl yar cashuurta iyo kirada uga urursan karaan dadka dhulkooda ku dhaqan.

Mdaxda kaniisadu iyo kaniisaduba waxay ka mid ahaayeen dhul-goosatada, dhulku ugu badan haysata. Sidaa darteed culimada kiniisaddaa maamuli jiray waxa ay ahayeen quwad ay boqorka iyo dadka maamulka siyaasiga ah la wadaagaba ay tixgeliyaan kana danbeeyaan.



Markaas kacaankii Faransiiska ee 1789 - 1814 waxa uu ahaa mid lidi ku ah lana doonayo in lagaga xoroobo dabaqada dhul-goosatada ah iyo kiniisada.

## WACYIGA IYO KARTIDA CUSUB EE FARANSIISKU SOO GAADHAY 1789

Waxaa is weydiin leh waxa weeye waxa dadka Faransiiska ihi hore uga dhiidhiyi waayey dulmigaa inta badan soo haystay. Taasna jawaabteedu waxaa weeye, meeshii kasta ee kacaan cusubi ka dhasho, waxa isla markaas kacaankaas cusub la dhasha wacyi cusub. Farans waxay waqtigaas ahayd horkacaha aqoonta Yurub. Waxyna culumada iyo faylasuufyada Faransiisku gaadheen inay abuuraan cahdi taariikhda Yurub ku magac dheer.

## WAAGII MAAN IFKA

Waagaas taariikhda looga yaqaan waagii maan ifka Farans waxa ay ahayd xarunta waxbarashada ee Yurub. Sida darteed Faransiiskuna waxa uu ahaa,af ninkii reer Yurub ee doonaya inu wax bartaaba waajib ku ah in u barto. Sidaa darteed dadka Faransiiska ihi waaga maan ifka waxa ay cilmiga iyo aqoonta ka gaadheen heer ay ku gartaan in nolosha ay ku noolyihiin ay xuntahay. Isla markaas waxa ay aqoonsadeen in sida noloshaa kaga baxayaan ay tahay iyaga oo baabiiya dabaqada dhul-goosatada ah ee ku dulnool dad-weynaha intiisa kale gacantana ku haysa habka siyaasiga ah.

Waagaas maan ifka Farans ganacsigeeda iyo sinaacadeeduba aad ayay sare ugu kaceen. Markaas waxa samaysantay dabaqada la magac baxday dabaqada hantigoosadka. Dabaqadka cusub ee hantigoosadka ihi way ka xoolo badnayd dabaqadii dhulgoosatada ahayd sidaa darteed iyaga ayaa gadhwadayaal u noqday kacaankii Faransiiska. Ugu danbaystii markii uu kacaanku hirgalayna intay xukunkii kala wareegeen dabaqadii dhulgoosatada ahayd ayey habkii dhulgoosigana ku beddeleen habka la magac baxay hantigoosad. Hantigoosatadu waxay gaadhay heer ay aqoonsadaan mushkiladoodu inay ku jirto sida dabaqaduhu u wada dhaqmayaan laakiin aanay jirin waxaan barwaaqo ahayn oo ka iman karaa wada jirkooda Ummadnimo.

## WAXYAABIHII KACAANKA QARXIYEY

Waxyanu soo aragnay waxyaabo dhawr ah oo tilmaamaya in dadweynuhu Faransiisku wax ka tabanayeen sida hantida iyo xukunda uu u kala qaybsanaa.

Waxaase dabkii 1789 daaray qasnada dawladda oo madhatay. Waxaa dhacday in wixii soo galayey dawladii Liwis kii 16naad ay si weyn uga yaraatay wixii ka baxayey. Arintaas sababteedu ma ahayn dhaqaalaha Faransiiska oo dhacay. Waayo sida run ahaanta ah dhaqaalahoodu caadaas ayuu marayey. Waxaase miisaaniyadaa is bixn wayday u sabab ahaa laba shay ka horena waxuu ahaa deynan fara badan oo ay dawladu u qaadatay dagaalo hore oo ay soo gashay. Dagaaladaasna waxa ka mid ahaa dagaalkii xoraynta Maraykanka 1778 iyo dagaalkii ay Hindida iyo Maraykanka ay gumaysigooda Faransiiska iyo Ingiriisku ugu loollamayeen ee 1756-1763.

Daynka ka sokow waxaa jiray in ciidama fara badan dawladii Lowiskii 16aad ay ku haysay wadanka gudihiisa iyo dibadiisaba. Kuwaas oo ay ku bixi jireen 25 % misaaniyadda daladdu.

Waxaa kalo dhacay cashuurihii la ururin jiray ayaa yaraaday, sababtuna waxa ay ahayd dabaqadda sare iyo kaniisada oo cashuur la sheego ka bixin jirin xoolaha ay haysteen.

Markaas si dawladda isu bixiso ayaa boqorkii isku deyey in dabaqadda dhulgoosatada ihi cashuurihii ay la baxsanayeen la soo geliyo qasnada dawladda. Wuxuu isla markaa isku dayey inuu xeerkii guud ee dalka bedelo oo qayb xukunka ka siiyo dabaqadda hantigoosdka ah si markaas ay u aqbalaan in ay kordhiyaan lacagta ay dawladda siinayaan. Waxaase laba arrimoodba is hortaagay dabaqada dhulgoosatda ah. Sababta ay u diideena waxa ay ahayd iyaga oo aan ogolayn:-

a) Cashuurta oo ku kordha.
b) Xukunka oo lala qaybsado.

Markii boqorku arimahaa ka hadhi waayey ee ku adkaystayna dabaqadii dhulgoosatada ahayd waxa ay ku doodeen in in aan cashuurna la waydiin karin dustoorkii horena la baabin



karin ilaa la isgu yeedho baarlamankii dalka oo aan mudo doora isu iman. Sababta ay taas u yeeleen waxa ay ahayd iyaga oo ogaa in baarlamaanku arimahaas yeelyn.

Boqorku wuu oggolaaday hase yeeshee wuxu isla markiiba sameeyey dustoor lagu soo doorto dadka ka wakiil ah dabaqada hantigoosadka ah ee markaa abuurmaysay.

Boqorkii baarlamaankii waxuu isgu yeeray markay sanadu ahayd 1788. Hase yeeshee dabaqadii dhulgoosatada ahayd way diideen in ay la fadhiistaan dadkii la soo doortay. Boqorka qudhiisu markii barlamaanka laysigu yimi dabaqadii sare ayuu arintaas ku raacay. Arintaas ayaa kliftay dhalashadii Kacaanka Faransiiska waayo dabaqadii dhexe oo ka kooban ganacsatada iyo farsamo yaqaanada iyo dabaqadii hoose oo ka kooban beeraleyda iyo shaqaala ayaa iyaga oo isku duuban ku kacay dabaqadii dhulgoosatada ahayd ee ka koobanayd madaxda kiniisadaa qoyska reer boqor iyo dadka akhyaar isku sheega ah.

Dadkaas aynu soo sheegnay ugu horayiintii waxa ay ku kaceen in ay weeraraan xarumo dawladda iyo dabaqada sare.

Meelihii ugu horayntii dad weynu qabasadeen waxa ka mid ahaa xabsi weyn oo Baariis badhtankeeda ahaa lana oran jiray Bastaal.

Xagga miyaga beeralaydii waxay bilawday inay qabsadaan beero badan oo kaniisadda iyo dhulgoosatadu lahaayeen. Ciidamadii oo u badnaa labada dabaqadood ee afganbiga wadana waa diideen in ay si cad ula soo saftaan dawladdii qoratay ama ay burburshaan kacaanka.

Julay 1789 waxaa la gaadhay in dawladii boqorka iyo dhulgoosatadii ay baaba'do meel walbana uu kacaanku dawladda la wareegay. 26kii Ogosto waxa shir weyn lagu gaadhay go'aanada hoos ku yaal:

> In dadnimada sida loogu siman yahay laga wada simanyahay xuquuqda iyo waajibaadka qofnimo iyo wadaninimo.

2. In qofna xuquuq dheeraad ah ku yeelan karin dhalashadiisa daraadiis.

3. Xuquuqda qofka ee dabiiciga ah waxaa ka mid ah gobanimo, nabadgeliyo, hanti inuu yeesho iyo inuu diido gumaysi iyo xaqdaro.

4. In dad oo dhan ay u wada dhasheen xornimo iyo sinaan.

5. In sharciga loo wada simanyahay.

6. In shaqada dawladda loo wada siman yahay.

In kastoo, mabaadi'daasu ay ahaayeen kuwa qurux badan oo qaar la mid ihi aanay xeer dawladdeed hore u soo gelin, wax nasiib daro noqotay in mudo yar dabadeed aad loo bedelay. Gudidii kacaanka maamulaysay gidigood waxa ay noqdeen dad u dhashay dabaqada hantigoosatada, afganbigiina wa ka xumaaday. Distoorka cusub ee la bilaabay samayntiisa 1791 waxaa lagu cadeeyay in aan beeralyda iyo shaqaalaha aan siyaasadda wadanka lagu aamini karin. Taana waxa ay sabab uga dhigeen dabaqada hantigoosadka ihii in aan dbaqada hoose aanay ixtiraamayn hantiga iyo nidaamka hanti lagu dhaqaayo mar hadaynaan iyagu hantida wax ku lahayn.

Aqoon la'aan daraadeed inaynan dabaqadda shaqaalaha iyo beerlayduu gudan karin xilka siyaasaddu iyo xukunka dalku ubaahan yahay.

Sidaa awgeed waxaa dustoorku gooyey in:

1. Qof aan cilmi lahayn loo dooran karin xafiis sare oo dawladeed.

2. In qofka aan hantida lahayn aanu la cod ahayn hantilayda.

Dustuurka cusub waxa uu ahaa mid dabaqadda hantigoosadka ihi iska lahayd, sida darteed waxa ay abuureen dawlad danahooda ilaalisa. Dabaqadda hoose aad ayey taas ugu xumaadeen waxayna ogaadeen in la khiyaameeyey.



**Yurub iyo Kacaanka:**

Kacaankii Faransiisku waxa uu dhashay waqti Yurub ay kala qaadato afkaarta siyaasadda iyo dhaqanka kaleba. Marka baaqa uu kacaanka Faransiisku dunida ugu dhawaaqaayay xornimo, sinaan iyo walaaltinimo argagixiso ayuu ku noqday dabaqada dhulgoosatada ah iyo boqoradii keligood tashadayaasha ahaa ee Yurub haystay. Isla markiibana waxa u riyaaqay waxa Farans ka soo yeeraayey dabaqadaha hoose ee Yurub. Yididiiladaas cusub ee shaqaala iyo beeralaydu is tuseen baa ahayd mid xaqiijisay in Kacaankaasu ahaa mid horkacaaya wareer cusub oo ku duulaan ahaa danaha kuwa Yurub xukenkeeda markaa hayey.

Waxay dawladii kacaanka ahayd samaysay laba arrin oo kale. Kuwaas oo dawlad kasta oo Yurub joogtay u muujay in xukunka cusub ee Baariis ka dhashay aan loo dulqaadan karin. Markaas waxay is wada tuseen in dawladaas iyo afkaarteedaba dagaal lagala hortago.

Arintii ugu horeysay ee boqorrada Yurub ka wada xanaaqeen waxay ahayd diliinkii boqorka. Liwiskii 16naad waxa qoorta loo dheereeyey 1792. Arrintaas aad baa boqorrada Yurub uga xumaadeen.

Mida labaad ee ayka wada xumaadeen waxay ahayd sidii kiniisadii katooliga ahaa loo galay. Kacaanka hortiis kiniisada madaxdeeda Boobka Roma jooga baa dooran jiray.

Waagiise kacaanka madaxdii hore oo dhan waa la bedelay, waxaana lagu bedelay mid ay dawladu dooratay Beryahaas madaxda kiniisaddu xukunka dalka qayb libaax bay ku lahaayeen. Taas se kacaanku wuu baabiyey waxayna noqdeen qaar aan siyaasada dalka shaqo ku lahayn. Mida sadexaad oo ah midii ugu waynayd waxay ahayd kiniisadii oo dhulkoodii laga qaaday, dhulkaas kiniisada laga qaadayna waxa loo gaday si dawladdu ugu dayn baxdo.

Talaabooyin kaas kiniisada laga qaaday waxay kaga xanaajiyeen dawladihii kaatooliga ahaa sida Isbayn, Bortaqiis, Brusiya iyo kuwa kaloo badan.

Afkaarta kacaanka sidii loo galay boqorka iyo kiniisada waxay keeneen in Yurubta kale ku heshiiso in la burbursho kacaankan Faransiiska.

Abriil 1792 baa dagaal lagu bilaabay Farans. Dagaalkaas waxa ka qayb galay cidamada Yurub iyagoo isu gaashan buuraysanaya baabiinta Faransada cusub. Dadka Faransiiskana waayadaa waxyaaba badan bay ka tirsanayeen dawladaha Yurub sidaa darteed waxay ururiyeen cidamo 80,000 oo askari ah. Cidankaas oo ay hogaaminayeen saraakiil dabaqada hoose ihi bayna kala hortageen kuwi, soo weeraray. 24 sano oo uu dagaalkaasu socday abaan duulaha cidamada kacaanka horsocday waxuu ahaa nin la odhan jiray Naabolan Bonabeert. Naabolan ma ahayn nin Fransiis ah waxase uu ka yimi dhulbadeedka yar oo dalka Talyaaniga u dhow lana yiraahdo Korosiika.

Farans buu wax ku bartay, markii kacaanku dhashayna waxuu ahaa sarkaal yar oo markaa akademiyada ka soo baxay In yar intaan dagaaladu socon buu muujiyey in xaga abaanduule nimada dagaalka iyo xaga siyaasadaba aan cidi la tartami kareyn. 1799kii iyado Farans dagaal kaga socodo Yurub iyo Afrikada waqooyi oo dhan buu xukunkii dalka la wareegay. Markiibana waxa uu ku dhaqaaqay in xasilloonidii iyo shucuurtii kacaan'nimada uu soo celiyo afkaartii tawriga ahaydna uu ku fidiyo Yurub oo dhan. In kasto aakhirkii laga adkaaday lana qabtay 1814kii hadana waxaa uu Yurub tusay abaan duulihii iyo xoogii ugu wayna ee Farans weligeed ka dhashay. Taasna waxyaabaha u sabab noqon kara waxa ka mid ahaa ruuxa kacaanimada ah ee shidaayay ciidamada iyo madaxda Faransiiska.

Waxaa is weydiin le waxa dunidu ka dhaxashay kacaankii Faransiiska ee 1789 - 1814. Markii dagaalkii dhamaaday waxay Farans dunida ku fidisay afkaar maanta asaas u ah cadaalada iyo siyaasada. Waxaa kuwa ka mid ahaa in dhibta iyo waxtarka loo wada simanyahay. Waxaa laga bartay Farans in aan xukunka dhalasho lagu kala xigin.

Waxa kale oo ay kala sooceen hawlaha dawladda iyo kuwa nidaamka diiniga ah. Waxaa laga bartay in kaniisaddu ay faraha ka qaado maamulka siyaasadda iskuna koobto sidav dadka ilaahooda u barilahayd. Markaa hadynaan isku khaldin nidaamka aynu doonayno sidaynu dadkeena barwaaqo ku gaadhsiino iyo nidaamkeena diineed waa mid aynu ka baranay kacaankii Baariis ee qarnigii 18aad.



**Layligii 1aad Kacaankii Faransiiska:**

1. Taariikhdu waa:
   b) Kacaano isku dabo xidhan.
   t) Isbedelo isku dabo xidhan.
   j) Jiraalo aan shaqo isku lahayn.
2. Kacaankii Faransiisku waxa uu ahaa kacaan ku dhacay:
   b) Habka siyaasiga ah ee dalka Faransiiska
   t) Habka dhaqaalaha ah ee Farans
   j) Nolosha dadka Faransiika ah oo dhan.
3. Kacaankii Farnsiisku waxa baabi'iyey dabaqadii
   b) Ganacsatada ahayd ee Faransiiska
   t) Culimada kaniisada iyo qoyska reer boqor ka koobnayd
   j) Shaqaalaha iyo beeralayda
4. Waxyaaba dhaliyey kacaanka Faransiiska **waxa ka mid ahaa:-**
   Dawladii Faransiiska oo ka hari wayday dadkeedii **shaqaysanayey**
   t) Dawladii Faransiiska oo kacaday, qasnadaheedina ay madheen
   j) Dadkii Faransiiska ahaa oo doonay in aan dawladina xukumin
5. Markii uu kacaanka Faransiisku dhashay dawladaha Yurub inteeda kale haysatay waa:
   b) U riyaaqeen oo way soo dhaweeyeen
   t) ,Waa ka xumaadeen waxayna isku dayeen in ay ishortaagaan
   j) Maanay caawin, lidina kuma noqon ee dan ayey uga baxeen

**Qaybta run iyo Been:**

1. Kacaaku waa isbedel kedis ah oo wada gaadha nolasha ijtimaaciga ah ee Ummadda kacaanka samaysay.
2. Dawladaha haysta dalka Giiriga, Jili waa dawlado kacaan ah.



3. Kacaankii Faransiiska waxuu ka mid ahaa waxyaaba salidhiga u ahaa habka siyaasiga ah ee aduunyadu maanta ku dhaqanto.
4. Kacaankii Faransiisku waxuu ka xoreeyey dadka Faransiiska ah dabaqadii ka koobnayd wadaadada iyo qooyska boqorka ee ku dul noola dabaqadaha kale.
5. Waagii maan-ifka dadka reer Yurub aad ayey afka Fa ransiiska u baran jireen.
6. Kacaankii Faransiiska dadka Faransiiska waxuu ka dhigay bulsho aqoonsan in ay Ummad qudha isku yihiin.
7. Waxyaaba dawlada Faransiiska kiciyey waxa ka mid ahaa ciidamada badan ee ay dawladu dalka gudihiisa iyo dbediisaba ku haysay.
8. Meeli ugu horeeyey ee ay dadweecyna Faransiiska ee dawlada ku kacsana qabsadeen waxa ka mid ahaa xabsiga weyn ee loo yaqaano Baastiil.
9. Markii uu kacaanka Faransiisku curtay kiniisadii oo dhan waa lawada baabi'iyey.
10. Boqorkii Luwis waxa la dılay 1792kii.
11. Naabooliyon wax la qabtay markay taariikhdu ahayd 1814.

## KACANNKII RUUSHKA

Qarnigan aynu ku jirno ee 20naad, waa **mid kacaanno ku caan ah. Kan ugu muhiimsan ama inta kaleba ay wax kaga daydeen waa kacaankii ka dhacay dalka Ruushka 1917. Kacasu wuxuu ahaa kii dhaliyay dawladda hawl iyo hanti wadaagga ee maanta dalkaa xukunta.**

Kacaanka Ruushka ee keenay **Midowga Soofiyeetka** waxuu ahaa mid Kacaankii Faransiiska ee aynu soo qaadanay waxyaabo badan kala mid ah. Labaduba wax ay ku qaylinayeen mabaadii' loogu talo galay in aadamiga oodhan lagu dhaqo. **Waxay ahaayeen kuwo looga jeedo in lagu baabi'iyo dulmiga iyo darxumada dadka adduunka isku hayo.**

Midda saddexaad labaduba waxay ahaayeen mid aqoonlayda dalku in badan ku taamayeen. Fraans aqoon laydii la oran jiray filasofii ay ka mid ahaayeen Voltaire, Rousseau, Marat baa qalin kooda in badan ku sheegay in loo baahnaa kacaan dadaweynaha daryeela. Moskona aqoonlayda, Ruushka ilaa qarnigii 18naad waxay ahaayeen kuwo axsaab qarsoodiya samaysanaayey. Mar walbana waxay isku dayayeen shirqool ay ku beddelaan xukuumadda, siyaasadda iyo dhaqanka dalka joogay. Waxay mar walba damacsanaayeen, inay burburiyaan saddexda gumgume ee dadka Ruushka dhiigooda jaqaayey. Kuwaas oo ahaa boqortooyo daalimad ah, hantigoosad yar iyo kaniisad aan naxariisan.

Kacaanka Faransiiska wuxu doonayay in ay nolosha dadku isbeddesho,

hase yeeshee waddadi lagu gaari lahaa isbeddelkaa iyo sidii lagu dhisi lahaa bulsho cusub uma ayan muuqan. Kacaanka ka dhashay dalka Ruushka wuxu asagu yahay mid dhaqan galinaya mabaadii'da hantiwadaagga cilmiga ku dhisan oo si tifaftiran u tilmaamaya sidi lagu dhisi lahaa bulsho cusub.

## ASBAABTA GAARKA AH EE KEENAY KACAANKII RUUSHKA EE 1917

Boqolkiiba sideetan ayaa dadka Ruushka waxay ahaayeen dad dhulka beerta. Hayeeshee waxay ahaayeen dad iyaga iyo dhulkoodaba ay lahaayeen qoysas tirsan iyo kiniisadu. Waxay ahaayeen dad aan u ahayn xor inay tuulada ay ku dhaqan yihiin iskaga taagan iyagoo aan fasax ka qaadan cidda dhulkay beertaan leh ama booliska.

Waxay soo saaraan intiisa badan waxaa iska lahaa cidda dhulka leh. Haba yaraatee wax taageero ah ha noqoto cudurka oo laga ilaasho ama waxbarasho kama ay heli jirin dawladda iyo cidda kale ee hantidooda sheeganaysay. Dulmiga iyo adoonsiga çaynkaas ahaa dadkaasu in badan bay tabanayeen kana gilgisheen marakay rabsadohoodii iyo ku kacniinkoodii dawladda ay dami waydayna waxaa boqorku uu isku dayay inuu dadkaa xoreeyo dhulna loo oggolaado inay iibsadaan. Kaasu waxuu ahaa sharcigii adoon xoreeyaha ahaa ee 1861.



In kasta oo sharcigaas la soo saaray haddana sida runta ah beeralaydii kama nabad gelin adoonsigii lagu hayay. Ilaa kacaankii hawl iyo hantiwadaagga ee 1917 uu dhashay. Beeralayda markii kasta ee lays yiraahdo in yar oo aad ku sabtaan siiyaba iyagu kuma ayan qancayn ee waxay doonayeen in ay sii kordhistaan. Sida darteed iyaga maalinba maalinta ka dambaysa ruuxa kacaanimadu waa uu ku sii kordhayay. Dhaqdhaqaaqyo isdaba jooga ah baana ka socday kuwaas oo ay doonayeen in ay isku xoreeyaan. Sabata labaad ee kacaankii 1917kii keentay waxa ay ahayd aqoon layda Ruushka iyo dawladdii oo iska hor-imaatinkoodii dhamaan waayey. Qarnigii 17naad ilaa kacaanku ka dhashay waxaa jiray niman Ruush ah oo doonayey in dalkooda isbeddel horumarihi ka dhaco. Waxyaabahay aad uga xumaayeena waxa ka mid ahaa in dalka iyo dadkaba av iska yeeshaan boqorka, dhulgoosato iyo kaniisadu.

Waxay diidsanaayeen in dalkoodu ka dambeeyo Yurubta galbeed. Waxay ku taamayeen inay arkaan dhaqanka siyaasadda iyo dhaqaalaha dalkooda oo kor ugu kaca waxa yaabaha galbeedka Yurub horę uga mareen.

Waxaase nasiib xumo noqotay in dawladdii dalkoodu u aragtay aqoon layda cadaw iyo dad aan Raashiya u baahnayn. Marka waxay ku dadaashay in afka laga xiro si aan dadweynuhu u maqlin waxyaabaha ay rumaysanyihiin. Waxa kale ay ku dadaashay in aanay ka qayb gelin dawladda si aanay u fidin afkaartooda ayaga ku liddiga ah. Nidaamkaas, boqorka, dhulgoosatada iyo kaniisaddo qura ayuu daryeelaayey.

Markaas dawladdii waxay bilawday in aqoonlayda caasi garowday qaarna ay laayaan qaarna ay masaafuriyaan. Waxay bilaabeen inay sameeyaan ururro iyo dhaqdhaqaaqyo qarsoodi ah oo ay 1820kii doonaayeen inay ku burburiyaan nidaamka jiray kuna beddelaan mid horumar leh.

Qarnigii 19naad waxaa Ruushiya ka abuurantay dabaqad hantigoosato ah. Waxaana taa keenay ganacsiga iyo sancada Ruushka oo aad kor u kacday qarnigaa. Waxay la yeelatay xiriir ganacsi oo weyn dalalka Yurub iyo Aasiyaba.

Intaan qarnigii 19naad dhammaan waxa jiray baanan iyo warshado waaweyn oo ku fidsanaa magaalooyinka waaweyn ee Ruushka oo dhan.

Waxaynu oran karnaa dulmiga iyo dhaqan xumida joogay dhulka Ruushka waxaa ka dhashay afar dabaqadood oo u halgamayay inay dunshaan dawladii Nikolas II. Kuwaas oo ahaa :

1) Aqoonlayda
2) Shaqaalaha
3) Beeralayda
4) Borjuwaasiyadda

## KACAANKII 1905kii

Markii qarnigan 20aad la galay waxyaabahaasu waa sii kordheen. Kacaanimada iyo ciilka loo qabo Nikolas iyo kuwa kale ee dalka la xukumay waa sii xoogaysteen. 1902 ilaa 1905 Ruushiya waxay dagaal la gashay Jabaan. Jabaan markaa waxay ahayd dawlad yar oo technoloojiyada Yurub ay ku cusbayd. Hase yeeshee ciidammadii Ruushka kuwii badda iyo kuwii barrigaba si xun bay u baabi'isay. Arrin tuusu waxa ay dhacday waqti aan loo qabin in dawlad yar oo Aasiya ihi ay ka adkaan karto dawlad reer Yurub ah. Taas aad ayey uga xumaadeen dadka Ruushka ihi waxana u caddaatay inaan dawladda dalka u dhisan iyo xukunka Nikolaas toona wax micnaa lahayn. Waxanay dhiiri gelisay ururradii iyo dhaqdhaqaaqyadii qarsooriga ahaa ee u halgamaayay inay dawladda afgambiyaan.

Shaqaalaha Ruushka oo dhaqaaluhu ku adkaaday waxay ku kaceen dawladda iyo habka siyaasiga ah ee ay wax ku maamulaysay. Xisbigii Shuuciga oo madaxdiisa dibadda ka soo maamulaysay baa si gaar ah u abaabulay kacaankaas shaqaalaha ee 1905. Kacaanku wuxu uu ahaa mid weyn oo wadanka shaqadii ka socanaysay oo dhan fadhiisiyey. Gaadiidka, warshadaha iyo ganacsiga oo dhan baa istaagay.



Meela badan dawladdu leedahay waa la qabsaday ama la baabi'iyey in kastoo aanu hirgalin kacaankaas 1905 haddana waxaa uu ahaa mid gegeda u sii xaaray kacaankii shaqaalaha ee Noofember 1917. Sababtuna waxay ahayd :

1. Iyadoo shaqaalihii ku ogaadeen quwadooda;
2. Xisbiga Shuuciga ah ee halayaga Lenin hogaaminaaayay ayaa waxaa uu muujiyey in shaqaaluhu yihiin quwada ugu weyn kacaanka bulshada Ruushka iyo in ayan fogayn markii la ridi lahaa Saarka iyo nidaamkiisa.

## KACAANKA IYO DAGAALKII DUNIDA 1914-1918

Waxaa caddeeyey fool xumada joogta dalka Ruushka dagaalkii dunida ee koowaad, (1914-1918). Ruushku wuxuu ahaa dawladihii la dagaalamay Jarmalka iyo gaashaanbuurtiisii.

Hase yeeshee Ruushka goob kasta waa lagaga xarago qaatay. Sababaha arrintaas keenay waa badanyihiin. Waxaana ka mid ahaa : hubka iyo gaadiidka xoogga Ruushka oo aan ahayn kuwa markaas ay ku dagaal gli karayaan. Khayrkood oo hub culculus ku soo weeraraaya ayaa askariga Ruushku seef kala hortagaayay. Ciidammada ka soo horjeeda Ruushka oo hub culculus ku soo weeraraaya ayuu askariga Ruushku fardo wax ku raranayeen.

Maamul xumo daraadeed waaxa dhici jirtay in aan ciidammada Ruushka iskawarqabin, sidaa darteed nidaam ay ku wada dagaalamaan iskuna kaashadaan muusan jirin.

Waxyaabahaas oo dhami waxay keeneen in ciidammada Ruushka ay ugu dhintaan goobaha iyo dariiqyada si aan la maqal lana arag.

Markii uu sannad soconayey dagaalkuna dhimashada iyo dhaawaca askarta Ruushka waxay gaaraysay laba malyuun oo askari. Taasu way ka badanayd intii ka la'atay, gaashaanbuurtii dagaalka kula jiray oo dhan.

Waddanka intiisa kale waxaa ka muuqday fool xumooyin ninkii wanaagiisa jecel uu ka argagaxaayo. **Boqorka** waxa xukumi jiray naagtiisa oo ahayd dibusocod.

Waxaa iyadana hantiyay nin faalalow ah. **Kaas** oo ay u doorotay inuu daaweeyo inankeedii kaliyahaa **oo bukaan ahaa.** Waxayna aaminsanayd inuu karaamo lahaa. Ninkaas oo la oran jiray Rasputin waxuu boqoradda ka dhaadhiciyay in dadka hormaridda Ruushiya doonayaa ay yihiin cloka boqortooyada iyo kaniisaddaba. Markaas iyana waxay la colawday dabaqadaha hoose iyo wixii danahooda ama dacwadooda u garaaba. Marka waxaa dhacay in baarlimaanku sheegii la sameeyey kacaankii 1905 dabadiis la baabi'iyay waqtigii dagaalka, wax alaale wixii xoog lahaa oo dhulka beeri jirayna waxa laga dhigay askar. Taasu waxay keentay in beerihii cid ka shaqaysa la waayay; cunta la'aani magaalooyinkii ka dhacday.

Wixii la helaana meel kasta waxay noqdeen qaali. Arrintaasna bannaan baxyo baa shaqaalihii ka sameeyeen.

Waxaana la oran kara kacaanku wuxuu qarxaday Marso 8dii 1917kii markii shaqaalaha Leningaraad ay bannaanbaxyo ka sameeyeen cuntadoo yaraatay. Waxaana markiiba dhaqdhaqaaqaas horseeday Xisbiga Shuuciga ah. Waxaana markiiba bannaanbaxyadii uu xisbigu samaynayay ay isu beddeleen quwad u halgamaysa afgambiga dawladda.


Waxaana isla markiiba ku soo biiray shaqaalihii ku kacay saarka iyo nidaamkiisa askartaa. Markii askar cusub lagu amray inay xabadeeyaan dadka u soo baxay bannaanbaxyadaana way diideen.

Lenin oo dhaqdhaqaaqa shaqaalaha dibadda ka maamulaayey baa markaa yimid oo hoggaanka u qabtay. Waxaana u muuqday in sida uu cadawga gudaha u afgambiyayaa ay tahay iyada oo xoogga shaqaalaha iyo askarta la isu keeno; lana helo nabad geliyo si shaqaalaha iyo askarta faraha badan ee gaajada iyo dagaalka u dhimanaaya loo badbaadiyo.

Sidaa daraadeed heshiis buu la saxiixday madaxda Jarmalka. Dabadeedna isagoo horkacaaya shaqaalaha, askarta iyo



**beeralaydii** buu burburiyay Saarkii, dhulgoosatadii, **kaniisaddii iyo hantigoosatadii.** Wuxuuna dhaliyay dawladdii ugu **horaysay ee hawl iyo hantiwadaag** ahayd. Taasoo la wada **wareegtay xukunkii** dalka Noofembar 1917.



KHARIIDADDA DALKA RUUSHKA

**Laylis :**

**Waxaad goobaabinta xarafka ku horyaal weera aad is leedahay waa run**

1. Qarniga labaatanaad wuxuu caan ku yahay.
   a) Hantigoosadka oo xoogaystay.
   b) Habkii dhulgoosadka ahaa oo la soo celiyey.
   c) Dhalashada kacaannada hantiwadaagga.
2. Boqortooyada Ruushku sharcigu adoonta lagu xoraynaayo waxay soo saartay:
   a) 1861.
   b) 1800.
   c) 1900.

«weera kasta meesha banaan ee ka horaysa ku dhiga, hadday Run tahay. «R», hadday been tahayna ku dhig «B».

1. Kacaanka Ruushku wax yaabo badan buu la wadaaga kacaankii Faransiiska.
2. Dadka waxa garadka ah ee Ruushku ilaa qarnigii 18naad waxay samaysteen ururro siyaasi ah oo qarsoodi ah waxayna aad ugu dadaalaayeen inay boqortooyada Ruushka xoojiyaan.
3. Kacaanka Ruushka waxa keenay dadkii beeralayda, shaqaalaha iyo aqoonlayda.
4. Dabaqada borojuwaasiga ah ee Ruushku waxay abuurantay qarnigii 19naad.
5. Dagaalkii dawladda Jabaanku ay ku jebisay dawladda Ruushka 1902 wuxuu ka mid ahaa waxyaabaha hoos u dhigay awoodii boqorkii marka Ruushka xukumaayey.
6. Rasputin wuxuu ahaa nin faalalow ah oo boqorrada Ruushku aad u aaminsanayd.
7. Markay taariikhdu ahayd bishii Marso 8deedii 1917 ayaa shaqaalaha ku nool magaalada Leningaraad sameeyeen bannaanbaxyo ay kaga qaylinayeen cuntada yaraatay.



CUTUBKA VIII

## KACAANKII HANTIWADAAGGA EE DALKA SHIINAHA (1949)

Waxyaabihii dhacay muddadii ka dambaysay dagaalkii dunida ee labaad waxa ugu qiima weyn, nolosha adduunweynahana aad u saameeyay kacaankii ka dhashay dalka Shiinaha bishii Oktoobar 1949.

Shiina waxay ka mid tahay waddammada adduunka ugu qiime weyn, haddii la eego ballaca dhulka ay ku fadhido (9.560.000 $Km^2$) xagga t[illegible]unida dadka ku nool (700 malyan. Waxa intaa raaca ayadoo dalka Shiinuhu uu yahay halkii ka dhalatay ilbaxnimo ka mid ah kuwa adduunka ugu qiimi weyn uguna cimri dheer.

Dalka Shiinaha waxa taliskiisa hayay, 35kii qarni oo ay jirtay, ilbaxnimada Shiinaah, boqortooyin ay isaga dambeeyeen dhowr qoys. Talisku wuxuu ahaa mid layska dhaxlo, awooduna waxay ku urursanayd gacanta imbaratoorka, oo kashan jiray maamulayaal asagu magacaabo.

Ilbaxnimada Shiinahu waxay ahayd mid laga qaatay farsamooyin iyo cilmi badan, heer sare ayayna ka gaartay xagga dhaqanka, suugaanta, farshaxanka, fanka, cilmiga iwm.

Xariirta iyo maacuunta ka samaysan dhoobadu ee lagu sameeyo Shiina waxa loo dhoofin jiray adduunkoo idil. Dalalka reer Yurub waxay aad ula dheceen waxyaabahaa laga keeno Shiinaha, waxayna bilaabeen qarnigii 15naad in ay raadiyaan jidbaadeed geeya maraakiibtooda Shiina, si ay ula yeeshaan xiriir ganacsi oo toosan.

Dawladda Shiinaha siyaasaddeedu waxay ahayd in ay maamusho xiriirka ay la leedahay dawladaha kale oo ayan u oggolaan, in ay waddankeeda siday doonaan uga ganacsadaan.

Dawladda Shiinaha oo tan iyo qarnigii 18naad ahayd dawladaha adduunka ugu ilbaxsan way ku guulaysatay siyaasadeedaa, waxana u suura gashay inay ka badbaadiso dalkeeda gumeysiga reer Yurub.

**Waayihii gumeysiga :-**

Bulshada Shiinuhu waxay ahayd mid isku filan oo aan waxba uga baahnayn dibedda. Dadka Shiinuhu waxay rumaysnaayeen in ilbaxnimadoodu tahay tan adduunka ugu sarraysa. Sidaa darteed deked qura ayay u fureen maraakiibta reer Yurub ee ka ganacsataa dhulkooda, dekedda Kanton.

Kacaankii warshaduhu wuxu dalalka reer Yurub u yeelay hub cusub, kasooa awood siiyay ay adduunka kale ku qabsadaan. Dalalka reer Yurub aad bay u xoogaysteen, wayna qaadan kari waayeen dawladdaa Shiinaha oo barwaaqo ku nool oo aan u oggolayn dhaqankeeda iyo dhaqaalaheeda inay soo dhexgalaan. Qarnigii 19naad ayaa dawladaha waaweyn ee reer Yurub, sida Ingiriiska, Faransiiska, Jarmalka, Ruushka iyo Maraykanku ku qaadeen weerarro isdabajooga. Weererradaas waxa ugu magac dheer dagaal la yiraahdo «Dagaalkii Xashiishadda» oo ay isaga hor yimaadeen Ingiriiska iyo Shiinaha.

Dadka Shiinaha, markay ganacsatada reer Yurub waayeen waxay u baahan yihiin ay kaga beddeshaan xariirta, maacuunta, dhoobada, caleenta shaaha, ayay waxay bilaabeen inay dalka soo galiyaan xashiishad. Dawladda Shiinuhu, markaasi ay dalkeeda ka mamnuucdayna ganacsiga xashiishada, Ingiriisku wuxu ku soo qaaday weerar.

Dagaalkii Xashiishaddu wuxu socday muddadii u dhexaysay 1939-1942. Waxaana lagu dhammeeyey heshiiskii Nanking. Waxa heshiiskaas lagu oggolaysiiyay Shiine in ay dekedo badan u furto maraakiibta dalalka reer Yurub oo siday doonaan waddanka uga ganacsadaan.

Maamulkii dhaqaalaha dalka waxa la wareegay gumeystayaasha ku soo dullay. Gumeystayaashu waxay maamulka ganacsiga, warshadaha magaalooyinka waaweyn oo idil gacanta u geliyeen bankiyo, shirkado shisheeya ah. Dadka reer Yurub ee joogay dalka Shiinaha waxa lagu maamuli jiray sharcigooda oo qura, oo dambi kasta oo ay ka galaan dadka shiinaha boliisku faraha ma saari jirin. Dekedaha waaweyn maamulkooda iyo cashuur ka ururintooda waxa loo dhiibay saraakiil boliis ah oo ka tirsan gumeystayaasha.



Dadka Shiinaha waxa loola yimid gumeysi ay dawladaha reer Yurub u dhan yihiin isuana kaashanayaan.

Dawladahaa reer Yurub, inkastoo ay awooddii oo idil kala wareegeen ma ayan baabi'in boqortooyadii dalka ka dhisnayd, waxaana sidaa ku kallifay ayagoo aan ka hesheen kala qaybsashada dalka.

Isbeddelladii uu keenay gumeysigu waxa ka mid ah aadna u waxyeelleeyay dalka awooddii siyaasiga ahayd oo ka wareegta boqortooyadii dalka. Awooddii iyo waxqabashadii dawladda way is dhintay waxayna noqotay mid gumeysigu ku adeegto.

**Hoos u dhicii dhaqaalaha :-**

Dhaqaalihii dalku wuxuu noqday mid shisheeye leeyahay. Dhibaatooyinkii dadka shiinaha ka haystay xagga dhaqaalaha aad bay u sii bateen, siiba dadka beeralayda. Ma ayan jirin dawlad leh karti ay ku daryeesho danaha dadka, waxaana batay isboobkii iyo xasillooni la'aantii.

Dhaqaalaha dalka Shiinaha wuxu ku dhisan yahay beerashada. Dadka beeralaydaa oo dhan $\frac{3}{4}$, waxay ahaayeen badanaaba kuwo aan lahayn dhulka ay beertaan, dhulka qofka beeralayda ahi tacbado, ha ahaado mid uu leeyahay ama mid uu kiraysto, marnaba kama badnaan jirin qoodi. Beeralayd $\frac{1}{3}$ waxay tacban jireen hal qoodi. Tacabka dhulka, qoyska oo dhan wuu ka qayb qaadan jiray. Inkasta oo ay aad u hawshoon jireen, dhulka yar waxa ka soo bixi jiray wax aan sadkooda iyo kirada uu ka qaato ninka dhulka lihi aan ka badnayn. Dadkaasu ma heli jirin wax ay meel dhigtaan oo kaydsadaan.

Sannadyo badan ayaa waxa dhici jirtay in daad yimaado ama aan roob di'in. Dadkaasu ma heli jirin wax gargaar ah ee gaajo ayay u le'an jireen, waxay dhibaatadu gaarsiin jirtay in ay ubadkooda qaar iibiyaan, si ay u helaan cunno ay inta kale noloshooda ku badbaadiyaan.

Nolosha beeralayd Shiinaha, oo horeba u ahayd mid ciriiri ku jirta, waqtigii gumeysiga way sii xumaatay.

**Halgankii gobannimadoonka :-**

Markii dhibaatooyinkii gumeysigu la yimid ay dalkii oo dhan waxyeelooyin u geysteen, ayaa waxa bilawday halgan gobannimadoon ah. Dadka Shiinaha waxa u muuqday dhaqankoodii oo burburay, dawladoodii oo baaba'day, dhaqaalahoodii oo shisheeye hantiyay, waxayna ku dhaqaaqeen dagaallo isdabajoog. Dadka Shiinuhu waxay doonayeen in ay shisheeyaha ka xoreeyaan dalkooda, ayna dumiyaan nidaamka boqortooyada. Dagaalladaas dadka Shiinuhu waxay ka soo hooyeen guulo waaweyn kuwaasoo lagu gaarav tallaabooyin isdabajooga.

**A) Dhlashadii jamhuuriyadda :-**

Kacaankii u horreeyay, oo dumiyay boqortooyadii, dhaliyayna Jamhuuriyadda Shiinaha, waxa horseede ka ahaa Dr. Sun-Yet-Sen.

Kacaankaas wuxu ka bilaawday magaalada Hankow, markaa askartii halkaa fadhiday caasiday dawlad ku sheeggii. Kacaankaas dalkoo idil ayuu ku faafay, waxaana dalka Shiinaha ka dhalatay 12 Febraayo 1912kii Jamhuuriyad, inkastoo boqortooyadii la riday, kacaanyahaannadii Shiinaha uma suura galin inay xukunka qabsadaan. Taliska dalka waxa la wareegay maamulayaashii dawladdii hore iyo waddaniyiinta.

**B) Kacaankii waddaniyiinta :-**

Dr Sun wuu qaadan kari waayey in halgankii muddada dheer uu soo hayay uu gardarro ku dhammaado. Go'aankaas waxa ku dhiirri galiyay kacaankii ka dhashay dalka Ruushka. Dr. Sun wuxu dhisay xisbi lagu magacaabo Kuo mintang, (Xisbiga waddaniyiinta). Xisbigaas waxay heshiis iyo iskaashi lahaayeen ururrada iyo axsaabta horusocodka uu ka mid ahaa xisbiga Shuucigu.



Kacaankii Waddaniyiinta wuu ku guulaystay halgankiisii oo wuxu afgambiyay dawladdii burjuwaasiyiinta.

Ayaan darro waxay ahaydse, in markaa lagu guulaystay qabashadii taliska, taasoo lagu magacaabo kacaankii waddaniyiinta in uu dhintay Dr. Sun.

**Dawladdii Chiang Kai Shek :-**

Dhimashadii Dr. Sun waxay u suura galisay abbaanduulihii ciidammada Chiang Kai-Shek in uu boobo taliskii dalka, dhisana dawlad dibusocod ah, oo gumeystayaashu ku adeegtaan.

Chiang-kai-shek wuxu ku dhaqaaqay dagaal uu ku ciribtirayo ururrada iyo axsaabta horusocodkaa, siiba xisbiga Shuuciga ah. Intii dagaalkaani socday ayaa waxa dawladdii soo weerartay Jabbaan.

Xisbiga Shuuciga wuxu beeralayd iyo reer miyiga oo dhan ka haystay kalsooni weyn, dhul badan oo baadiyaha ka mid ahna wuxuu u ahaa dawlad. Wuxu xisbigaasi waydiistay dawladdii Shiang-kan-shek, oo u talisay magaalooyinka, inay xooggooda isu geeyaan si ay uga hortagaan cadawga dibedda. Dawladdiise taladaas way diidday, waxayna dooratay in ay wado dagaalkii ay kagala soo horjeeday Shuuciyiinta. Go'aankaasi wuxu kordhiyay nacaybkii loo qabay dawladdii Chiang-kai-shek.

Dagaallo qaraar ayaa ka dhex dhashay ciidammadii dawladdii Chiang-kai-shek iyo shuuciyiintii. Markii ciidammada Shuuciga dhowr goobood looga guulaystay oo la hareereeyay ayaa taliyihii ciidammada Mao-Tse-Tung wuxu socdaal dheer oo gaara 6.000 oo mayl la galay 100.000 oo qof. Socdaalkaa oo loo yaqaan «Socdaalkii dheera» wuxu ahaa mid aad u adag, dadkii bilaabayna waxa ka dhammaystay 20.000 oo qof.

**Xoogeysigii Shuuciyiinta :-**

Intii Dagaalkii Dunida ee Labaad soconaayay dalka Shiinuhu wuxu u kala qaybsanaa saddex talis: taliskii Jabbaanka oo haystay dalka barigiisa, Chiang-kai-shek oo haystay dalka galbeedkiisa iyo koofurtiisa, iyo Shuuciga oo hastay waqooyi Galbeed.

Intuu dagaalku socday iyo ka dibba awoodda dawladda Chiang-kan-shek hoos bay u liicaysay, waxaana sidaa ugu wacanaa ayadoo aan waddanka wax horumara ama isbeddel ihi ka hirgalin. Dawladdu waxay ku tiirsanayd dhulgoosatada iyo ganacsatada, waxayna isku badbaadinaysay bunduqa caaradii.

Waxa ka soo horjeeday xisbiga Shuuciga ah oo kalsoonida uu haystay maalinba maalinta ka dambaysa soo kordhaysay, dadka raacsanna badanayeen. Xisbiga Shuuciga oo la aasaasay 1921kii, wuxu ahaa mid lagu barbaarshay miyiga oo dadka deggen, sidaan hore u soo aragnay aad u dhibaataysnaayeen.

Xisbiga Shuuciga wuxu ahaa mid horseedaya isbeddel iyo horukac, waxyaabihii uu ku guulaystayna waxa ka mid ahaa:-

b) Asagoo dalalkii uu qabsaday ka qaaday dhulkii dhulgoosatada una qaybiyay dadweynaha.

t) Asagoo degma walba ka dhisay iskaashatooyin.

j) Asagoo dadkii ka qayb geliyey taliskii iyo maamulkii siyaasadda, dhaqaalaha iyo nabad galyada.

Beeralayd shiinaha waxa ay markii ugu horraysay dareemeen xornimo iyo iyaga oo ka nabad galay dadkii yaraa ee ku dul noolaa.

Xisbiga Shuuciga ahi meeshuu xoreeyaba wuxuu noqday mid muujiya horumar dhaqso ah, abuurana bulsho cusub oo isku kalsooh isku duubanna.

Waxa dadka shiinaha u caddaatay in mabaadii'da Markis iyo Lenin lagu dhisi karo barwaaqaynta iyo xoogeynta dadka Shiinaha. Madaxda xisbiga Shuuciga oo uu horkacayo Jaalle Mao waxay heegan u ahaayeen, aqoon iyagoo u leh dhisidda dalka. Waxay kaloo muujinayeen in ay diyaar u yihiin in ay dalka ka xoreeyaan gumeysiga shiisheeyaha iyo dabadihlifyada una soo celiyaan midnmadiisii iyo sharafkiisii.

**Kacaankii Hantiwadaagga :-**

Ma jiro waqti go'an oo laga bilaabo dhalashadii kacnaaka Hantiwadaagga Shiina, hase yeeshee waxaan oran karnaa 28dii sano ee u dhexeysay dhalashadii xisbiga Shuuciga iyo



dhalashadii dawladda hantiwadaagga ee Shiina kacaankaasi wuu socday.

Dadka Shiinaha ah ee raacsan xisbiga Shuuciga rumaysanna mabaadii'da hantiwadaagga maalinba maalinta ka dambaysa way ka soo kordhayeen, dhulka uu u taliyayana wuu sii ballaarranaayay.


Kolkuu dagaalkii dhammaaday 1945kii, dhulka miyiga ee ku yaal Shiinaha waqooyi iyo tan dhexeba waxa u talinayey xisbiga Shuuciga.

Markii Jabbaan is dhiibtay ayaa waxa bilawday tartan ay Shuuciyiintii iyo wadaniyiin ku sheeggii ugu tartamayeen qabashada dhulka Jabbaan ka kacday.

Dawladdii Chiang Kai Shek iyo shuuciyiintii waxa ka dhex kacay 1947kii dagaal toleedkii u dambeeyay. Ugu horrayntiiba waxa la hareereeyay oo is dhiibay ciidammadii Chiang-kan-shek u fadhiyay Manjuuriya.

Guushaa weyn waxa ku xigay guul isbadajoog oo lagu xoreeyay Shiina badankeeda. Chiang-kai-shek iyo intii yarayd oo raacsanayd waxay u carareen Jasiiradda Taiwaan.

Jaalle Mao tse-tung wuxu kaga dhawaaqay magaalada Peking dhalashadii Jamhuuriyadda Dadka ee Shiina, Oktoobar 1deedi 1949kii.




KHARIIDADDA DALKA SHIINAHA



**Layli :**

1. Shiina waxay ahayd dawladda adduunka ugu horumarsan tan iyo :-
   - b) 1800.
   - t) 1500.
   - j) 1900.

2. Dalka Shiinaha waagii hore waxa laga dhoofin jiray:
   - b) Xariir iyo maacuun.
   - t) Dahab iyo qalin.
   - j) Subag iyo hilib.

3. Maamulkii siyaasiga ahaa ee gumeystayaasha reer Yurub la wareegeen waxa ka yimid :-
   - b) Dhaqaalihii dalka oo shisheeye gacanta ku dhigay.
   - t) Hiddihii iyo dhaqankii oo horumaray.
   - j) Boqortooyadii dalka oo xoogeysatay.

4. Dagaalkii xashiishadda wuxu ka kacay :-
   - b) Ganacsigii oo la oggolaaday.
   - t) Xashiishaddii oo la mamnuucay.
   - j) Ingiriiska oo lagu gardarrooday.

5. Dawladdii Jamhuriyadda waxa hoggaankeeda qabtay :-
   - b) Shuuciyiintii.
   - t) Waddaniyiintii.
   - j) Maamulayaashii dawladdii boqortooyada iyo madaxdii ciidammada.

6. Kacaankii uu madaxda ka ahaa Dr. Sun wuxu ahaa mid :-
   - b) Taageersan boqortooyada.
   - t) Dahadhilif u ah gumeystaha.
   - j) Doonaaya in uu dalka ka xoreeyo boqortooyada iyo gumeystayaasha.

7. Dawladdii Chian-kai-shek waxay ku tiirsanayd :-
   b) Beeralayda.
   t) Shaqaalaha.
   j) Dhulgoosatada iyo ganacstada.

8. Xisbiga shuuciga waxa la aasaasay :-
   b) 1949.
   t) 1900.
   j) 1921.

9. Geediga la magac baxay« Geedigii dheeraa» wuxu a-haa :-
   b) Geedi ay sameeyeen ciidammada uu madax u a-haaChiang kai-shek.
   t) Geedi ay sameeyeen ciidammada uu madax u a-haa Mao.
   j) Geedi ay sameeyeen ciidammo Ingiriis ah.

10. Intii dagaalkii dunida ee labaad soconayay dalka Shiinaha :-
   b) Wuxu u kala qaybsanaa saddex talis.
   t) Waxa wada xukumay laba dawladood.
   j) Waxa u wada talisay dawlad qura.

11. Kacaanka Hantiwadaagga ee Shiinaha wuxu socday:-
   b) Sannad dhan.
   t) Shan sano.
   j) 28 sano.

12. Chiang kai-shek iyo qolooyinkii raacsanaa waxay u carareen :-
   b) Dalka Jabbaan.
   t) Jasiiradda Taiwaan.
   j) Dalka Hindiya.